Ka Faa’iideyso Su’aalo Iyo Jawaabo Aqoon Kororsi Ah:

- Waxaad sheegtaa magaca Malaga suurta afuufay oo kamid ah mallaigta
- J – Malaga suurta afuufaya waxaa la yiraahdaa ***Israa’fiil***

- S – Waxaad sheegtaa geedka ka baxa Jahanama bartankeeda?
- J – waxaa la yidhaahdaa ***Zaquum***.

- S – Waxaad sheegtaa macnaha magaca Jibriil?
- J – Macnaha Jibriil waa ***Adoon***, sida uu ku fasiray **Ibnu Cabaas**.

- S – Waxaad sheegtaa masaajidak salaada lagu tukadaa ay u dhiganto ajar cumro?
- J – Waa masaajidka ***Qubaa***.

- S- Waxaad sheegtaa maydka xalaasha ah?
- J- maydka xalaasha ahi waa ””***Ayaxa*** iyo ***Kaluunka***.

- S – Waxaad sheegtaa dhiiga xalaasha ah?
- J – dhiiga xalaasha ahi waa ***Beerka*** iyo ***Beer-yarada***.

- S – Kumuu ahaa ninkii dakhray Nebiga(NNKHA), dagaalkii Uxud?
- J – Wuxuu ahaa ***Ibnu Qimah***.

- S – Kumuu ahaa yuhuudigii Nebga(NNKHA),sixray?
- J – Wuxuu ahaa ***Lubeyd binu Acsam***.

- S – Waxaad sheegtaa ninkii jebiyey dhooshii nebiga(NNKHA), dagaalkii Uxud?
- J – wuxuu ahaa ***Cuqba binu abdi waqaas***.

- S – Waxaad sheegtaa gabadhii Alle u waxyooday?
- J – waxay ahayd Nebi muuse ***hooyadii***

- S – Waxaad sheegtaa magaalada aan cudurka daacuunku gelin?
- J – waxaa weeye Magaalada ***Madina Almunawara***.

- S – Waxaad sheegtaa suuradii sababta u ahayd inuu soo islaamo Cumar binu khadab?
- J – waxay ahayd suuradu ***Daahaa***.

- 1-Su'aal, Sheg meeshay eheed meeshii ay aayada quraanka ugu horeesay ku soo degtay? 1-Jawaab, meeshii ugu horeesay ay aayada quraanka ku soo degto waxay eheed Xiraa.

- 2-Su'aal, sheg imisa sano ayuu Quraanka soo dagaayey?2-Jawaab, Wuxu soo dagaayey 23 sano.

- 3-Su'aal, Sheg Quraanka yaa u keeni jiray Rasuulka (NNKH) Ama sidee buu ku soo gaari jiray? 3-Jawab, Rasuulka (NNKH) waxaa u keeni jiray Jabriil (CS) isagoo allahiisa ka soo qaadi.
- 4-Su'aal, Sheg kumuu ahaa Safiirkii ugu horeeyey ee uu Rasuulka (nnkh) uu madiina i diro si uu u baro Quraanka? 4-Jawaab, wuxu ahaa wuxu ahaa Muscab Bin Cumeyr (RC).
- 5-Su'aal, Sheeg asxaabtii uu Rasuulka (NNKH) u doortay inay quraanka soo dagaya uruuriyaan? 5- Jawaab, Wuxu u doortay Sayid Bin Thaabid, Ubaya Bin Kacab, Mucaad Bin Jabal, Mucaawiye Bin Abuu Sufyaan, iyo Afartii Khaliif.
- 6-Su'aal, Sheeg ninkii ugu horeeyey ee Quraanka aruuriya? 6-Jawaab, Ninkii ugu horeeyey ee Quraanka aruuriya wuxu ahaa Abuu-kabar Sadiiq (RC).
- 7-Su'aal, Sheeg sababta kaliftay in quraanka la isu soo aruuriyo hadaba sababta maxay ahayd? 7-Jawaab, Sababta waxay ahayd (Asxaabtii Quraanka xifdisaney oo dagaalada aad ugu dhimanaayey) Sida dagaalkii ka noqoshada meesha la yiraahdo Yamaama markaa waxaa laga baqay in quraanka lumo, Sidaas darteed baa dib loogu aruurshay Quraanka.
- 8-Su'aal, Sheeg kumuu ahaa asxaabigii uu abuu-bakar u xil saaray ama madax uga dhigay asxaabtii soo ururineesay quraanka? 8-Jawaab, Abuu bakar (RC) Wuxu madax uga dhigay asxaabtii quraanka soo uruurineesay asxaabiga la yiraahdo Sayid binu Thaabid.
- 9-Su'aal, Sheeg qofkii ugu horeeyey ee Islaamka u hijrooda ? 9-Jawaab, Qofkii ugu horeeyey ee Islaamka u hijrooda waa Cusmaan Bin Cafaan iyo Rukhiya muxammed rc.
- 10-Su'aal, Sheeg maxay kala yihiin muhaajiriin iyo ansaar? 10-Jawaab, Waxay kala yihiin labo (2) 1- Muhajiriin waxaa ladhahaa asxaabtii maka ka timid oo timid madiina. 2- Ansaar-na waa asxaabtii Madiina loogu yimid.
- 11-Su'aal, sheeg buurta Africa ugu dheer magaceeda? 11-Jawaab, Buurta africa ugu dheer waxa ladhahaa Kalaminjaara.
- 12-Su'aal, Sheeg Buurta kalaminjaara oo ah Buurta africa ugu dheer wadanka ey ku taalo? 12-Jawaab, Buurta Kalaminjaaro waxay ku taalaa xadka tanzania iyo kenya.

- 13-Su'aal, Sheeg, Wax marka ay siyaadaan sii naaqusa? 13-Jawaab, waa dayaxa.
-
- 14-Su'aal, Sheeg goorma ayuu geeriyooday Sayid Maxamed Cabdule Xasan? 14-Jawaab, Sayid Maxamed Cabdule Xasan wuxuu geeriyooday sanadkii 1921.
-
- 15-Su'aal, Sheeg wadankii ugu horeeyey oo Afrikaan ah diyaarad lagu weeraro? 15-Jawaab, Wadankii ugu horeeyey oo Afrikaan ah diyaarad lagu weeraro (Duqeeyo) waa Soomaaliya.
-
- 16-Su'aal, Sheeg meeshii ugu horeesay oo soomaaliya ku taal ee diyaarad lagu weeraro? 16-Jawaab, Meeshii ugu horesay oo Soomaaliya ah diyaaradna lagu weeraro waa degmada teleex ee gobolka Sool , Waxana la weeraray xiligii sayid Maxamed Cabdule Xasan ingiriisku dirirayeen.
-
- 17-Su'aal, Sheeg dagaalkii u dhaxeeyey Sayid Maxamed Cabdule Xasan iyo Ingiriiska (British) sanadkii uu bilowday iyo sannadkii uu dhammaaday? 17-Jawaab, Dagaalkii u dhaxeeyey Sayid Maxamed Cabdule Xasan iyo Ingiriisku (British) Wuxuu bilowday sanadkii 1900-kii wuxuuna dhammaaday sannadkii 1921-dii
-
- 18-Su'aal, Sheeg gobalka ugu weyn dalka Soomaaliya? 18-Jawaab, Gobalka ugu weyn Soomaliya waa Gobalka Bari, magaalo madaxdiisuna waa Boosaaso.
-
- 19-Su'aal, sheeg wadanka Afrika ugu dhulka balaadhan? 19-Jawaab, Wadanka afrika ugu dhulka balaaran Waa wadanka Suudaan (Sudan)
-
- 20-Su'aal, Sheeg Sadaam Xuseen oo ahaa madaxweynihii hore ee ciraaq sanadkii uu dhashay? 20-Jawaab, Sadaam xuseen wuxu dhashay sanadka marka uu ahaa 28- April- 1937.
- **Su'aalo iyo Jawaabo Aqoon Kororsi ah:**
- halkaan waxa idinkugu soo gudbinaaya su'aalo iyo jawaabo

  su'aal. sheeg goorma ayey u dabaal dageen muslimiinta ciidul fidriga?
  jawab. waxay u dabaal dageen sanadkii labaad ee hijriyada.

  su'aal. sheeg asxaabiga kaliya ey magaciisa quraanka lagu sheegay?
  jawab. waa zeyd bin xaarith rc.

  su'aal. sheeg asxaabigii sunta cabay hadana eysan waxba ka dhibin?
  jawab. wuxu ahaa khaalid bin waliid rc.

  su'aal. sheeg Haweentii ugu horeesay ee ka shahiida islaamka?
  jawab. waa sumeya bintu qiyaad.

su'aal.sheeg goorma ayuu abuu bakar sadiiq (rc) qabtay qaliifnimada ? imisa ayuu haayey?
jawab wuxuu qabtay markii uu geeriyooday nabiga (nnkh) wuxuuna haayey 2 sano iyo Dhowr bilood.

su'aal. sheeg asxaabiga aan wiligiis tukan.kana mid ah ahlu janada?
jawab. waa camar bin taabit rc.

su'aal. sheeg asxaabigii arkay malaa'iigta ayadoo soo dagayso xili uu quraanka aqrinaayey?
jawab. waa useyd bin xudeyr rc.

su'aal. sheeg asxaabiyadii ugu horeesay ee dishay qof gaal ah?
jawab. waa safiya bintu cabdi mudalib rc. oo eheed nabiga (nnkh) eedadiis.

su'aal. sheeg maxaa ugu qeyr badan raaxada adduunka?
jawab. waxa ugu qeyr badan raaxada adduunka xaas wanaag oo saalixad ah.

su'aal. sheeg asxaabigii hogaaminaayey dagaalkii yarmuug?
jawab, wuxu ahaa khaalid bin waliid rc.

su'aal. sheeg kuwii u sujuuday alle qeyrkiisa, isla markaana mudiciin ah?
jawab. waa malaa'iigta markii uu alle amray iney u sujuudaan nabi aadan cs.

su'aal. sheeg suurada halmar soo wada degatay iyadoo dhameystiran?
jawab. waa suuradda ancaam.

su'aal. sheeg qaadimkii nabi muuse cs?
jawab. waa yuushac.

su'aal. sheeg asxaabigii hogaaminaayey dagaalkii mu'ta?
jawab. waa zeyd bin xaarith (rc)

su'aal. sheeg dagaalkii lagu dilay zeyd bin xaarith rc, iyo jacfar bin abii daalib rc. iyo c/laahi bin rawaaxa rc?
jawab. seddexdaan asxaabi alle haga raali noqdee waxa lagu dilay dagaalkii mu'ta.

su'aal. sheeg magaca samada koowaad?
jawab. waxa ladhahaa rafiica.

su'aal. sheeg magaca samada labaad?
jawab. waxa ladhahaa maacuun.

su'aal. sheeg magaca samada seddexaad?
jawab. waxa ladhahaa musayana.

su'aal. sheeg magaca al imaam al shaafici ?
jawab. maxamed ibnu idiris ibnu cabaas ibnu cothman (abuu cabdallaah)

su'aal. sheeg haweeneydii calaan-jisay beerkii xamza bin cabdi mudalib rc?
jawab. waxay eheed hinda bintu cutbah.

su'aal. sheeg madaxweynihii ugu horeeyey ee islaamka?
jawab. waa abuu bakar sadiiq (rc).

sheeg sanadkii la-soo saaray xanjo buufiska?
jawab. waxa la soo saaray 1928-dii.

su'aal. sheeg ninki ugu horeeyey ee sameeyey teleefanka?
jawab. wuxu ahaa aleskandar garaham.

su'aal. sheeg sanadkii ugu horeeyey ee bac la-soo saaro?
jawab. waxa la-soo saaray 1909-kii.

su'aal. sheeg ninkii ugu horeeyey ee soo-saaro doorbin?
jawab. wuxu ahaa galiiliyo.

su'aal. sheeg ninkii ugu horeeyey ee sameeya diinimada dabka dhaliso?
jawab. wuxu ahaa maykal faradhaay.

su'aal. sheeg ninkii ugu horeeyey ee alifa raadiyaha magaciisa? sanadkii uu dhashay iyo wadanka uu u dhashay.
jawab. waxa la oran jiray maaarkooni. wuxu u dhashay wadanka talyaaniga. wuxuuna dhashay sanadkii 1901-dii.

su'aal. sheeg ninkii hindisay raajada magaciisa?
jawab. waxa la oran jiray doctor batham.

su'aal. sheeg qaamuuskii ugu horeeyey ee exford ah sanadkii la-soo saaray?
jawab. waxa la soo saaray sanadkii 1928-dii.

su'aal. sheeg sanadkii uu geeriyooday boqorkii Quree Victoria?
jawab. wuxu geeriyooday sanadkii 1901-dii.

su'aal. sheeg kaadida bili'aadanka imisa ayaa biyo ah?
jawab. kaadida bili'aadanka waxa biyo ah 95%.

su'aal. sheeg maxa lees-ku yiraahdaa dhirta iyo xayawaanka?
jawab. waxa leesku yiraahdaa (Noole).

su'aal. sheeg soodinta kala qeebisa qaarada AFRICA iyo qaarada ASIA?
jawab. waxa kala bara kanaalka suweys.

su'aal. sheg qarada kaliya ey maran seddex xariiqod oo kala ah 1= dhul baraha. 2=kuleelaha waqoyi. kuleelaha konfured?
jawab. waa qaarada AFRICA.

su'aal. sheeg magacii hore ee loo- aqoon jiray degmada jowhar?
jawab. waxa loo aqoon jiray Filo Raas (filadii).

su'aal. magacii hore ee loo- aqoon jiray balcad?
jawab. waxa loo aqoon jiray tay-tayley.

su'aal. sheeg sanadkii la hindisay video-gii ugu horeeyey caalamka?
jawab. waxa la hindisay sanadkii 1931-dii.

su'aal. sheeg shaqada uu qabto maqaarka bili'aadanka?
jawab, wuxu qabtaa dhididka ayuu dibada u soo saaraa.

su'aal. sheeg hal beega cufka ah?

jawab. waa kiilo garaam. Kg.

su'aal. sheeg ninkii ugu horeeyey ee sameeya baabuur?
jawaab. waxa la oran jiray kaarlo beensa.

su'aal. sheeg ninkii ugu horeeyey ee sameeyey batariga?
jawab. wuxu ahaa aleskandar foot.

1-Su’aal Sheeg Asxaabigii ugu horeeyey ee ku dhashay Magaaladda Madiina isagoo Muhaajir ah?
1-Jawab: Waxa Weye C/Laahi Bin Zubeyr Rc.
2-Su’aal Sheeg Magaca C/laahi Bin Zubeyr Hooyadii?
2-Jawab: Waxa Weye Asma Bintu Abii-bakar Rc.
3-Su’aal Sheeg maxaa lagu naaneesi jiray Asma Bintu Abii-bakar?
3-Jawab: Waxa lagu naaneesi jiray Bidaati Al-nidaaqayn.
4-Su’aal Sheeg goorma ayuu dhashay C/laahi Bin Zubeyr?
4-Jawab: Wuxu dhashay sanadkii koowaad ee Hijriyadda.
5-Su’aal Sheeg wixii ugu horeeyey ee galla laabta C/laahi Bin Zubeyr?
5-Jawab: Waxay aheyd Candhuuftii Nebigeena (NNKH).
6-Su’aal Sheeg Asma Bintu Abii-bakar markii ay geeriyoneysay Imisa jir bay aheyd?
6-Jawab: Waxay aheyd 100 sano jir.
7-Su’aal Sheeg goorma ayuu dhashay Ibnu Batuta?
7-Jawab: Wuxu dhashay 25 Febraayo 1304.
8-Su’aal Sheeg wadankee ayuu u dhashay Ibnu Batuta?
8-Jawab: Wuxu u dhashay wadanka Morooko (Marocco).
9-Su’aal Sheeg goorma ayuu geeriyooday Ibnu Batuta?
9-Jawab: Wuxu geeriyooday 1368 -1369.
10-Su’aal Sheeg Caasimadda wadanka Combodia?
10-Jawab: Waxa Weye PHNOM PENH.
11-Su’aal Sheeg Magaca lacagta laga isticmaalo wadanka Combodia?
11-Jawab: Waxa la-yiraahdaa RIEL.
12-Su’aal Sheeg magaalada Boosaaso magacii hore ee loo-aqoon jiray?
12-Jawab: Magaalada Boosaaso waxaa loo-aqoon jiray Bandar Qaasim.

13-Su’aal Sheeg Xeebta jamhuuriyada soomaaliya dhererkeeda waa imisa?

13-Jawab: Xeebta jamhuuriyada soomaaliya dhererkeedu waa 3333 km.

14-Su’aal Sheeg Ururuka midowga Africa goorma ayaa la’aas aasay?

14-Jawab: Ururka midowga Afrika waxaa la-aas aasay sanadkii 1963-dii

Kororso Aqoontaada Su’aalo iyo Jawaabo oo Diini ah iyo Aqoon Guud

Author: Sir Abdifataah Jama | 1:24 AM | No comments |

Waa barnaamij weydiin iyo war-celin ah, amaba Su’aalo iyo Jawaabo ah, oo aanu soo daabici doono inta lagu guda jiro bisha barakeysan ee Ramadaan, haddii uu Alle raali ka noqdo.

1-Su’aal Sheeg Asxaabtii Nebiga (NNKH) keebaa ugu cimri dheeraa?
1-Jawab: Waxaa ugu cimri dheeraa Aanas Bin Malik rc.

2-Su’aal Sheeg Aanis Bin Maalik rc Cimrigiisu imisa sano ayuu gaaray?
2-Jawab: Wuxu gaaray 98 ilaa 100 sano.

3-Su’aal Sheeg imisa sano ayuu Arday u ahaa Imaamu Shaafici Macalinkiisii Imaamu Maalik?
3-Jawab: Sagaal sano.

4-Su’aal Sheeg xagee buu-ku aasan yahay Imaam Axmed Ibnu Xanbal rc?
4-Jawab: Wuxu ku aasan yahay magaaladda Baqdaad ee dalka Ciraaq.

5-Su’aal Sheeg imisa jir buu markii uu geerinooyaayey Imaam Axmed Ibnu Xambal rc?
5-Jawab: Wuxu jiray 77 sano.

6-Su’aal Sheeg imaam Axmed Ibnu Xanbal duugtiisii imisa qofood ayaa ka soo qeyb gashay?
6-Jawab: waxa ka soo qeyb gashay 800,000 oo nin ah iyo 60,000 oo Haween ah. Xigasho Kutubka Tarjamatul Imam.

7-Su’aal Sheeg imisa Asxaabi ayaa ka soo qeyb gashay Qudbadii ugu danbeesay ee uu Nebiga (NNKH) ka jeediyay Xajkiisii ugu danbeeyey ?
7-Jawab: Waxa ka soo qeyb gashay 124,000 oo Asxaabi.

8-Su’aal Sheeg waa imisa Culeyks Maskaxda Bili’aadamka?
8-Jawab: Waxa weye hal kiilo iyo bar (1.5kg).

9-Su’aal Sheeg Su’aal Sheeg waa imisa boqolkiiba Culeyska maskaxda bili’aadamka marka loo-eego Culeyska jirka?
9-Jawab: waxa weye boqolkiiba 2. (2%).

10-Su’aal Sheeg imis ayaa boqolkiiba biyo ah jirka bili’aadamka?
10-Jawab: Waxa weye boqolkiiba 60 (60%) oo raga ah, iyo boqolkiiba 55 (55%) oo haweenka ah.

11-Su’aal Sheeg waa imisa culeyska maskaxda Maroodiga?
11-Jawab: Waxa weye toddoba kiilo iyo bar (7.5kg).

12-Su’aal Sheeg waa imisa caleyks maskaxda daanyeerka?
12-Jawab: Waxa weye in ka yarn us kiilo (420 gr)
13-Su’aal Sheeg waa imisa culeyska maskaxda lo’da?
13-Jawab: Waxa weye nus kiilo (500 gr).
14-Su’aal Sheeg waa imisa culeyska maskaxda Bisada (yaan-yuurta).
14-Jawab: waa 30 garaam. (30 gr).

Su’aalo & Jawaabo Diini ah

Waxaa Soo diyaariyay:

Abdimaalik Osman Adan

Email: abdimaalik10@hotmail.com

الحمد لله رب العالمين، والصلاة والسلام على سيدنا محمد الصادق الوعد الأمين، اللهم لا علم لنا إلا ما علمتنا، إنك أنت العليم الحكيم، اللهم علمنا ما ينفعنا، وانفعنا بما علمتنا وزدنا علماً، وأرنا الحق حقاً وارزقنا اتباعه، وأرنا الباطل باطلاً وارزقنا اجتنابه، واجعلنا ممن يستمعون .القول فيتبعون أحسنه، وأدخلنا برحمتك في عبادك الصالحين

أما بعـد.

Mahad Allaah (swt) bey u sugnaatay, asaga ayaanu ku mahadineynaa, asaga ayaanu kaalmo weydiisaneynaa, Ilaahay (swt) ayaan ka magan galeynaa nafteenii shararkeeda iyo camalkeenii xumaantiisii. Alle kor ahaayee,

qofkuu hanuuniya wax lumin karaa ma jiro, qofkuu lumiyana wax hanuuni karaa ma jiro. Waxaan markhaati ka ahay Ilaah kale inuusan jirin Allaah sokadiisa, waxaan qiraayaa Nabi Muxammadna inuu yahay adoonkii Allah iyo rasuukiisii.

Bacda salaan walaalyaal waxaan halkaan Hoose Idin kugu soo gudbinay su’aalo diini ah oo wato jawaabahooha, kana faa’ideysta. Wixii qaldan oo aad aragtaan E-mailka hoose noogu soo gudbiya idinkoo mahadsan.

Su’aalo Iyo Jawaabo Ku Saabsan Siiradda Suubanaha Rasuulka (csw) Iyo Saxaabadiisa (ridwaanullaahi caleyhim)

1: Dhufayl ibnu Camr Al-Dawsi wuxuu ahaa nin Sharaf leh, Gabyaa ah, Caqli badan, Qoladiisana Kaabba-Qabiil u ah. Waxa weeye. Reer Daws waxay ahaayeen dad reer Yaman ah, lehna qaab maamuloo sida Boqortooyada ah.

Dhufayl markuu Islaamay buu qoladiisii ku laabtay. Kolkuu aabbihiis oo oday da’ ahaa u tegay, buu ku yiri: ‘Iga leexo aabbe aniguna kaama tirsani adna igama tirsanide’. Wuxuu yiri: ‘Wiilkayoow maxaa dhacay’. Dhufayl wuxuu yiri: ‘Waan islaamay, waxana aan raacay diintii Maxamed ‘Sallallaahu calayhi wasallam”. Wuxuu yiri: ‘Nabiguu doonaba ha ahaadee, diintaydu waa diintaada’.

Dhufayl baa markaas yiri: ‘Hadday sidaas tahay orodoo soo qubayso, dharkaagana soo daahiri, si aan wixii la’isoo baray kuu baro’. Odayagii intuu baxay oo soo qubaystay, dharkiina soo daahirsaday, buu u yimid, markuu islaanka u sharxay, una bandhigayna wuu islaamay. Sidoo kale, Dhufayl waxa uu islaamka ugu yeeray xaaskiisii, wayna islaantay.

Qoladiisii reer Daws markii hore diinta ma aanay qaadan. Markaas buu intuu Suubbanaha ‘Sallallaahu calayhi wasallam’ u tegay ku yiri: ‘Nabigii Alloow Daws way i diideene inuu Alle balaayo ku rido u bari’.

Suubbanuhu ‘Sallallaahu calayhi wasallam’ halkuu ka habaari lahaa buu reer Daws u duceeyay, wuxuuna yiri: ‘Alloow Daws hanuuni’. Markuu u duceeyay kaddib wuxuu Dhufayl ku yiri: ‘Tolkaa ku noqo oo diinta ugu yeer una tartiibi’.

Raggii gacanta Dhufayl ku islaamay waxa kamid ahaa Abuu-Hurayra (RC).

Dhufayl siduu Qoladiisii Daws islaamka ugu baaqayay ayay tartiib tartiib u islaameen ilaa ay toddobaatan ama siddeetan Qoys oo Qoladiisa ka tirsani Madiina ula haajireen, dagaalkii Xulafadu markuu dhammaaday kaddib. Dhufayl wuxuu ku shahiiday dagaalkii Yamaama.

Su’aal 2: *Waxaad sheegtaa magacyada xayawaankada ee suuradaha Qur’aanka ku jiraan waa kuwan:*

Jawaab 2: Magacyada xayawaanka ee suuradaha quraanka ku jiro waxaa ka mid ah:

- Al-Baqara (Saca)
- An-Naxal (Shinnida)
- An-Namal (Quraanjada)
- Al-Cankabuut (Caarada)
- Al-Fiil (MAroodiga).

Waxan weliba ku deri karnaa Al-Ancaam (Xoolaha).

Su’aal 3: *Sheeg Nabigii laga soo saaray waddan afrikaan ah.*

Jawaab 3: Nabi Muuse (cs) waxana laga soo saaray Masar.

Su’aal 4: *Waxaad sheegtaan Nabiga markuu ka soo hijrooday Makka ee uu Madiina imaaday saxaabiga uu ku deggay magaciisa?*

Jawaab 4: Hijradii Nabiga (scw) ee Madiina wuxuu Nabigu (scw) ku degay guriga Abuu-Ayuub (Khaalid ibnu Zayd) Al-Ansaari oo ahaa reer Banii Najjaar .

Su’aal 5: Markuu Makka furtay Suubbanuhu Rasuulka (scw) wuxuu ciidamo u kala diray asnaamtii waaweynayd ee la caabudi jiray, siiba kuwii uu Qur’aanku sheegay ee Laata, Cuza iyo Manaat oo ugu caansanaa Jaziiradda Carabta. Cuza oo ahaa sanamkii ugu weynaa ee Quraysh oo dhami ay caabudi jirtay, wuxuu Suubbanuhu Sallallaahu calayhi wasallam u diray Khaalid ibnu Waliid (RC) oo wata 30 nin oo fardoolay ah, wuxuuna amray inuu soo dumiyo, waxaana maamulka Cuza hayay reer banii Shaybaan.

Sidoo kale sanamkii Suwaac la oran jiray oo yaallay meeshii la oran jiray Barhaad oo saddex mayl u jirtay Makka, ayna caabbudi jireen reer Hudayl, wuxuu Suubbanuhu Sallallaahu calayhi wasallam u diray ciidan uu hoggaaminayo Camr ibnu Caas (RC).

Sidoo kale sanamkii la oran jiray Manaat oo ay caabudi jireen qabiillada Aws, Khazraj, Qasaan iyo dad kaleba wuxuu Suubbanuhu Sallallaahu calayhi wasallam u diray 20 nin oo

fardoolay ah oo uu madax u yahay Sacad ibnu Zayd Al-Ashhali.

Su’aal 6: *Saxaabigii keenay fikradii ahayd in god laqoto dagaalkii Axzaab*

Jawaab 6: Wuxuu ahaa Salmaan al-Faarisi

Suaal 7: *Aayaddii waxay Qur’aanka kusoo aroortay laba jeer,*

Jawaab 7: Waa Surat al-Xijri iyo Surat al-Dariyad.

Su’aal 8: *Waxaad sheegtaa ninkii u baxay inuu Nebiga (csw) soo dilo*

Jawaab 8: Wuxuu ahaa Cumeyr binu Wahab, oo wiilkiisii oo dagaalkii Bedel lagu qafaashay nin soo deynaa iska dhigaayey. Ninkii kafaalo qaaday caruurtiisa **Cumeyr** deyntiina lagu lahaana yiri anaa bixinaa waa (Safwaan binu Umayah), go’aankaasna waxay ku qaateen iyagoo ag fadhiyay (Xijri Ismaaciil) oo ka tirsan kacbada Sharafta badan.

9) Haweeneydii calaalisay beerkii nebiga adeerkii XAMZA waxay ahayd HINDA BINTU CUTBAH oo ahayd xaaskii ABU SUFYAAN, dhashayna hogaamiyihii weynaa ee MUCAAWIYA, waxayna ahayd dagaalkii UXUD, iyadoo uga aargudaneysay mubaarasadii lagu dilay aabaheed, adeerkeed iyo walaalkeed, taas oo uu nebiga adeerkii Xamza

(RC) dhanka kale kasoo jeeday, waloow ay markii dambe soo islaamtay furashadii MAKKA.

10) Maryama Bintu Cimaran hooyadeed waa XANNAH BINTU FAAQUUD, waxayna ku qiirootay (ta’athurtay) iyadoo aragtay shimbir caruurteeda cunto siineysa, markaaseey jecleeysatay iney caruur hesho, Allena (swt) weydiisatay inuu Oowlaad siiyo waana ka aqbalay wuxuu siiyay MARYAMA BINTU CIMRAAN oo Nebi CIISE hooyadiis ahayd.

11) Waxaad sheegtaan Saciid binu caamir aljumaxi Ninkii uu arkaayay isagoo ay dilayaan kufaaru qureesh Magaalada Maka, xiligaana uu ahaa isagana mushrik?. Raggaasxaabta Nabiga (scw) kamid ah ooy Qurayshi ku dishay Makka intii aanay muslimiintu qabsan waxay ahaayeen saddex nin. Nin wuxuu ahaa: Yaasir iyo Islaantiisii Sumaya, waxa weeye Cammaar ibnu Yaasir labadiisii waalid. Ninka labaad waxa weeye: khubayb ibnu Cadiy. Ninka saddexaadna wuxuu ahaa Zayd ibnu Dathina. Waa haddii aad dil naf goyn ka waddo. Wallaahu aclam.

Su’aal 12: *Waxaad sheegtaan Aayada ugu yar Qur’aanka Kariimka?*

Jawaab 12: Waa (Thuma Nadara).

Su’aal 13: *Waxaad sheegtaan Digaalkii uu ku geeriyooday C/laahi Binu Rawaaxaa?*

Jawaab 13: Wuxuu ahaa Dagaalkii (Mu’ta).

Su’aal 14: *Waxaad sheegtaan Qaalataa imsaa Quraanka ku jirta? iyadoo uu alifka kutaagan yahay?*

Jawaab 14: 2 jeer

1. (Qaalataa ataynaa dhaa’iciina). (Surat: al-Fussilat)
2. (Qaalataa laa nasqii xattaa yasdura-Rucaa’u). (Surat: al-Qasas)

Su’aal 15: *Waxaag sheegtaan Gabyaagii Rasuulka (scw)?*

Jawaab 15: *Gabyaagii Nabigu (scw) wuxuu ahaa (Xassaan ibnu Thaabit).*

Su’aal 16: *Waxaad sheegtaan magaalada Makka saxaabadu markaay gaareen 30 qofood qiyaastii gurigee baa lagu dukan jiray si qarsooni ah? Saxaabigaas magaciis?.*

Jawaab 16: AL-ARQAM IBNU ABIL-ARQAM.

Su’aal 17: *Waxaad sheegtaan Saxabigii jaliilka ahaa oo abuu Bakar iyo Nabiga (scw) ku yiraahdeen Caano inoo lis? kadibna Saxaabigaas*

wuxuu weeydiista in uu baro waxa ay kusameeyeen Ceesaatu?

Jawaab 17: Saxaabigaa wuxuu ahaa Cabdulaahi Binu Mascuud.

Su’aal 18: *Balqiisa bintu mujaaxid yaa ugeeyay warqadii loo diray ? yaana soo arkay in ay yihii mushrikiin?.*

Jawaab 18: HUD-HUD

Su’aal 19: *Waxaad sheegtaan Asaxaabul Kahf imsaa ayay kujireen godka?.*

Jawaab 19: 309 SANO.

Su’aal 20: *Waxaad sheegtaa Masjidkii ugu horeeyay uu dhisay Nabi Muxamed (scw)?*

Jawaab 20: Masjid Al-Qubaa.

Su’aal 21: *Waxaad sheegtaan Awalu Rasuul keebuu ahaa?*

Jawaab 21: Waa Nuux (csw).

Su’aal 22: *Kalimada ama magaca **Muxammad** imisaa ku jirta Quraanka?*

Jawaab 22: 4 jeer quraanka

- (مُّحَمَّدٌ رَّسُولُ اللَّهِ وَالَّذِينَ مَعَهُ أَشِدَّاء عَلَى الْكُفَّارِ رُحَمَاء بَيْنَهُمْ) Faxi, Aayada 29-aad kafiiri

- (وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَآمَنُوا بِمَا نُزِّلَ عَلَى مُحَمَّدٍ) Muxammed, Aayada 2-aad kafiiri
- (وَمَا مُحَمَّدٌ إِلاَّ رَسُولٌ قَدْ خَلَتْ مِن قَبْلِهِ الرُّسُلُ) al-Cimraan, Aayada 144-aad kafiiri
- (مَّا كَانَ مُحَمَّدٌ أَبَا أَحَدٍ مِّن رِّجَالِكُمْ وَلَكِن رَّسُولَ اللَّهِ) Al-Axzaab, Aayada 40-aad kafiiri intaa oo kali ah ayaa ku jirta quraanka (Muxammed)

Su’aal 23: *Waxaad sheegtaa Muhaajiriintii u hijrootay magaalada Madiina qofkii ugu horeeyay oo galay kee buu ahaa?*

Jawaab 23: Abuu Salama oo looyiqiinay Ibnu Cabdi Asad.

Su’aal 24: *Waxaad sheegtaan suurada quraanka ka midka ah oonan lagu arag xarafka miim (ć)? Markii laga reebo Bisimka.*

Jawaab 24: Waa suuratul Kowthar ama inaa Acdheenaa.

Su’aal 25: *Waxaad sheegtaan Suurada iyo Aayada ay ku jirto haweeneeyda lagu xusay Quraanka kariimka ah looguna magac daray (Imra-atu kharqaa) ama (Awil kharqaa)?*

Jawaab 25: Waxaay ku jirtaa Suurada Al-Naxli Aayada 91 ee halkaa kafiiriya

Inta qofood oo isku dayday in aay kajawaabaa waa 4 qofood

- A/raxmaan D, Osman 2 ayuu kajawaabay
- Xuseen C/lle 3 ayuu kajawaabay
- Guure 1 ayuu kajawaabay
- Q,qujuc 1 ayuu kajawaaba

Su'aal 26: *Magca Al imaam Ashaaficii?*

Jawaab 26: Maxamed Ibnu Idriis ibnu Cabaas ibnu Cothmaan (Abuu Cabdulaahi) (QAZA) ayuu ku dhashay asagoo laba jir ah ayuu MAKAH yimiday (raximahulaa).

Su'aal 27: *Waxaad sheegtaa Adkaarta la aqriyo marka laga soo baxo musqusha?*

Jawaab 27: (Qufraanaka)

Su'aal 28: *Ninkii uu u bixshay Nabiga (scw) Seeyfulaahil masluul ?*

Jawaab 28: Khaalid Ibnu Waliid, 'markii laga soo laabtay Qaswatul Mu'taa laguna soo guuleeysatay ayaa magacaas loo bixiyay;'

Su'aal 29: *Imasa suurado ayaa ku bilwda xarafka (Qaaf)?*

Jawaab 29: Waa 8 suurat 'sida aan aniga u fahmay'

- Suurat 'Qaaf
- Suuratul Mujadalah'Qad Samicalaahu qowlal latii:
- Suuratul Jini ' Qul uuxiya ilaya"

- Suurat Ikhlaas ‘ Quhuwalaahu Axad’
- Suurat al-Falaq : Qul acuuthu birabil Falaq’
- Suurat an-Naas’ Qul acuuthu birabinnaas’
- Suurat al-Muminuun’Qad aflaxal muminuuna’
- Suurat al-Kaafiruun’ Qulyaa ayuhal kaafiruun’

Su’aal 30: *Waxaad sheegtaa macaga wiilkii ku hooyada ahaa nabiyullaahi Yuusuf (CS)?*

Jawaan 30: Binyaamiin binu Yacquub

Su’aal 31: *Keebuu ahaa kii sheegtay Nabinimo baadhil ah xiligii Nabi Muxamed (scw) uu noolaa? magacii uu u bixiyay?*

Jawaab 31: Museeylamatul kadaab

Su’aal 32: *Waxaad sheegtaan Afar aanan ladhalin oo qur-aanka ku jirta oo nafleey ah? hadii aan idiin bayaaniyo 2 bina aadam 2 xayawaan?*

Jawabta 32:

- Adam
- Xaawo
- Hasiishii nabi saalix
- Wankii Nabi Ibraahim

Su’aal 33: *Waxaad sheegtaan ninkii dilay Xamsa ibnu Cadulmudhalib oo Nabiga adeerkiis ahaa?*

Jawaab 33: Waxshi

Su’aal 34: *Waxaad sheegataa Beertii loo yaqiinay Xariiqatul-Moowt, Saxaabigii yiraaxday haliigu tuura aniga ayaa idin furaaye?*

Jawaab 34: baraa Binbu maalik (Rxh) waa saxaabigii minjiniiqa lagu tuuray albaabkiina furay.

Su’aal 35: *Waxaad sheegtaan Saxaabigii jaliilka ahaa oo taladiisa lagu laayay yahuudii daganeyd Madiina Reer Baynu Qureeydha ? saxaabigaas digaalkee buu ku dhaawacmay?*

Jawaab 35: ……?

Su’aal 36: *Waxaad sheegtaan aayad Quraanka ku jirta oo wax dhibic ah aan laheeyn? (Sida Shiin ama Ba’)*

Jawaab 36:

1. Wawaalidin wamaawalada. (Balad)
2. Alaahu alsamadu (Ikhlaas)

Su’aal 37: *Waxaad sheegtaan Abuu Darr al-Qafaari magaciisa?*

Jawaab 37: Jundub binu junaada

Su’aal 38: *Imsaa kujirta qur-aanka kalimada Barzakh? ama Barzakhan oo alif ku taagan? mana badna ee la socdo.*

Jawaab 38:

- Suuratul Al-Raxmaan
- Suuratul Al-Mu’minuun
- Suuratul Al-Furqaan

Su’aal 39: *Waxaad sheegtaan Furashadii Maka CIKrima Abii Jahal xageebuu u cararay?? yaa u weydiiyay in lacafiyo Cikrima?*

J**awaab 39:** Wuxuu ucararay dhinaca yemen iyo ithoobiya Xaaskiisa ayaa Nabiga (scw) u tagtay oo la oranjiray (umu xakiim bintul xaarith)

Su’aal 40: *Waxaad shegtaan khadhiibkii Rasuul (scw)?*

Jawaab 40: Thaabit ibnu Qays

Su’aal 41: *Keebuu ahaa kii rabay in uu Dilo Nabiga (scw), Una soo qaatay dhagax iyadoo Qureesh ay wada fiiranayaan Magaalada maka gudaheeda, Nabiga (scw) xiligaasna uu salaad kujiray Ilaahna kabadbaadiyay?*

Jawaab 41: Abuu-Jahal

Su’aal 42: *Magaalada Dhaa’if markuu aaday Nabiga (scw), kadib ay ku soo dhagax yeeyeen saxaabigii la socday magaciis?*

Jawaab 42: Zayd ibnu Xaaritha

Su’aal 43: *Waxaad sheegtaa saxaabigii Malaa’igta ay dhaqday digaalkii Uxud?*

Jwaab 43: Xandhala ibnu Abii-Caamir

Su’aal 44: *Waxaad sheegtaa Nabi Nuux wiil kiisii ku kharaqmay (ku dhintay) Biyihii; ALLE uu yiraahda kamid ma aha ahal kaada, sheeg magaciisa?*

Jawaab 44: Kancaan ibnu Nuux

Su’aal 45: *Waxaad sheegtaan (4) afar kamid ah magaca GEELA oo lagu sheegay quraanka?*

Jawaab45:

- Naaqa, Al-shucaraa 155
- Jamal, Al-Acraaf 40
- Baciir, Yuusuf 62,72
- Ibil, al-Ancaam 144

Su’aal 46: *Waxaad sheegtaan Magacyada 2 haween oo wada nuugiyay NABIGA (scw) iyo Xamza binu Cabdul-Muttalib?*

Jawaab 46: Waa Thuwayba, oo aheed Moolaa Abii Lahab iyo Xaliima Ibnu Abii THuweeyba.

Su’aal 47: *Waxaad sheegtaan Haweenaydii Nabiga (scw) kutiraahday waan kula dhashay (xaga nuugmada) markii laqeeybsanaayay qaniimadii dagaalkii Xuneeyn Ama Dhaa’if ?*

Jawaab 47: Shaymaa bintul-Xaarith ibnu Cabdil-Cuza (Abuu-Kabsha) .

Su’aal 48:*Thumaama ibnu aathar xagee lagu xiray xiligii lasoo qabtay?*

Jawaab 48: *Thumaama ibnu Athal Al-Xanafi waxaa lagu xiray tiir kamid ah tiirarka masjidka Nabiga (scw).*

Su’aal 49:*Yaay kusoo dagtay [Aayada 15aad ee suuradda al-Axqaaf] Sababu nuzuul keeda??*

وَوَصَّيْنَا الإِنسَانَ بِوَالِدَيْهِ إِحْسَانًا حَمَلَتْهُ أُمُّهُ كُرْهًا وَوَضَعَتْهُ كُرْهًا وَحَمْلُهُ وَفِصَالُهُ ثَلاثُونَ شَهْرًا حَتَّى إِذَا بَلَغَ أَشُدَّهُ وَبَلَغَ أَرْبَعِينَ سَنَةً قَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِي أَنْ أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ الَّتِي أَنْعَمْتَ عَلَيَّ وَعَلَى وَالِدَيَّ وَأَنْ أَعْمَلَ صَالِحًا تَرْضَاهُ وَأَصْلِحْ لِي فِي ذُرِّيَّتِي إِنِّي تُبْتُ إِلَيْكَ وَإِنِّي مِنَ الْمُسْلِمِينَ

Jawaab 49: Waxay kusoo degtay Abuu-Bakar Al-Siddiiq (RC).

Su’aal 50: *Waxaad sheegtaan, yaa kasoo waday Cabdul mudhalib magaalada Madiino xiligii uu yaraa? Yaaynan kaa hoos bixin su-aashan!*

Jawaab 50: Waxa Madiina iyo reer abtigiis Banii-Najaar kasoo waday Adeerkiis Mudhalib ibnu Cabdi Manaaf.

Su’aal 51:*Munaafiqii weeynaa Kacab Ibnu Ashraf Labadii lasoo balantay, Balantaas oo lagu rabay in lagu dilo, waana laguna dilay. Nabiga (scw) ayaana ka dalbaday in lasoo dilo, inta dishay way badan yihiin ee labada la soo gashay mucaahado ama balanta sheeg magacya dooda?*

Jawaab 51: .....?

Su’aal 52: *Waxaad sheegtaan Rumaaniyiinta ninkii ay dileen oo risaalada loogu dhiibay magaciisa? Taasoo kaliftay in lagu duulo. dagaalkii MU’TA*

Jawaab 52: .....?

Su’aal 53: *Safwaan ibnu Umayi oo ka wareejiyay farakii Qureesh dhinaca Riyaadh ayna rabeen in ay ka galaan Safarkoodu dhinacaas Shaam. Waxaa sheegtaan Saxaabigii hogaaminaayay Cidankii Muslimiinta? kaasoo soo furtay safaradii.*

Jawaab 53: .....?

Su’aal 54: *Waxaad sheegtaan Aayada Quraanka ku jirta uu ku duceeystay NABI MUUSE (cs) Markuu ka cararay Fircoon?*

Jawaab 54: .....?

Su’aal 55: *Waxaad sheegtaan Sababu nuzuulka [aayada ku jirta suuradda an-Najmi, 33] ninka ay kusoo dagtay?*

أَفَرَأَيْتَ الَّذِي تَوَلَّى

Jawaab 55: .....?

Su’aal 56: *Waxaad sheegtaan Digaalkii Uxud Saxaabigii u hor bilaabay Mubaarazada?*

Jawaab 56: al-Zubayr ibnul-Cawwaam (Xawaarigii Rasuulka (scw) ahaana ina Safiya bintu Cabdil-Mudhalib Suubbanaha Rasuulka eeddadiis.

Su’aal 57: *Waxaad sheegtaan Afarta Khulafaa u raashidiin?*

Jawaab2:

- Cabdullaahi (Abuubakr) ibnu Abii-Quxaafa (Cabdullaahi).
- Cumar (Abuu-Xafs) ibnulKhadhaab.
- Cusmaan (Dul-Nuurayn) ibnu Caffaan
- Cali (Abul-Xasan ama Abuu Turaab) ibnu Abii-Dhaalib.

Su’aal 58: *Waxaad sheegtaan Kaanataa oo Alifka kutaagan Imsaa kujirta qur-aanka? Xasuuso su-aashii hore waxaay aheed Qaalataa!*

Jawaab3:

- كَانَتَا رَتْقًا فَفَتَقْنَاهُمَا [Suuradda al-Ambiyaa, 30]
- كَانَتَا تَحْتَ عَبْـدَيْنِ مِنْ عِبَادِنَـا صَـالِحَيْنِ [Suuradda at-Taxriim. 10]

Su’aal 59: *Waxaad sheegtaan xarfaha isku xiran oo ugu badan Qur-aanka? Tusaale>> (Lacalakum) waa 5 xaraf. (Xamii) waa 2 xaraf.*

Jawaab 59: Waxaa ugu badan 10 xaraf isku xiran (لَيَسْتَخْلِفَنَّهُم) [Suuradda an-Nuur Aayada 55]

Su’aal 60: *Waxaa sheegtaan saxaabiga kaligii lagu sheegay Quraanka magaciisa? Iyo qofka aanan dhalin oo loogu magacdari jiray?*

Jawaab 60`: Zayd ibnu Muxammad

Su’aal 61: *Meeymuuna Bintu xaarith Zoowjatu RSC. Markii uu guursanaayay wuxuu udiray Jacfar Binu Abiidhaalib oo uu yiraahday ii la soo hadal in aan guursado ayaa rabaa . Waxaad sheegtaan Meymuuna markii ay ogalaatay Nabiga (scw) Qofkii*

ay wakiilatay oo ay tiraahday masuul ayuu iga yahaay?

Jawaab 61: Cabbaas ibnu Cabdil-Mudhalib Nabiga (scw) adeerkiis oo qabay walaasheed Ummu-Fadli.

Su’aal 62: *Safiya binu xuyayi Zoowjatu RSC. Markuu guursaday wuxuu ku arkay nabar ama midib kaga yeelay Wajiga, Wuuna weeydiiyay kadib way usheegtay, Ee sheeg jawaabtii ay kabixisay?*

Jawaab 62: Rasuulkii Alloow intaadan noo imaan waxaan ku riyooday dayaxa oo intuu meeshiisii kasoo go’ay dhabtayda kusoo dhacay, anigoo Ilaah baan ku dhaartaye arrinkaaga (Nabinimadaada) waxba ka ogayn. Waxaan markaas uga sheekeeyay ninkaygii (Kinaana binul-Rabiic bin Abil-Xuqayq oo Yahuudi ahaa). Markaas intuu wejiga iga dharbaaxay ayuu igu yiri: Wallaahi wax kale maahee waxaad jeclaan lahayd in boqorkaas Yathrib (Madiina) joogaa uu ninkaagii noqdo).

Su’aal 63: *Waxaad sheegtaan Safiirkii ugu horeeyay Cusmaan Binu Cafaan inta aan loo dirin Magaalada Makka. Waxaa diiday nin saxaabi ah oo ka cudur daartay oo yiraahday Yaa Rasuululaah*

aniga magaalada Makka Ehel iima joogan ee u dir Cusman binu Cafaan keebuu ahaa Saxaabigaas?

Jawaab 63: Cumar ibnul-Khadhaab (RC).

Su’aal 64: *Waxaad sheegtaan Aayada 118 Suuratu Al- Towba, Sadaxda Saxaabi ay ku soo degtay magacyadooda?*

Jawaab 64: Waa raggii ka dib dhacay duullaankii Tabuuk, waxayna kala ahaayeen:

1. Kacab ibnu Maalik,
2. Muraara ibnu Rabiica iyo
3. Hilaal ibnu Umaya (RC).

Su’aal 65: *Waxaad sheegtaan Aayada quraanka ugu dheer ? Suurada ay kujirta?*

Jawaab 65: Waa Aayadda ku jirta [Suuradda al-Baqarah, Aayadda 282]

يَـا أَيُّهَـا الَّذِينَ آمَنُـواْ إِذَا تَـدَايَنتُم بِـدَيْنٍ إِلَى أَجَـلٍ مُّسَمًّى فَـاكْتُبُوهُ وَلْيَكْتُب بَّيْنَكُمْ كَـاتِبٌ بِالْعَـدْلِ وَلاَ يَـأْبَ كَـاتِبٌ أَنْ يَكْتُبَ كَمَـا عَلَّمَـهُ اللّهُ فَلْيَكْتُبْ وَلْيُمْلِـلِ الَّذِي عَلَيْـهِ الْحَـقُّ وَلْيَتَّقِ اللّهَ رَبَّهُ وَلاَ يَبْخَسْ مِنْهُ شَيْئًا فَإِن كَانَ الَّذِي عَلَيْهِ الْحَقُّ سَفِيهًا أَوْ ضَعِيفًا أَوْ لاَ يَسْتَطِيعُ أَن يُمِـلَّ هُـوَ فَلْيُمْلِـلْ وَلِيُّهُ بِالْعَدْلِ وَاسْتَشْهِدُواْ شَهِيدَيْنِ مِن رِّجَالِكُمْ فَـإِن لَّمْ

يَكُونَا رَجُلَيْنِ فَرَجُلٌ وَامْرَأَتَانِ مِمَّن تَرْضَوْنَ مِنَ الشُّهَدَاءِ أَن تَضِلَّ إِحْدَاهُمَا فَتُذَكِّرَ إِحْدَاهُمَا الْأُخْرَى وَلاَ يَأْبَ الشُّهَدَاءُ إِذَا مَا دُعُواْ وَلاَ تَسْأَمُوْا أَن تَكْتُبُوهُ صَغِيرًا أَو كَبِيرًا إِلَى أَجَلِهِ ذَلِكُمْ أَقْسَطُ عِندَ اللّهِ وَأَقْوَمُ لِلشَّهَادَةِ وَأَدْنَى أَلاَّ تَرْتَابُواْ إِلاَّ أَن تَكُونَ تِجَارَةً حَاضِرَةً تُدِيرُونَهَا بَيْنَكُمْ فَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ أَلاَّ تَكْتُبُوهَا وَأَشْهِدُواْ إِذَا تَبَايَعْتُمْ وَلاَ يُضَارَّ كَاتِبٌ وَلاَ شَهِيدٌ وَإِن تَفْعَلُواْ فَإِنَّهُ فُسُوقٌ بِكُمْ وَاتَّقُواْ اللّهَ وَيُعَلِّمُكُمُ اللّهُ وَاللّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ عَلِيمٌ

Su’aal 66: *Waxaad sheegtaan Hashii Nabiga (scw) oo aheeyd Qaswaa markii ay kiciweeyday in aay usocoto dhinaca Maka, ooy yiraahdeen saxaabada hashii Nabiga way kici weyday (way tugsatay) oo way daashay, muxuu ugu jawaabay?.*

Jawaab 66: (Ma ay tugsan dabeecaddeedna ma aha ee waxaa xabbisay wixii (Maroodigii asxaabul fiil ee Abraha xabbisay).

Su’aal 67: *Waxaad sheegtaan saxaabigii Saddex jeer kula baayactamay Geeri Beeycatu Ridwaan keebuu ahaa?.*

Jawaab 67: Salama ibnul Akwac ayaa kamid ahaa raggii geeri kula baayactamay Rasuulka (scw) markii Cismaan ibnu Cafaan (RC) oo Makka loo diray uu soo laaban waayay oo

waa ladilay suuqa la geliyay, laakiin saddex jeer inay ahayd ma hubo. wuxuu lagal 3 jeer ninkaas Salama ah.

Su’aal 68: *Waxaad sheegtaan Imisa Caruur ayuu dhalay Nabiga (scw)?*

Jawaab 68:

- Faatima bintu Muxammad
- Zeynab bintu Muxammad
- Ruqiyah bintu Muxammad
- Ummu-Kaltuum bintu Muxammad
- Ibraahiim ibnu Muxammad
- Qaasim ibnu Muxammad
- Cabdullaahi ibnu Muxammad

Lixda hore waxa dhashay Ummul-Mu’miniin Khadiija (Ummu Hinda) bintu Khuwaylid bin asad bin Cabdul-Cuza bin Qusay ibnu Kilaab (RC). Ibraahim isaga waxa dhashay Maariya Al-Qibdhiya (RC).

Su’aal 69: *Waxaad sheegtaan Suuradda Ka sheekeeyneeyso wixii ku dhacay Reer Banu Nadiir? Yahuudii daganeed madiina.*

Jawaab4: Suuradda waa Suurat al-Xashri raqamka 2aad.

بسم الله الرحمن الرحيم

سَبَّحَ لِلَّهِ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الأَرْضِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ۝
هُوَ الَّذِي أَخْرَجَ الَّذِينَ كَفَرُوا مِنْ أَهْلِ الْكِتَابِ مِن دِيَارِهِمْ لِأَوَّلِ الْحَشْرِ مَا ظَنَنتُمْ أَن يَخْرُجُوا وَظَنُّوا أَنَّهُم مَّانِعَتُهُمْ حُصُونُهُم مِّنَ اللَّهِ فَأَتَاهُمُ اللَّهُ مِنْ حَيْثُ لَمْ يَحْتَسِبُوا وَقَذَفَ فِي قُلُوبِهِمُ الرُّعْبَ يُخْرِبُونَ بُيُوتَهُم بِأَيْدِيهِمْ وَأَيْدِي الْمُؤْمِنِينَ فَاعْتَبِرُوا يَا أُولِي الأَبْصَارِ
وَلَوْلا أَن كَتَبَ اللَّهُ عَلَيْهِمُ الْجَلاء لَعَذَّبَهُمْ فِي الدُّنْيَا وَلَهُمْ فِي الآخِرَةِ عَذَابُ النَّارِ ۝
ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ شَاقُّوا اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَمَن يُشَاقِّ اللَّهَ فَإِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ ۝

Su’aal 70: *Waxaad sheegtaan kalimad Quraanka kamid ah oo Suurad ku dhamaato Suuradna ka bilaabato? (Waa kalimad is wadato sida suuratul Ikhlaas ay ugu dhamaato (Axadun)).*

Jawaab 70- 1aad: Al-Xamdu lil-Laahi Rabbil-Caalamiina. Waxa ku dhamaata suuradda Al-Zumar (39), waxana ka billaabata Suuradda Al-Faatixa (1).

Jawaabta 70 2aad: Fajri ama walfajri >> waxaay kabilaabataa suurada al-fajri. Waxayna ku dhamaataa Suuratu Al-qadri, oo ah Xataa madhlacil fajri.

Su’aal 71: *Rasuulka (scw) Wuxuu lahaa Shaabad ama Stanbo taasoo makuu rabo in uu warqad udiro boqadaga sida Boqprkii Najaas oo kale wuxuu warqada ayuu ku dhufani jiray Shaabad, Ee waxaad sheegtaa Stambadaa wixii ku qornaa iyo sida ay u qornaayeen??*

Jawaab 71: Waxaa ku qornaa Muxammadu Rasuul-allaah (Rasuulullaah), wayna is korsaarneyd oo waxay u qorneyd sidan:- waxaa u koreeyay Allah waxaa xigay Rasuul waxaana ugu dambeeyay Muxammed.

Su’aal 72: *Boqorkii Muqowqas wuxuu u soodiray Rasuulka (scw) 2 haween (gabdhood) hadiyo ah. Nabiga (scw) mid kamid ah wuu guursaday oo waa Maariya, ee waxaad sheegtaa saxaabiga la siiyay gabdhii kale??*

Jawaab 72: Waxaa la siiyay saxaabigii Xassaan ibnu Thaabit.

Su’aal 73: *Waxaad sheegtaan Haweeneeydii ama gabadhii u horeeysay oo rumeeyso Rasuulka (scw)?*

Jawaab 73: Waa Khadiijo bintu khuweylad.

Su’aal 74: *Waxaa sheegtaan (3) Sadax Suuradood oo xarafka KAAF aan kujirin???*

Jawaab 74: Waa suuradaha soo socda:

- Suuratu al-Casr
- Suurat Qureysh
- Suurat al-Falaq

Su’aal 75: *Waxaad sheegtaan Suurat Al-Kahfi imisa qiso ayaa ku soo aroortay?*

Jawaab 75: Waa afar qiso waxeyna kala yihiin:

- Qisadii asxaab al-kahf
- Qisadii labada nin ee muslim & mushrik kala ahaa, oo kan mushrika ahaa wuxuu ugu faanay bertiisa kii kale.
- Qisadii Nabi Muuse (cs) iyo Qadir.
- Qisadii Dul-Qarneyn.

Su’aal 76:*Waxaan ogsoonahay in Salaada loo soo dhiibay Nabiga (scw) Markii la dheelmiyay uuna Gaaray (Sidratul Muntaha), Ee Xageebuu joogay Nabiga (scw) Magaaladee? Goortay soo dageen Axkaanta inteeda kale ??*

Jawaabl 76: *Axkaamta inteeda kale waxay soo degeen intii uu Nebigu (scw) uu joogay magaaladda Madiina.*

Su’aal 77: *Waxaad sheegtaan 3 Waqti (ama maalmo ah,) oo la reebay in la soomo???*

Jawaab 77:

- maalinta ciidul-atxaa
- maalinta ciidul fidr ah.
- maalmaha Sabtiga iyo Jimcada, haddii aaynan taxana aheen?

Su’aal 78: *Waxaad sheegtaan 8 kamid ah waxyaalaha buriyo Soonka ???*

Jawaab78: Waxaa kamid ah:

1. Cunitaanka.
2. Cabitaanka.
3. Jamaaca.
4. Ridoobid.
5. Xaydhka.
6. Nifaaska.
7. Kas leysku matajiyo.
8. Waalida. iyo Cirbid la-isku mudo taa soo siisa nafaqo jirkaada.

Su’aal 80: *Waxaad sheegtaan magaalada Makka inta magac oo loo yaqaano?*

Waxaa loo yaqaanaa:

- Makkah,
- Bedul-alamiin,
- Umul al-quraa,
- Bakkah,
- Bedul-alxaraam.
- iyo Balad.

Su’aal 81: *Qofkii hurdo ka soo toosa aroortii isaga oo janaabo qabo ma soomi karaa? oo soon kiisii ma sii wadan karaa?*

Jawaab: Haa qofkaasi waa sii wadan karaa soon kiisa.

Su’aal 82: *Waxaad sheegtaan Malakul-Jibriil bishee buu u imaan jiray Nabiga (scw) oo uu quraanka u meerini jira isaga oo la dhameeynaayo quaanka oo dhan?*

Jawaab 82: Bisha ramadaanka

Su’aal 83: *Abuu_Bakar Al-Sidiiq goormay loo bixiyay naaneystaas ama (kunyadaas) ah al-Sidiiq?? Yaana u bixiyay? Makii loo sheegay Nabiga scw in la dheelmiyay kadibna uu yiraahday waa runtiis. Nabiga (scw) ayaa u bixiyay.*

Jawaab 83: Nabiga (scw) ayaa u bixiyay kunyada (as-Siddiiq)

Su’aal 84: Afarta Imaamul madhab, Mid kamid ah ayaa isagoo yar oo Cilma Barasho kujira ayuu wuxuu ku qaldami jiray Mas-alo Fiqi ah , wuxuu maqli jiray in ay janaabadu Qusli waa jibiso, Kadib Markastoo Calooshiisa Qululuc tiraahdaba wuu qabeeysani jiray. Ee kee buu ahaa ????

Jawaab: Wuxuu ahaa Imaamu Al-Nabawi

Su’aal 85: Waxaad sheegtaan Soonka Sunaha ah keebaa ugu ajirbadan ?

Jawaab: Waa Soonka Maalinta Yoomul Carafa.

Su’aal 86: Imisaa ku jirta Quraanka YAA AYUHANAASU ??

Jawaab: Waa 20

- Al-Baqara – 2, 168
- Al-Nisa – 1, 170, 174
- Al-Acraaf -158
- Yuunis – 23, 57, 104, 108
- Al-xaj – 1, 5, 49, 73
- Al-Naml -16
- Luqmaan – 33
- Faadir – 3, 5, 15,
- Al-Xujuraat – 13

Su’aal 87: *Nabiga (scw), 2 Goor ayuu ku yiraahday Abuu-Bakar Al-Siddiiq ((LAA TAXZAN)) Ee*

waxaad sheegtaan labadaas dhacdo goortii ay dhaceen?

Jawaab 87 1aad: Waa markii ay galeen godka ooy Kufaaru Qureesh ay soo dul istaageen oo uu yiraahday Abuu Bakar Yaa rasuulalaah hadii ay fiiriyaan Lugahooda hoostooda way na arkayaan markaasuu yiraahday NABIGA SCW LAATAXZAN INALAAHA MACANAA

Jawaab 87 2aad: Waa markii uu kadabatagay Suraaqa Binu Maalik isagoo doonaya in uu soo qabto NABIGA SCW iyo Saaxibkiis Abuu Bakar Markii uu ku soo dhawaaday oo uu maqlay Suraaqa akhriska uu akhrinaayo NABIGA SCW ayuu Abuu Bakar ku yiri Yaa rasuulalaah waa uu nasoogaaray, markaasuu ku yiri (Laataxzan Inalaaha Macanaa)

Su’aal 88: *Quraanka Imsaa suuradood ayaa ka bilaabato (al-Xamdulilaah) ??*

Jawaab 88: Waa 5 suuradood:

1. Faatixa
2. Ancaam
3. Kaahf
4. Faadhir
5. Saba

Su’aal 89: *Waxaad sheegtaan Sannadkii Caamulxusni oo ahaa sanadkii 10aad ee Bicthada Nabiga (scw) oo ay geeriyoodeen Khadiija iyo Abuu Dhaalib ee Sheeg Dhacdadii Dacdadaas kadanbeeysay oo fooshaxumeed?*

Jawaab 89: Waxaa ka danbeeyay dhacdadii lagu faqooqay Reer Binu Haashim iyo bani Mudhalib ooy saaraeen Cunaqabateey 2 ilaa 3 Sano. Kadib uu Illaah ka qaaday dhibkii ay ku hayeen, iyadoo lagu diray aboor warqadii ay qoreen, aboorkana wuxuu ka tagay (BISMIKALAAHUMA) oo kali ah, Nabigana (scw) waxyi ayaa loogu sheegay.

Su’aal 90: *Beecatul Caqabati-uulaa Balantii labaad, Markii ay la galeen Nabiga (scw) Reer madiina Ansaar. Kee buu ahaa ninkii laga qabsaday iyagoo u sii socdo Magaaladoodii madiina? Waxaana ka qabsaday Kufaaru Qureesh oo ka daba tagtay.*

Jawaab 90: Wuxuu ahaa Sacad Ibnu Cubaada

Su’aal 91: *Ku saabsan Soonka qofkii sameeyo galmo maalin soon ah waxaa laga rabaa Kafaara gud ee waxaad sheegtaa Kafaara gudka laga rabo?*

Jawaab 91: Wuu danbaabay qofkaas oo waxaa laga doonayaa in uu kafaara gud sameeyo, waa sidan ka faara gudka

1. Adoon in la xureeyo
2. Laba bilood oo xiriir ah in uu soomo
3. In uu quudiyo 60 Miskiin

Su’aal 92: *Waxaad sheegtaan sannadkii ugu danbeeyay oo laga xarimar gaalada in ay u soo xajiyaan Xaramka? Sannad kaas yaa soo xajjisiiyay saxaabada oo madax u ahaa?*

Jawaab 92: Abuu-Bakar Al-Sadiiq RC, Waana sanadkii 9aad ee Hijriyada.

Su’aal 93: *Waxaad sheegtaan [aayada 122 ee Suuradda Aali Cimraa], Labada Qolo oo ay kusoo dagtay magacyadooda sheeg? Iyo digaalkii ay kusoo dagtay?*

إِذْ هَمَّت طَّائِفَتَانِ مِنكُمْ أَن تَفْشَلاَ وَاللَّهُ وَلِيُّهُمَا وَعَلَى اللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ الْمُؤْمِنُونَ

Jawaab 93: Waxaay ahaayeen Reer Binu Xaarith oo Aaws ah iyo Reer binu Salama oo Khazraj ah. Waana dagaalkii Uxud. Markii uu la noqday 300 oo nin munaafiqii weeynaa C/laahi Ibnu Umay ibnu Salool, ayay baqeen iyagana.

Su’aal 94: *Umahaatul mu`miniina ama haweenkii Rasuulka (scw) teebaa ugu da`yareed?*

Jawaab: Caaisha bint Abiibakar. Markuu la aqalgaley waxey jirtey 9 sanno.

Su’aal 95: *Waxaad sheegtaan saxaabigii ugu horeeyay oo loo diro magaalada Madiina si uu u baro Quraanka?*

Jawaab 95: Saxaabi dhalinyaro ah oo la oran jirey Muscab lbnu Cumair

Su’aal 96: *Nabiga (scw) Markii uu ka geeriyooda wiilkiisii Qaasim ayay gaaladu yiraahdeen kani waa gablamay ee iska dhaafo, Nabiga (scw) aad ayuu ugu xumaaday hadalkaas, kadib waxaa kusoodagtay suurad kaamil ah ee sheeg suuradaas magaceda?*

Jawaab: Suuratul kauthar: Kauthar waa webi ama fardaan weyn oo Ilaahey abaalgud ku siiyey Nabiga csw. Waxaa kale oo lagufasiray kheer oo dhan. waxaana soo galaaya kheeyrkaas Kowtharka laftiisa.

Su’aal 96: *Waxaa dhici doonta in ay muslimiinta aduunka ay qabsanayaan oo Yahuuda la laaynidoona Geed kasto oo ay galaan ama ay kugabadaan wuxuu dhihi doonaa war nin Yahuud*

ah ayaa halkan ku gabanaayo ee kaali dil. Su-aashu waxaay tahay waxaa jira Geed Geedaha kamid ah oo u hiilini doona Yahuuda oon Qarinidoona, ee sheeg Geedkaas magaciisa??? Yahuuda Xiligan hada ah ayay beertaa (ku abuurtaa) meelkasto.

Jawaab 96: Geedkaa waxaa la yiraa Garqad ama Qarqad.

Su'aal 97: *Baadaad imisa qofood ayuu u diray in la soo qabto Nabiga (scw)?*

Jawaab 97: Baadaan inuu magucu ahaa ayaan filayaa wuxuu u diray laba ruux.

Su'aal 98: *Waxaad sheegtaan Siddii ay u daaweeysay Caa'isha Rasuulka (scw) oo ay ugu sameeysay dhiigjoojinta markii uu ku dhaawacmay dagaalkii Uxud?*

Jawaab 98: Horaa looga jawaabay.

Su'aal 99: *Waxaad Sheegtaan waxa ku waajibay qofkii ugu yeera qof kaali aan ciyaarne qamaar?*

Jawaab 99: Qofkii qof ugu jeera iney qamaaraan ama qamaar ciyaaraan wuxuu bixinayaa saddaqo sida ka sugnaatay Nabiga (scw).

Su’aal 100: *Waxaad sheegtaan qofkii sooma raacsiiya 6 maalmood oo soon ah bisha Shawaal ajarka uu ka helaayo?*

Jawaab 100: Qofkii Ramadaanka sooma ee raaciya 6 maalmood ee ka mid ah bisha Shawaal wuxuu la mid yahay qof soomay sannadka oo dhan.

Su’aal 101: *Waxaad sheegtaan Cabdullaahi ibnu Maktuub RC makuu Nabiga (scw) u yimid uu yiraahday yaa Rasuulallaahi i bar wuxuu Alle ku baray uuna ka jeestay Rasuulka waxaa ku soo dagtay Suuratul Cabasa ee sheeg dadkii uu la shiraayay Nabiga (scw)?*

Jawaab 101: Nabiga wuxuu la shirayey 3 qofood oo ay ka mid ahaayeen Cabaas bin Cabdulmudhalib, Ubayah bin Khalf, Cutba, abii Jahal iyo sheeyba ibnu abii Rabiica oo ahaa hogaamiyayaasha ugu qoora buuranaa Qureysh qaqtigaa. Suurada waxey marka ku siineysaa in uu Ilaahey jecleysan sida rasuulka ula dhaqmey ninkii indhoolahaa ahaa ee u yimid, hase ahaatee marka aad suurada dhemeyso waxaa dereemeysaa iney ku aadaneyd hogaamiyayaasha quresh oo isla weynida ka muujiyey iney xaqa raacaan oo Nabiga (csw) rumeeyaan.

Su’aal 102: *Waxaad sheegtaan Quraanka waxaa ku qoran inuu Illaah ku sheegay in uu quraanka uu dhigay 3 meel ee sheeg saddex daas?*

Jawaab 102: Tusaale ahaan midkamid ah Quraanka waxaa lagusoo dajiyay Nabigeena Muxamed SCW oo umadiisa ayaa akhriso oo kudhaqanta oo Illah wuxuu yiraahday:

1. (Inaa Anzalnaahu Quaanan Carabiyan Lacalakum Tacqiluuna) aayada 2aad ee Suuratu Yuusuf.
2. Waxaa la dhigey Carshiga, Daliil waxaa u ah (Balhuwa quraanun majiidun fiilooxin maxfuudin).
3. Tan Seddexaad waa tan tilmaameeysa (Kiraamin Bararatin iyo aayadaha kadanbeeya ayaa tilmaamaayo) Suuratul Cabasa.

Su’aal 103: *Laba ama saddex meelood oo mamnuuc ka ah in lagu dukado salaadda?*

Jawaab 103: Meelaha aan lagu tukan karin waxaa kamid ah:

1. Qubuuraha,
2. Xerada geela,, ama meesha lagu waraabiyo, kawaanka hilibka, Musqulaha,
3. Iyo jid dhexdiis, gebi ahaan toodana axaadiis baa ku soo aroortey

Su’aal 104: *Nin kee buu ahaa ninkii uu yiraahday Nabiga (scw) Muslinka god laba jeer lagama qanino? uu amray in la soo dilo.*

Jawaab 104: Wuxuu ahaa Abaa Ciisa Al-Jumaaxi oo ay musliiintu qabatey dagaalkii bader, ka gadaal markii uu u dan sheegtey Rasuulka, wuxuu dhalayna Gabdho badan, kadib leyska cafiyey, balana qaadey inuusan muslimiinta dagaal kaga hor imaan doonin.

Hase ahaatee wuu jebiyey oo dagaalkii Uxud buu ka qeyb qaatey waana lagu qabtey. Markii rasuulka (csw) loo keeney buu yiri Maxamadow i fakso mar kalena dagaal muslimiinta ugu hor imaan maanyo. Nabiga wuxuu ku yiri ‘ Mar labaad Makka maku baashaaleysid, nin mu’mina laba jeer god lagama qaniino. Wuxuuna amrey in la dilo.

Su’aal 105: *Beeycatu Al-Nisaa bacda fatxu Makka Nabiga (scw) wuxuu yiraahday (Walaataqtuluu oowlaadakum) Hidu Bintu Cutba waxaay tiraahday Caruurtii aan korinay oo weeynaaday waxaad ku laayseen digaal, Ee waxaad sheegtaan wiilkeedii lagudilay digaalkii Badar magaciisa?*

Jawaab 105: Wuxuu ahaa Handhala binu Abii sufiyaan oo curadkii Hinda bintu Cutba ahaa, Suuratul AL-Mumtaxina Aayada ugudanbeeysa ayaa tilmaameeysa waxaadna ka

heleeysaa Tafsiirka Al-Qurdhubi. Maka heleesiid Ibnu kathiir, Jalaaleeynka iyo Dhabari.

Dagaalkii Badr waxaa lagu diley Hind aabaheed Cutba inb Rabiica, adeerkeed Xudeyfa ibn Rabiica iyo walaalked Waliid ibn Cutba ee ma garanayo meel wiilkeeda lagu diley Badr. Wiilkeeda Mucaawiya ibn abii Sufyaan waa ninkii bilaabey xukunkii Ummawiyiinta.

Su'aal 106: *Khoolatu Bintu Thaclaba nin keedii qabay ayaa wuxuu yiraahday, [Anta kathahri calaya umii], (oo macnaheedu yahay hooyadeey ayaad iga tahay oo waan kufuray), Sababtuna waxay sheegayaan bacdi riwaayaadka in uu soo galay gurigiisa, Islaantiisa oo salaadda dukaneysa kadibna uu niyeystay in uu jamaaco uu u tago, wuxuu is celiyaba markay dhameeysatay salaadeedii ayuu ku yiraahday kaali (jamaac) waxaay tiraahday cibaado ayaan ku jiraa ee iga leexo.*

Kadib uu furay oo uu yiraahda hadalka aan kor ku soo sheegnay, Nabiga (scw) markii ay u tagtay oo ay u sheegtay wuxuuna ku yiraahday waad furantahay (qiil kuuma hayo)

waxaa soo dagay aayado Quraan ah oo tilmaamayo in ay furneen Khoowla.

”Haddaba sheeg suurada ay kujiraan aayadahaas?”

Hadalkaasna waxaa la dhihi jiray waagii jaahiliyada hada waa mamnuuc in aad ku tiraahdii xaaskaada mana ku furanto.

Jawaab 106: Waa biloowga Suurada Al-Mujaadala (Qasamicala)

Su’aal 107: *Ninkii Ilaaheey uu ku sheegay quraan kiisa oo ahaa Waliid Binu Muqiir oona lagu tilmaamay inuu WACAL yahay Waladuzinaa iyo dhowr kalmadood oo foolxun uulahaana lagusheegay quraanka, wuxuuna dhalay Khaalid Binu waliid. Waxaad sheegtaan Suurada lagu sheegay? Wiilasha uu dhalay oo lagu qiyaasay in ay garayeen dhoowr iyo toban ama 10 Imisaa kasoo muslintay?*

Jawaab 107: Waxaa lagu sheegay [Suurada Al-Qalam Aayadaha 10 ilaa iyo 16]

وَلا تُطِعْ كُلَّ حَلَّافٍ مَّهِينٍ ۝
هَمَّازٍ مَّشَّاءٍ بِنَمِيمٍ ۝

مَنَّاعٍ لِّلْخَيْرِ مُعْتَدٍ أَثِيمٍ ۝
عُتُلٍّ بَعْدَ ذَٰلِكَ زَنِيمٍ ۝
أَن كَانَ ذَا مَالٍ وَبَنِينَ ۝
إِذَا تُتْلَىٰ عَلَيْهِ آيَاتُنَا قَالَ أَسَاطِيرُ الْأَوَّلِينَ ۝
سَنَسِمُهُ عَلَى الْخُرْطُومِ ۝

Su'aal 108: *Waxaad sheegtaan Ninkii lagusheegay [Suurat Qaafir Aayada 28aad] magaciisa? iyo Reer Qibdhi miyuu kadhashay Mise Reer Binu israaiil?*

Jawaabta 108: Magaciisa waxaa la yiraahdaa Samcaan, wuxuuna ka dhashay Reer Qibdhi.

Su'aal 109: *Waxaad sheegataan 12 Rakacadood oo sunatul mu-akida Sunada la adkeeyay ah? Qofkiin joogteeyana Ilaah ayaa janada uga dhisaaya guri sida xadiithka ku soo aroortay.*

Jawaabta 109: Waa sidatan:

- 4 Ka horeeysa duhurka iyo 2 ka danbeeyso
- 2 Ka danbeeyso Maqrib
- 2 Ka danbeeyso Cishaha
- 2 Ka horeeysa Fajarka Salaada subax.

Su’aal 110: *Waxaad sheegtaan duulaankii ugu danbeeyay ama Khazwadii ugu danbeeysay inta uusan geeriyoonin Rasuulka (scw)?*

Jawaabta 110: Waa Khazwadii ama duulaankii Tabuuk.

Su’aal 111: *Kufaaru Qureesh saxaabiga la dilay oo ay doonee in ay ka soo gooyaan gabal Jir kiisa kamid ah si ay u gartaan in uu isaga yahay iyo inkale, Rabina uu kaga badbaadiyay shini, shinidaasoo waardiya ka qabatay in ay maydka saxaabigaa aynan gaaladu qaadanin, saxaabigee ayuu ahaa?*

Jawaab 111: .....?

Su’aal 112: *Waxaad sheegtaa dagaalkii Khandaq ama Axzaab 3 mucjiso oo kamid ah mucjisooyinkii Nabiga (scw)?*

Jawaab: 112: .....?

Su’aal 113: Waxaad sheegtaan ninkii ugu horeeyay oo la dilay saxaabadii loo diray in ay soo baraan Quraanka reer baadiyihii Ahlu Najda ahaa, Gaarayay sida laysku waafaqsan yahay 70 Nin kadib ay dileen dhamaantood wuxuu fariin u waday nin la orani jiray Caamir Binu Aldhufeeyl, kadibna uu u diray nin dila, markuu dhabarka waran kaga dhuftay, ayuu saxaabigii yiraahday Fusdu Warabul Kacbi.

Jawaab: 113: ……..?

Su’aal 114: Reer Baniqureeda goortii ay duldageen Saxaabada oo ay u timid Cabsi daran Ninkii la dhihijiray Kacab ibnu Asad oo ahaa Madaxdoodii ayaa wuu u soo jeediyay 3 arimood oo uu yiraahday mid kaqaato sadaxdaas, ee sheeg Sadaxdaas?

Jawaab: 114: ……..?

Su’aal 115: waxaad sheegtaan Saxaabiga looga dhigay Hogaamiye eena watay ciida kadib Reerkii loodiray markuu utagay uu` Diinta u Bandhigay Ay yiraahdeen Saba`naa Saba`naa ooy ulajeedeen in ay diinta qaataa, Ereygaasna waxaay isticmaali jireen goortii ay kabaxayaan Diinta ama waxa ay caabudayaan, Waxaayna garaniwaayeen sidii loosoogali lahaa Diinta islaamka, kadib wax uu laayo iyo wax uu qafaasho ayuu kadhigay ee sheeg saxaabiga hogaaminaayay ciidanka?

Jawaab: 115: ……..?

Su’aal 116: *Waxaad sheegtaan laba Nabi oo loogu abtiriyo (ama loogu yeero) Magaca Hooyadood?*

Jawaab 116:

1. Yuunis Ibnu Mataa iyo
2. Ciisa Ibnu Maryam

Su’aal 117: *Duulaakii Dhaa’if nin keebaa hogaaminaayay mushrikiinta sheeg magaciisa?*

Jawaab 117: Waa Maalik Binu Cowf

Su’aal 118: *Nabi Shuceeyb gabadhiisu markuu u guuriyay Nabiyullaahi Muuse imsaa sanno ayuu kula heshiiyay in uu Ariga u raaco?*

Jawaab 118: *8 Sano, laakiin Wuxuu yiraahday (Fan atmamta Casharan famin cindika) Macnaheeduu uu yahay Hadii aad taam yeesho 10 waa adiga?*

Su’aal 119: *Nabiga (scw) nin keebuu ahaa niikii uu u bandhigay in uu shahaadada uu qiro? kadibna yiraahday waqti isii kadibna lasiiyay wuxuuna siiyay ilaa sadax bilood, sadaxdiibilood oo lasiiyay ayuu wuxuu niyeeystay in uu dilo Rasuulka (scw) isagoo kacbada kujira, Rasuulka wuxuuna kuyiraahday ninyahoow waxaan ogsoonahay waxa aad rabtiid in aasameeysiid oo qalbigaada kujira wuuna usheegay kadibna wuu Muslimay sheeg ninkaas magaciisa?*

Jawaab 119: Fadaala Binu Cumeery

Su’aal 120: *Waxaad sheegtaan haweeneeydii hilibka sumeeysan u keentay Nabigeena (scw)*

magaceeda? Iyo qoladii ay ka dhalatay iyo duulaankii lagu jiray magaciisa?

Jawaab 120:

- Seynaba bintu Xaarith,
- Yahuud,
- Dagaalkii Kheybar markuu dhamaaday

Su'aal 121: *Waxaad sheegtaan Haweeneeydii loo sheegay in la dilay.*

- Wallaalkeed
- Abtigeed iyo
- Ninkeeedii,

Goortii uu u sheegay Nabiga (scw) uu ku yiraahday waxaa la dilay wallaalkaa/Abtigaa/, markii loo sheegay in la dilay ninkeedii ayay ooysay ee sheeg saxaabiyadaas Magaceeda iyo sadaxdaa shahiiday?

Jawaab 121: Waa Xamnata Binu Jaxshi

Su'aal 122: *Imsa ayaa ku jirta Quraanka kalimada ah (yaa bunayi/a/ama yaa banii)? oo qoraalka iskumid ah ku kalabadalan shaqalka.*

Jawaab: Waxaa kujirta 3

Su'aal 123: *Waxaad sheegtaan haweeneeydii ka qeebgashay digaakii Uxud, waxaana leeb ku*

dhuftay nin mushrik ah dhulka ayay ku dhacday oo coowradeedii ayaa feeydantay, kaalkiina wuu ku qoslay gabadhii, NABIGA SCW Aad ayuu uga muragoogay oo wuxuu udhiibay leeb aan bir kujirin Sacdi Inbu Abii Waqaas wuuna kudhuftay mushigii, Isagana dhulka ayuu ku dhacay oo coowradiisa ayaa feydantay Nabiga SCW Aad ayuu ugu qoslay oo wuxuu yiraahday NABIGA SCW waxaa u abaalguday gabadha Sacad, ee sheeg haweeneeydaaysa magaceeda?

Jawaab 123: Waa Umu Ayman

Su'aal 124: *Waxaad sheegtaan Dagaalkii Kheybar Qeybtii ugu horeeysay imisa (Xisni) ama Dhufeeys ayay ka koobnaayeen aheed?*

Jawaab 124: Waxay ka koobnaayeen 5 Xisni

Su'aal 125: *Waxaad sheegtaa Inta magac oo loo yaqaano Duulaankii Badarkii Labaad?*

Jawaab 125:

1. Badarul Moocid
2. Badarul suqraa
3. Badaru al-thaanii
4. Badaru-al-ukhraa.

Waxaa Soo diyaariyay:

Abdimaalik Osman Adan

Email: abdimaalik10@hotmail.com

Caqiidada Islaamka

(Suáalo & jawaabo Diini ah)

Mahad Celin

Mahad oo idil Allaah (swt) ayay u sugnaatay, naxariis iyo nabadgelyo Nabigeena Muxammad dushiisa ha ahaato iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo inta hanuunka ku raacday ilaa maalinta qiyaamaha.

Waxaan halkaan ku soo gudbinahayaa su’aalo iyo jaabo diini ah oo ku saabsan Caqiidada, waxaana qoray Maxamed Xirsi Guuleed (Cabdi-Bashir) Ilaahay (swt) haka abaal mariyo asiga iyo waalidiintiisa iyo inta akhrisa oo idil. Wa Jazaakum Allaahu Khayra.

Su’aalo & Jawaabo
Ku Saabsan Arimaha Diinta

01. Su’aal: Waa maxay caqiidadu?

01. Jawaab*:* Ereyga “Caqiido” macnihiisu waa; rumayn iyo wax aaminid. (Caqiido waa kalmad af-carabi ah oo sheegaysa; adkayn, guntid, sugid iyo goyn. Haddii la sii macneeyo waa; arrinka aan qofka aaminsani ka shakisanayn. Xagga diinta waa arrimaha la aamino qalbi ahaan sida rumaynta Alle iyo Rasuulkiisa. Markaa caqiidada Islaamku waa lixda tiir ee iimaanka iyo wixii soo raaca oo lagu faahfaahin doono kitaabka gudihiisa.

02. Suáal: Waa maxay caqiidada islaamku?

02. Jawaab: “Caqiidada Islaamka” waxa looga jeedaa rumaynta iyo aaminidda mabdaá islaamka. Haddii la sii sharraxo waxaa caqiidada loola jeedaa; tiirarka “Iimaanka”.

03. Suáal: Waa maxay iimaanku?

03. Jawaab: Iimaanku: waa rumaynta Alle iyo rasuulkiisa taas oo leh tilmaamo gaar ah iyo tiirar ay isku taagto.

04. Suáal: Waa maxay tilmaanta iimaanku?

04. Jawaab: Tilmaanta iimaanku waa waxyaalaha haddii qofka laga helo lagu sheegi karo “qof muumin ah”.

05. Suáal: Maxay ka koobanyihiin tilmaamaha iimaanku?

05. Jawaab: Tilmaamaha iimaanku waxay ka kooban yihiin saddex walxood (wax ama shay) oo kala ah:

- Rumayn qalbiga ah
- Qiritaan afka ah
- Iyo ku dhaqmid

06. Suáal: Waa maxay arkaanul-iimaan ama tiirarka iimanaku?

06. Jawaab: Arkaanul-iimaan waa tiirarka uu iimaanku ku taagan yahay. Sida ay dhismayaashu u leeyihiin tiirar haya oo haddii mid laga saaro uu dhismuhu dumayo, ayuu iimaankuna u leeyahay tiirar lix ah oo haddii mid ka mid ah qofku si dhab ah u rumayn waayo uu iimaankiisu burayo (burid, buris, burin, buritaan= waa in wax jiray ay baabaáan. Waxaa loo adeegsadaa waxyaalaha aan

la taaban karin, sida ballanka, caqiidada, weysada iwm.

07. Suáal: Maxay kala yihiin tiirarka uu iimaanku ku taaganyahay (arkaan-ul-iimaan)?

07. Jawaab: Tiirarka iimaanku waa lix tiir oo kalal ah:

1. In Ilaahay la rumeeyo
2. In Malaaígtiisa la rumeeyo
3. In Kutub-tiisa la rumeeyo
4. In Rasuulladiisa la rumeeyo
5. In Maalinta qiyaame la rumeeyo
6. Iyo in Qaddarka Alle- sharkiisa iyo khayrkiisaba- la rumeeyo.

08. Haddii qofku arkaanul-islaamka wada qiro ma noqonayaa muslim buuxa?

08. Jawaab: MAYA; sababtoo ah wuxuu qofku muslim buuxa noqonayaa marka uu arkaanul-iimaanka wada qiro, kuna dhaqmo arkaanul-islaamka.

09. Suáal: Oo waa maxay arkaanul-islaamku?

09. Jawaab: Arkaanul-islaamku waa tiirarka ay diinta islaamku ku taagantahay.

10. Suáal: Maxay kala yihiin tiirarka islaamku?

10. Jawaab: Tiirarka islaamku waxay ka kooban yihiin;

1. In la qiro in aanu jirin cid xaq lagu caabudo Ilaahay mooyaane iyo in la qiro inuu Muxammed (SCW) yahay rasuulkii Alle
2. In salaadda la tukado
3. In sekada la bixiyo
4. In la soomo bisha Ramadaan (Rabadaan= Ramadaan. Soomaalidu badiyaaba waxay ugu dhawaaqdaa Rabadaan, halka carabtu ugu dhawaaqdo Ramadaan.
5. Iyo in qofkii awoodaa soo xajo.

11. Suáal: Maxay ku kala duwanyihiin arkaanul-iimaan iyo arkaanul-islaam?

11. Jawaab: Arkaanul-iimaan iyo arkaanul-islaam way isa soo dhexgelayaan. Tusaale ahaan tiirka ugu horreeya arkaanul-islaama waxa soo gelaya dhammaan lixda tiir ee arkaanul-iimaanka. Laakiin haddii la kala qaado waxay noqonayaan sidan: arkaanul-iimaan waa qalbiga, arkaanul-islaamna waa ficilka muuqda.

12. Suáal: Sidee ayuu tiirka koowaad ee arkaanil-islaamku u koobayaa lixda tiir ee arkaanul-iimaanka?

12. Jawaab: Marka uu qofku qiro: **(لَا إِلٰـــهَ إِلَّا اللّٰهُ)** LAA ILAAHA ILLA LAAHU *oo ah tiirka koowaad ee arkaanul-islaamka qaybtiisa hore, waxaa uu buuxiyey tiirkii koowaad ee arkaanul-iimaanka oo ahaa; "in Ilaahay la rumeeyo". Sidoo kale marka la qiro: Muxammed-un Rasuulu-Laah oo ah tiirka koowaad ee arkaanul-islaamka qaybtiisa dambe, waxaa soo gelaya shanta tiir ee dambe ee arkaanul-iimaanka oo kala ah:*

- In Malaaígtiisa la rumeeyo
- In Kutubtiisa la rumeeyo
- In Rusuuladiisa la rumeeyo
- In Maalinta qiyaame la rumeeyo
- Qaddarka Alle shar iyo khayrba la rumeeyo.

13. Suáal: Gartay in ay isa soo gelayaan "Laa ilaaha illa Laahu" iyo "In Ilaahay la rumeeyo", balse sidee ayey shanta tiir ee dambe ee arkaanul-iimaanku u soo hoos gelayaan qiritaanka: "Muxammed waa Rasuulkii Alle"?

13. Jawaab: Marka la qiro inuu Muxammed (scw) Rasuulkii Alle yahay, waxaa la rumeeyey rasuullada Ilaahay, maxaa yeelay Nebi Muxammed (scw) wuxuu ka mid yahay Ilaahay rasuulladiisa. Haddii la qiro inuu Muxammed (scw) rasuulkii Alle yahay waxaa la rumeeyey kutubtii Ilaahay, maxaa yeelay Muxammed (scw) wuxuu Rasuul ku noqday in Kitaabka Quráanka ah loo soo dhiibay, quráankuna wuxuu ka mid yahay kutubta Alle.

Rumeynta Nebi Muxammed (scw) waxaa soo hoos gelaya, rumeynta wax alla wixii uu ka warramay. Sidoo kale in la rumeeyo quraanka waxaa soo hoos gelaya, rumeynta wax alla wixii quraanku sheegay. Haddaba malaaígta Ilaahay iyo qaddarka Ilaahay iyo yoomal-qiyaamaha, saddexdaba waxaa ka warramay Nebi Muxammed (scw), Quráankuna wuu sheegay. Sidaas ayey isu soo hoos gelayaan arkaanul-islaamka iyo arkaanul-iimaanku. Sidaas darteed ayaa qofkii beeniya qodob ka mid ah arkaanul-islaam ama arkaanul-iimaanka uu ula mid yahay mid beeniyey wixii oo dhan.

14. Suáal: Ma jiraan wax u dhexeeya "Caqiidada islaamka" & iimaanka?

14. Jawaab: Haa, waxa jira farqi yar. Caqiidada islaamku waxay la mid tahay arkaanul-iimaanka

ama tiirarka iimaanku ku taanyahay ee lixda ah, laakiin iimaanku wuu ka guda ballaadhanyahay arkaanul-iimaanka oo camallada wanaagsan oo dhan ayaa soo gelaya.

15. Suáal: Ma sheegi kartaa daliil caddaynaya in iimaanku ka guda ballaadhanyahay arkaanul-iimaanka ama caqiidada?

15. Jawaab: *Haa, tusaale ahaan Nebigu (scw) wuxuu yidhi: "Iimaanku wuxuu ka koobanyahay dhawr iyo toddobaatan ama dhawr iyo lixdan qaybood, waxaa ugu sarraysa* **(لَا إِلٰهَ إِلَّا اللّٰـهُ)** LAA ILAAHA ILLA LAAHU, *waxaana ugu hooseeysa dariiqa oo laga qaado wixii dhibaato leh, xishoodkuna iimaanka ayuu ka mid yahay".* (Xadiiskan waxaad ka eegtaa kitaabka Saxiixul-muslim).

Faahfaahinta Arkaanul-Iimaanka

16. Suáal: Waa maxay tiirka koowaad ee Arkaanul-iimaanku?

16. Jawaab: Tiirka koowaad ee arkaanul-iimaanku waa “in Ilaahay la rumeeyo”.

17. Suáal: Waa gartay in ay ugu horrayso arkaanul-iimaanka in la rumeeyo Ilaahay. Haddaba waa maxay “in Ilaahay la rumeeyo”?

17. Jawaab: In Ilaahay la rumeeyo waxay tahay:

- In la rumeeyo inuu Alle jiro.
- In la rumeeyo inuu Alle wax walba abuuray oo isagu adduunka maamulo nolol iyo dhimashoba, isla markaana uu isagu makhluuqa kala xukumi doono.
- In la rumeeyo inuu kelidii caabudid xaq u leeyahay.
- In la qiro magacyadiisa iyo sifooyinkiisa.

(Makhluuqa = uunka, waxa la abuuray. Waxaa soo hoos gelaya wax kasta oo jira Alle mooyaane.

18. Suáal: Tiirka koowaad ee arkaanul-iimaanka oo ah; “In Ilaahay la rumeeyo” iyo tiirka koowaad ee arkaanul-islaamka qaybtiisa hore oo ah “Laa Ilaaha illa laahu” maxay ku kala duwan yihiin?

18. Jawaab: “In Ilaahay la rumeeyo” iyo Laa ilaaha Illa laahu”, way isa soo dhex gelayaan, laakiin “Laa Ilaah illa Laahu” oo ah kelmaddii

tawxiidka, ayaa ujeeddada islaamka sii caddaynaysa.

19. Suáal: Waa maxay kelmadda tawxiidku?

19. Jawaab: Kelmadda tawxiidku waa Laa ilaaha illa Laahu.

20. Suáal: Waa maxay "tawxiidku"?

20. Jawaab: Tawxiidku waa keli ahaanta Ilaahay oo la qiro, waana aasaaska ugu horreeya ee diinta islaamka, waana macnaha "Laa Ilaaha illa Laahu".

21. Suáal: Waa imisa qaybood tawxiidku maxayse kala yihiin?

21. Jawaab: Tawxiidka waxaa loo qaybiyaa saddex qaybood oo kala ah (qeexidda magacyada tawxiidka ee kala duwan waxaad ka fahmi suáalaha ku xiga);

- Tawxiidu rubuubiya= Rabbinimada
- Tawxiidu Uluuhiya= Ilaahnimada
- Tawxiidu al-asmaa wa-sifaat.

22. Suáal: Waa maxay Tawxiidu-rubuubiyah?

22. Jawaab: Tawxiidu rubuubiyah waa in la qiro jiritaanka Ilaahay iyo in aan Eebbe cidi la wadaagin falalkiisa, tusaale ahaan:

- Waa in la rumeeyo inuu Ilaahay kelidii (keligii) maamulo adduunka oo dhan nolol iyo dhimashoba, kelidiina wax arsaaqo.
- Waa in la rumeeyo inuu Alle wax walba awoodo.

23. Suáal: Qofkii qira tawxiidu-rubuubiyah, ma ugu filantahay intaasi in lagu sheego muslin?

23. Jawaab: Maya, tawxiidu-rubuubiyah kelidii islaam laguma noqdo, maxaa yeelay? Dadka intooda badan way rumaysanyihiin jiritaanka Ilaahay. Gaaladii carbeed ee Nabi Muxammed (SCW) loo dirayna way wada qirsanaayeen in Ilaahay wax abuuro, wax dilo, waxna nooleeyo, waxna arsaaqo, laakiin intaas islaam kumay noqon sababtoo ah wax ka dhinnaa tawxiidu-Uluuhiyah!

24. Suáal: Waa maxay tawxiidu-uluuhiyah?

24. Jawaab: Kelmadda “Uluuliyah” waxay ka timid kelmadda “Ilaah” oo la macne ah “Macbuud”, yacnii; kii la caabudayey. Markaa “tawxiidu-Uluuliyah” waa in Eebbe kelidii la caabudo.

25. Suáal: Waa maxay tawxiidu-asmaa wa sifaat?

25. Jawaab: Tawxiidu al-asmaa wa sifaat (Al-asmaa = magacyada Ilaahay) (Wa sifaa = sifooyinka) waa in la qiro magacyada iyo

tilmaamaha Eebbe isu qiray iyadoon leexinayn macnahooda, loogana metaal (metaal = tusaale) qaadanahayn magacyada iyo sifooyinka makhluuqiisa (makhluuq = waa wixii Alle abuuray).

- Tusaale ahaan, Alle wax wuu maqlaa waxna wuu arkaa, haddana cid la mid ahi ma jirto.

26. Suáal: Qofka doona inuu islaamka soo galo, muxuu ku soo galayaa diinta?

26. Jawaab: Wuxuu diinta islaamka ku soo gelayaa inuu ku dhawaaqo Shahaada-teynka (Shahaadateyn = labada ashaado).

27. Suáal: Waa maxay Shahaada-teynku?

27. Jawaab: Shahaada-teynku: waa qiritaanka “Laa Ilaaha illa laahu” iyo qiritaanka “Muxammed-rasuululaahi”.

28. Suáal: Ma isku midbaa Shahaada-teynka iyo kelmadda tawxiidku?

28. Jawaab: Maya, Shahaada-teynku waa qiritaanka; Laa Ilaaha illa Laahu iyo Muxammed-Rasuulu-laahi (scw). Halka kelmadda tawxiidku ay tahay: Laa ilaaha illa Laahu oo keliya.

29. Suáal: Waa maxay macnaha Laa Ilaaha illa Laahu?

29. Jawaab: Laa ilaaha illa Laahu, macneheedu waa “ma jiro mid xaq lagu caabudaa Alle mooyane”.

30. Suáal: Muxuu ku hagaagayaa qiraalka “Laa Ilaaha illa Laahu?

30. Jawaab: Qiraalka “Laa Ilaaha illa Laahu” wuxuu ku hagaagayaa in la helo toddoba shardi (shardi= waa wax haddii isaga la waayo wixii uu shardiga u ahaana aanu jirahayn)

31. Suáal: Maxay kala yihiin shuruudaha “Laa Ilaaha illa Laahu” ee toddobada ahi?

31. Jawaab: Waxay kala yihiin shuruudaha “Laa Ilaaha illa Laahu” sida tan:

- Garasho oo ah in aqoon loo yeesho macnaha iyo ujeedada “Laa Ilaaha illa Laahu”.
- Yaqiinsasho aan shaki lahayn oo ah si hubaal ah oo loo aamino saxsanaanta Laa Ilaaha illa Laahu.
- Aqbalaad aan diidmo lahayn oo ah in la aqbalo Laa Ilaaha illa Laahu.
- Hogaansamid aan ka tegid lahayn oo ah in lagu dhaqmo Laa Ilaaha illa Laah.
- Ka runsheegid oo ah in ay is waafaqaan hadalkiisa iyo uurkiisu.

- Saafi yeelid aan shirki lahayn, oo ah in aan cid kale la caabudin.
- Jacayl aan necayb lahayn, oo ah haddii wax kale ka hor yimaado in aad waxa kale ka tagto.

32. Suáal: Shuruudahaas ma ka bixin kartaa sharrax isku xidhan?

32. Jawaab: Haa! marka koowaad, waa in aqoon loo yeesho macnaha Laa ilaaha illa Laahu oo ah in aan cidina xaq u lahayn caabudid, Ilaahay mooyaane. Nebigu (SCW) wuxuu yidhi “Qofka dhinta isaga oo og in aanu jirin Ilaah xaq lagu caabudo Alle mooyaane, jannada ayuu galaa”. (Cusmaan Binu Caffaan ayaa weriyey waxaanu ku jiraa kitaabka Saxeexu-muslim).

Marka xigta waa in macnahaas lagu qanco oo aan wax shaki ah laga qabin in cibaado oo dhan Alle xaq u leeyahay. Nebigu (SCW) wuxuu yidhi “Waxaan qirayaa in aanu jirin Ilaah xaq lagu caabudaa ilaahay mooyaane iyo in aan anigu ahay rasuulkii Alle, qofna kulama kulmo Alle kelmaddaas isaga oo aan ka shakisanayn, haddii ay dhacdana jannada ayuu ku galaa”. (Abuu Hureere ayaa wariyey waxaanu ku jiraa kitaabka Saxeexu-muslim).

Marka saddexaad, waa in la aqbalo ujeedada Laa ilaaha illa Laahu oo dhan. Marka xiga waa in loo hoggaansamo oo lagu dhaqmo dhaqanka ay xambaarsan tahay. Marka lagu dhaqmo waa in aan cid kale wax ku yeelan cibaadada, sida sanam ama qof la weyneeyo. (Sanam= waa sawir dhagax ama dhir ka sameysan oo dada qaar caabudaan).

Nebigu (SCW) wuxuu yidhi: Qofka yidhaa Laa ilaaha illa Laahu isagoo ula jeeda ilaahay dartiis, jannada ayuu ku galaa. (Cutbaan binuu Maalik ayaa weriyay waxaanu ku jiraa Bukhaari & Muslim).

Waana in la jeclaado oo haddii wax ka duwani ay jiraan la door bido Laa ilaaha illa Laahu. Waana in la rumeeyo oo aan la beenin ama munaafiqnimo loo odhan. Nebigu (SCW) wuxuu yidhi: Ma jiro qof qira Laa ilaaha illa Laahu Muxammedan rasuulullaah isagoo qalbigiisu run ka sheegayo, hadduu jirana Alle wuxuu ka xaaraantinimeeyaa naarta. (Mucaad binuu Jabal ayaa weriyay waxaana soo saaray Bukhaari & Muslim).

33. Suáal: Ilaahay mooyaane cid kale caabudaad xaq uma lahan. Haddaba waa maxay cibaadadu?

33. Jawaab: Cibaadadu waa wax alla wixii Eebbe dadka amray in ay sameeyaan ama ka tagaan oo la yeelo.

34. Suáal: Maxaa ka mid ah noocyada cibaadada?

34. Jawaab: Cibaadada waxaa ka mid ah waxyaalo fara badan sida; Shahaada-teynka, Salaadda, Sekeda, Soonka Xajka, ducada, Nederka, Dhaarta, Saddaqada, Sujuudda, Gawraca iwm.

35. Suáal: Maxaa loo caabudayaa Ilaahay?

35. Jawaab: Waxaa Alle loo caabudayaa:

- Dadkaba waxaa Alle u abuurtay in ay isaga caabudaan.
- Nebiyadii Alle oo dhan waxaa loo soo diray in ay dadka faraan cibaadada Alle.
- Alle wuxuu u ballanqaaday qofkii caabuda ee aan cid kale la caabudin inuu jannada geeyo.

36. Suáal: Haddii qofku Ilaahay caabudi waayo, maxaa ku jaban?

36. Jawaab: Haddii qofku Ilaahay kelidii caabudi waayo, wuxuu Alle u ballan qaaday inuu cadaabta geliyo.

37. Suáal: Waxyaalaha Ilaahay faray dadka in ay sameeyaan maxaa ugu muhiimsan?

37. Jawaab: Waxaa ugu muhiimsan “Tawxiidka Alle” oo ah in isaga kelidii la caabudo.

38. Suáal: Maxaa ugu daran waxyaalaha Alle dadka ka reebay in ay sameeyaan?

38. Jawaab: Waxa ugu daran in Alle loo shiriig yeelo (Shiriig= shirki yeelid, la wadaajin, in cid kale la caabudo) oo cibaadadii uu xaqa u lahaa cid kale lala wadaajiyo (wadaajin= wax ka dhaxaysiin laba qof ama in ka badan.

39. Suáal: In Alle loo shiriig yeelo, waa maxay macnaheedu?

39. Jawaab: Waa in cid aan Alle ahayn cibaadada wax laga siiyo. Ilaahay waa keli in cid lala simo ama lagu lammaaneeyo waa shirki ama gaalnimada ugu weyn. (Lagu lammaaneeyo= lagu labeeyo).

40. Suáal: Shirkigu waa immisa qaybood?

40. Jawaab: Shirkiga waxaaa loo kala qaybiyaa laba qaybood oo kala ah:

- Shirkiga wayn.
- Shirkiga yar.

Suáal: Waa maxay shirkiga weyni?

Jawaab: Waa in wax ka mid ah cibaadada loo leexiyo cid aan Alle ahayn, sida ducada, salaadda, sujuudda, gawraca qurbaanka, rajaynta wixii

4. Suáal: Maxay kala yihiin wayso-buriye weyn iyo wayso-buriye yar?
Jawaab: Wayso-buriye weyn waa waxyaalaha waysada jebiya, isla markaana waajibiya maydhasho ee af-carabiga loo yaqaan "Xadath al-akbar". Laakiin wayso-buriye yar waa waxyaalaha waajibiya waysaysi keli ah ee af-carabiga loo yaqaan "Xadath al-asqar".
5. Maxaa la daahirinayaa?
Jawaab: Waxaa la daahirinayaa:
A- Jidhka
B- Maryaha la xidhanayo
C- Weelka la isticmaalayo iyo
D- Meesha lagu tukanayo.
6. Suáal: Maxaa wax lagu daahirinayaa?
Jawaab: Waxaa wax lagu daahirinayaa waxyaalahaan soo socda midkood:
A- Biyaha oo ah shayga asalka ah
B- Ciidda dhulka
C- Iyo Waxkasta oo nijaasta biín kara.
7. Suáal: Miyey jiraan wax aan biyo ahayn oo lagu daahirin karo nijaasta?
Jawaab: Haa, wax kasta oo daahira oo baabiín kara nijaasta iyo raadkeeda way daahirin karaan wax. Waxaa ka mid ah warqadaha, dhagxaanta, dhirta iyo bensiinka. Xitaa dabaysha iyo qorraxda iyo kiimikada lagu maydho jaakeedyada qaar, haddii ay baabiíyaan raadka nijaasta way daahirinayaan wax.
8. Suáal: Ma jiraan wax aan biyo ahayn oo la iskaga daahirin karo wayso-buriyeyaasha?
Jawaab: Haa, ciidda ayaa la isku daahirin karaa, haddii biyo la waayo ama adeegsiga biyuhu adkaado.
9. Suáal: Sidee ayey diintu u qiimaysaa nadaafadda ama dahaarada?
Jawaab: Diintu aad ayey u weynaysay nadaafadda, waxaana taas u daliil ah:
1. Nebigu (SCW) wuxuu yidhi: "Nadaafaddu waa iimaanka badhkii" Waa xadiis laga weriyey Abu Malik al-xaarith binuu Caasim al-ashcari oo ku qoran Saxeexul-muslTimaha ka soo baxa cawrada dadka waaweynim.

2. Ebbe-na wuxuu yidhi: "Ilaahay wuu jecelyahay kuwa is daahiriya".
3. Salaadda oo ah tiirka koowaad ee qofka muslinka ah laga rabo, ma ansaxayso haddaanu qofku isdaahirin.
4. Qofku marka uu soo galayo islaamka waa in uu biyo isku daahiriyo oo maydho. Waa aayad Quráanka ku jirta.
5. Suuraddii 2aad ee Quráanka ugu soo hor degtay waxaa lagu amray Nebiga (SCW) inuu dharkiisa daahiriyo.

10. Suáal: Sidee ayey dahaaradu ku noqotay diinta badhkeed?
Jawaab: Dahaaradu waxay ku noqotay diinta badhkeed, sababtoo ah waxay u qaybsantaa laba qaybood:
A. Dahaarinta nafta iyo qalbiga
B. Iyo Dahaarinta jidhka

11. Suáal: Maxay kala yihiin dahaarada nafta iyo dahaarada jidhku?
Jawaab: Daahirinta "nafta iyo qalbigu" waa in la iska daahiriyo shirkiga iyo macsida, iyadoo la isku daahirinayo tawxiidka iyo camalka saalixa ah.Taasi waa iimaanka badhkii. (Shirki waa gaalnimo ka timid in la caabudo cid aan Alle ahayn. Macsi waa dembi oo ah in laga tago wax Alle faray ama la sameeyo wax Alle reebay. Camal saalix waa in wixii Alle amray la sameeyo, wuxuu reebayna laga tago, Alle dartii).

AMMUURAHA FIDRADA TOOSAN

12. Suáal: Waa maxay ammuuraha fidradu?
Jawaab: Ammuuraha fidradu way badan yihiin waxaana ka mid ah kow iyo tobankan arrimood:
1. In la cadaydo
2. Timaha hoose oo la iska xiiro (Timaha hoose waa cawrada dadka waaweyn hareeraheeda ama xubnaha taranka hareerahooda. Waxaa kaloo lagu magacaabaa; Shicirad ama Bisqin
3. Ciddiyaha oo la iska jaro
4. Timaha kilkillada oo la iska rifo
5. Shaarubaha oo la iska gaabiyo
6. Timaha gadhka oo la daayo
7. In la sandaarsado (Sandaarsi waa biyaha oo sanka lagu nuugo si sanka gudhiisa loo soo nadiifiyo, tusaale ahaan marka la waysa qaadanayo ama marka hurdada laga soo tooso.
8. In lagu dadaalo maydhidda xubnaha jidhka ee laabma iyo meelaha qarsoon.
9. In la luqluqdo.
10. In biyo lagu istijoodo (Istijo waa in biyo la isaga nadiifiyo kaadida iyo saxarada).
11. Iyo in la is gudo, gaar ahaan ragga.

13. Suáal: Ma jiraa wakhti xaddidan oo aan la dhaafin karin, samaynta amuuraha fidrada?
Jawaab: Haa, Qaarkood waa in afartankii cishoba la sameeyo ugu yaraan halmar. Qaarna maalin walba waa loo baahan yahay in lal sameeyo.
14. Suáal: Sheeg amuuraha fidrada ee afartankii cishoba ay tahay in ugu yaraan hal mar la sameeyo?
Jawaab: Waxa jira afar arrimood oo ay tahay in aanay qofka la dhaafin 40 cisho, waxayna kala yihiin:
A. Ciddiyaha oo la iska guro
B. timaha kikillada oo la iska rifo
C. Timaha hoose oo la iska xiiro
D. Iyo shaarubaha oo la iska gaabiyo
15. Suáal: Timaha kilkillada, ma in la rifo oo keli ah ayaa bannaan. Miyaan la xiiri karin?
Jawaab: Sida xadiiska Nebiga (scw) ku cad waa in la rifo. Wayse bannaan tahay si kasta oo aanay kugu dheeraan.
16. Suáal: Maxaa loola jeedaa xubnaha laabma ee maydhidda lagula dadaalayo?
Jawaab: Waxaa loola jeedaa laablaabada faraha gacmaha iyo faraha addimada iyo dhammaan meelaha jidhka ka mid ah ee wasakhda iyo usgaggu ku ururi karaan. Waxaa la doonayaa:
A. In biyaha waysadu wada gaadhaan meelaha loogu talo galay si ay salaaddu u ansaxdo.
B. In aan jeermis iyo caafimaad xumo ka dhalan usgagga ku urura xubnahaas laablaabma
C. In wasakhda meelaha laablaaban ee jidhka ku ururtay aanay ka soo bixin ur dadka dhibta.
4. Biyaha la isku daahirin karo
17. Suáal: Waa maxay biyaha la isku daahirin karaa?
Jawaab: Biyaha la isku daahirin karaa waa dhammaan noocyada biyaha ee kala duwan sida:
A. Biyaha cirka
B. Biyaha Barafka
C. Biyaha dhulka ka soo baxa
D. Biyaha Badda
E. Iyo Biyaha webiyada
18. Suáal: Biyaha mar la isticmaalay, haddii mar labaad la isticmaalo miyey wax daahirin karaan?

Jawaab: Haa, biyaha mar la isticmaalay sida biyaha lagu waysaystay ama lagu maydhay ee aanay wax nijaas ahi gaadhin waa daahir waxna way daahirin karaan.

19. Suáal: Ka warran biyaha muuqaalkoodu is beddeley kaddib markii ay ku darsantay wax nadiif ah oo kale, sida saabuun, caano ama sacfaraan iyo wixii la mid ah?

Jawaab: Haddii ay biyaha ku darsanto maaddo nadiif ah laakiin weli lagu tilmaami karo waxna way daahirinayaan. Haddiise ay biyihii dhalan rogmaan waxba ma daahirinayaan, waase daahir weli.

20. Suáal: Ka warran haddii biyaha nijaasi ku darsanto?

Jawaab: Haddii biyaha ay ku darsanto nijaas, waxaa loo kala qaadayaa labo nooc oo kala ah:

A. Biyo nijaasta gaadhay ay wax ka bedeshay muuqaalkooda, urtooda iyo dhadhankooda ama saddexdaa sifo midkood. Biyahaasi way nijaasoobayaan, lamana isticmaali karo.

B. Biyo aanay nijaasta gaadhay waxba ka beddelin midabkooda, urtooda iyo dhadhankooda toona. Biyahaasi waa daahir waan la isku daahirin karaa, xitaa iyagoo nijaasi ku dhacday.

21. Suáal: Haddii biyuhu isbeddelaan muuqaal ahaan, ama urtooda ama dhadhankoodu, laakiin isbeddelkaasi ka dhashay biyaha laftooda, sida raagitaan ama xayaabo ama midho (xayaabo waa midho ama caleen ka baxda biyaha raagay korkooda), xareedaad ma la isticmaali karaa biyahaas (Midho xareedaad waa cayayaan ku dhashay biyaha raaga?

Jawaab: Jawaabtu waa haa oo waa la isticmaali karaa, kol haddii biyahaas waxa beddelay aanay ahayn nijaas welina lagu sheegi karo biyo.

22. Suáal: Haddii biyaha ay dhexgalaan xoolaha la dhaqdo oo ay ku kaajaan sidaasna biyihii ku ajoobaan (Ajo waa biyaha ceelasha iyo balliyada oo isbeddela marka ay xooluhu dhexgalaan, kuna kaajaan) ma la isticmaali karaa biyahaas ajada ah?

Jawaab: Haa waa la isticmaali karaa, sababtoo ah kaadida xooluhu waa daahir, biyahana wax daahir ah oo beddelay ma nijaasayn karo.

23. Suáal: Biyaha badda ma lagu daahirsan karaa?

Jawaab: Haa, biyaha baddu waa daahir, waxna way daahirin karaan.

24. Suáal: Haddii biyo ay milix (cusbo) ku milantay lagu daahirsado ama lagu waysaysto ma saxbaa?

Jawaab: Haa, waxay la mid yihiin biyaha badda, biyaha badduna waa daahir, waana la isku daahirin karaa. Xadiiska Nebiga (SCW) ayaa sidaas caddeeyay.

25. Suáal: Biyo nijaasoobay haddii la safeeyo iyadoo la adeegsanayo qalab oo markaa laga saaro wixii wasakhda ahaa, biyahaasi ma noqonayaan daahir loo adeegsado cabitaan, cunitaan iyo waysaba?
Jawaab: Jawaabtu waa haa, haddii biyihii laga saaro wixii nijaasta ahaa oo urtii, iyo midabkii iyo dhadhankiiba biyo saafi ahi noqdaan, markaas waa loo isticmaali karaa si kasta.
La soco Kitaabka qaybihiisa kale oo ay ugu soo horeyn doonto qayb ka hadlaysa Weelka loo isticmaali kar isdaahirinta.
Kitaabkan oo aad ka dalban karto shabakadda www.somalibooks.org waxaa qoray: Maxamed Xirsi Guuleed (Cabdi-Bashiir)
50 SUÁAL & JAWAABAHOODA OO KU SAABSAN DHIIGGA CAADADA EE DUMARKA KU DHACA & DAHARADOODA.

(WAA SU`AALO IYO JAWAABO)
Waa kitaab af-Soomaali ah
W.Q: Muxammad Mursal Muxammad
إن الحمد لله نحمده ونستعينه ونستغفره ونعوذ بالله من شرور أنفسنا ومن سيئات أعمالنا من يهده الله فلا مضل له ومن يضلل فلا هادي له وأشهد أن لاإله إلا الله وحده لا شريك له وأشهد أن محمداً عبده ورسوله صلى الله عليه وعلى آله وصحبه وسلم تسليماً كثيرا – أما بعد
Mahad iyo ammaan waxaa leh illaah subxaanahu wa ta-caalaa.
Waxaan kaalmo iyo dambi dhaaf weydiisaneynaa allaah. Waxaan sidoo kale weydiisaneynaa in uu naga magan galiyo Shaydaan iyo sharta nafteena.Sidoo kale waxaa hanuunsama ciddii allaah hanuuniyo, ciddii uu dariiqa xaqqa ka lumiyo cidna ma hanuunin karto.
Waxaan qirayaa in uusan jirin ilaah xaq lagu caabudo Allaah mooyee. Nabi Muxammad uu yahay addoonkiisa iyo Rasuulkiisa (sallallaahu caleyhi wasallam).
Intaas dabadeed waxaan halkaan ku soo gudbinayaa kitaabkan.
Kitaabkan waxa uu ku saabsanyahay Axkaamta dhiigga caadada ee ku dhaca dumarka.
Waxa igu kallifay in aan kitaabkaan qoro waxa weeye maadaama uu baabkaan muhiim yahay, sidoo kale aysan garaneynin in badan oo kamid ah maadaama ay culustahay in la fahmo waxa ay fuqahadu kayiraahdeen arrinkaan. Sidaas darteed waxaan door biday in aan qoro kitaab Afka Soomaaliga.
Waxaan ka dhigay kitaabkaan su`aalo iyo jawaabo si uu ugu fududaado dumarka in ay fahmaan mas`alooyinka ka hadlaya Axkaamata dhiigga caadada.
Waxaa laga dalban karaa Kitaabka Masjidka magaalada

Linköping(Sweden)
Mobil:(0046)762325367
E-Mail : salaan105@hotmail.com
CUTUBKA 1AAD:
Suáal 1aad: Waa maxay dhiigga caadada(xaydka)?
Jawaab: Waa dhiig dabiici ah ee ku dhaca dumarka sabab la`aan(sida xannuun ama dhaawac).
Suáal 2aad: Ma leeyahay dhiigga caadada calaamado lagu garto?
Jawaab: Haa sida,
(a) in uu yahay midab madow,
(b) dhiig adag,
(c) ur leh,
(d) aan qalalin(sida xinjir).
Suáal 3aad: Ma jirtaa da` (sanad) go`an oo uu dhiigga caadada ka yimaado (ka bilowda) haweenka?
Jawaab: Maya, da` go`an ma laha, haba ka yimaadee da` kayar sagaal sano waa caado.
Suáal 4aad: Ma jirtaa da` go`an oo uu dhiigga caadada ku dhamaado?
Jawaab: Maya, da` go`an ma laha, haba ka weenaatee 60 sano.
Suáal 5aad: Ma ku dhici karaa dhiigga habeen iyo maalin wixii ka yar?
Jawaab: Haa, xittaa saacad ka yar waa uu heyn karaa.
Suáal 6aad: Ma ku dhici karaa dhiigga caadada haweeney uur leh?
Jawaab: Culumadu waa ay ku kala aragti duwan yihiin arrintaas, balse sida badan ma dhacdo oo waa dhif, haddii ay isku aragto dhiiggaas xilliggii uu ka imaan jiray caadada, markaa wuxuu noqonayaa dhiiigga caadada, marka uu ka joogsado waa ay daahir noqoneysaa.
Suáal 7aad: Imisa ayey ugu badnaan caadadu heyn kartaa haweeneyda?
Jawaab: Ma laha waqti go`an laakiin haddii bisha oo idil uu hayo dhiig caado ma ahan ee waa dhiig furan, iyadoo sideeda ah ayay tukaneysaa, soomeysaa.
Suáal 8aad: Imisa maalmood ayuu haweenku ku dhacaa caadada (dhiigga) sida qaalibka?
Jawaab: Sida ay u badan yihiin dumarku wuxuu hayaa 6 maalmood ama 7 maalmood.
Suáal 9aad: Waa sidee haddii uu haweeneyda dhiigga ku dhici jiray bishiiba tusaale 10 maalmood , kaddibna uu noqday 12 maalmood iyo wixii la mid ah ?

Jawaab: Waxuu noqonayaa dhiiggaas caado, oo ma tukaneyso mana ay soomeyso.
Suáal10aad: Waa sidee haddii haweeney dhiigga caadada xilliga uu ku dhici jiray is badalo (sida in uu ku dhici jiray bilowga bisha, hadda uu ku dhaco dhamaadka bisha)?
Jawaab: Marka dhiiggu uu hayo waa caado (ma tukaneyso mana soo meyso,), marka uusan heyn waa ay tukaneysaa, soomeeysaa.
Suáal 11aad: Maxaa ka reeban haweeneyda caadada (dhiigga) qabta?
Jawaab: Salaadda, soonka, in ay dawaafto kacbada, in masjidka ay ku nagaato(joogto) , galmada, in kitaabka qur`aanka ay taabato, in lafuro xilliga ay caadada qabto.
Suáal 12aad: Ma aqrin kartaa qur`aanka haweeney caada qabta?
Jawaab: Haa, haddii baahi ay jirto (sida in ay ka baqeyso in ay ilowdo qur`aanka, ama haddii macalin qur`aan ay tahay iyo wixii lamid ah maxaa yeelay ma jiro daliil sax ah ee diidaya in ay aqriso qur`aanka, laakiin ma taaban karto kitaabka qur`aanka ah waayo waxaa jira daliil diidaya).
Suáal 13aad: Ma ku waajib baa haweeneyda caadada qabtay in farjigeeda ay fiiriso inta aysan waqiga salaadda subax soo galin ?
Jawaab: Maya, balse waa in ay fiirisaa xilliga hurdada ka hor iyo waqtiyada salaadaha ay soo galayaan.
Suáal 14aad: Maxaa u bannaan haweeneyda dhiigga caadad ka joogsaday welina aan qubeysan?
Jawaab: Waxaa u bannaan soon qura (kaliya).
Suáal 15aad: Ka warran haddii haweeney ay ka daahir noqoto dhiigga caadada salaadda subax kahor welina aysan qubeysan ma soomi kartaa maalintaas?
Jawaab: Haa.
Suáal16aad: Ma taaban kartaa haweeneey caada qabta kitaab tafsiir ah ama xadiis?
Jawaab: Haa.
Suáal 17aad: Ma akhrin kartaa haweeney caada qabta adkaarta (wardiga)?
Jawaab: Haa, sida istighfaarta (Astaghfirullaah), takbiirta (Allaahu akbar), tasbiixda(Subxaanallaahi), taxmiida(Alxadulillahi), tahliil (Laa ilaaha illalaahu) iyo wixii lamid ah ee la soo guuriyay.
Suáal 18aad: Maxaa ku waajib ah ninka haddii uu galmo la sameeyo xaaskiisa iyadoo caada qabta?
Jawaab: Waa in uu bixiyaa diinaar ama diinaar barkiis (diinaarku waa 4.25 garaan dahab ah).

Suáal 19aad: Ma laga doonayaa haweeneyda wixii salaadooyin ahaa ee soo maray xilligii caadada, haddii ay daahir noqoto?
Jawaab: Maya.
Suáal 20aad: Ma laga doonayaa haweeneyda wixii soon ahaa ee soo maray xilligii caadada haddii ay daahir noqoto?
Jawaab: Haa.
Suáal 21aad: Ma laga doonayaa haweeneyda in ay soo qalleyso salaadda haddii waqtiga salaaddu soo gashay ay caado ku dhacdo?
Jawaab: Haa, haddii ay daahir aheyd muddo hal rakco lagu tukan karo.
Suáal 22aad: Ma laga doonayaa salaadda haddii haweeyneyda caadada ka joogsato muddo rakco lagu tukan karo?
Jawaab: Haa.
Suáal 23aad: Waa sidee haweeney sooneyd haddii uu dhiiggu ka yimaado iyadoo xilliga afurka in yar ka haray?
Jawaab: Soonkaas waa ay soo qaleyneysaa daqiiqadba haka hartee.
Suáal 24aad: Waa sidee haweeney caada qabta haddii ay niyeeysatay soon iyadoo filaysa(u maleyneysa) in barrito ay daahir noqoneysa?
Jawaab: Haddii ay toosto waqtiga salaadda subax ka hor iyadoo dhiigu ka joogsaday waa ay soomi kartaa, laakiin haddii ay toosto waqtiga salaadda subax soo galay ma soomi karto maalintaas waayo ma oga xilliga uu ka joogsaday dhiigga.
Suáal 25aad: Ma isticmaali kartaa haweeneyda caadada qabta daawa dhiigga joojisa si bisha ramadaan ay u wada soonto?
Jawaab: Haa haddii laba shardi laga helo daawadaas sida
(a) in daawada aysan dhib keeneynin isticmaalkeeda taana waxaa cadeeynkara dhakhaatiirta.
(b) In uu u fasaxo ninkeeda haddii la qabo.
Suáal 26aad: Ma isticmaali kartaa haweeney daawo dhiigga keenta si caado uga timaado?
Jawaab: Haa haddii laba shardi laga helo
(a) In ujeedada aysan aheyn in ay salaadda iyo soonka uga xeeleysato(katagto).
(b) In ninkeeda uu u ogolaadaa.
Suáal 27aad: Sidee bey yeeleysaa haweeney dhiiggu uu ka imaanayo maalmo kadibna uu ka joosanayo kadibana uu kusoo laabanayo dhowr jeer bishii?
Jawaab: Dhiiggu markuu yimaado waa caado, ma tukaneyso mana qubeysaneyso, marka uu ka joogsado waa daahir waa ay tukaneysaa waan ay soomeysaa.

Suáal 28aad: Ma jiraa calaamada lagu garto dhiigga in uu joogsaday(ay daahir noqotay)?
Jawaab: Haddii ay aragto biyo cad (wuxuu yimaadaa dhamaadka xilliga xaydka), ama in uu wada istaagay, taana waxa ay ku garan kartaa haddii ay galiso maro kadibna ay wax soo raaci waayaan.
Suáal 29aad: Waa sidee haddii haweeneydu marka ay daahir noqoto kadibna ay aragto wax biyo la moodo malaxda(Sufrah), ama biyo wasakh ah oo carun ah(Kudrah)?
Jawaab: Haddii ay isku aragto arrinkaan muddada caadada ay qabtay waa caado(xaylka), laakiin haddii uu ka yimid marka ay mudada caadada dhaamatay kadib ma aha dhiig caado, waxba laga ma soo qaadayo waa ay iska nadiifineysaa.
Suáal 30aad: Waa sidee haddii uu ka yimaado haweeneyda biyo ama carun xilliga caadada ka hor?
Jawaab: Haddii uu yahay dhiigga caadada hor dhiciisa waa caado(sida in xanuun lee yahay.
Suáal 31aad: Maxaa ku waajib ah haweeneyda haddii uu ka istaago dhiigga?
Jawaab: In ay qubeysato iyo in ay soo guddo wixii soon waajib ahaa ee lagu lahaa.
Suáal: 32aad: Maku waajib baa haweeneyda dhiigga caadada ka joogsday in dharkii u xirnaa ay badasho haddii uusan dhiig gaarin marada?
Jawaab: Maya.
Suáal 33aad: Ma sameeyn kartaa haweeneyda galmo iyadoo weli aysan dhiigga ka qubeysanin?
Jawaab: Maya.
Suáal 34aad: Ma ku waajib baa haweeneyda marka ay dhiigga ka qubeysaneyso in ay timaha furfurto?
Jawaab: Maya, waa haddii ay biyaha gaarayaan timaha salkooda, laakiin haddii aysan gaareynin jeer la furfuro markaa waa la furfurayaa.
CUTUBKA 2AAD: Dhiig furanka(Istixaadah)
Suáal 35aad: Waa maxay istixaada (dhiig furan)?
Jawaab: Waa dhiig furan ku yimaada farjiga oo aan ka joogsaneyn haweeneyda waxaana sabab u ah xidid furma.
Suáal 36aad: Ma jiraa farqi(kala duwanaan) u dhaxeysa dhiigga caadada iyo dhiiga istixaadada (dhiig furanka)?
Jawaab: Haa, sida
(a) Dhiigga istixaadada(dhiig furanka), waa casaan(guduud), balse dhiigga caadada waa madow.

(b) Dhiigga istixaadada waa khafiif (jilicsan), balse dhiigga caadada waa adeyg.
(c) Dhiigga istixaadada waa uu qallalaa(engagaa), balse dhiigga caadada ma qallalo.
Suáal 37aad: Sidee sameeyneysaa haweeneyda mustaxaada ah (dhiiggu furmo)?
Jawaab: (1) Haddii ay ku dhici jirtay caadada ka hor istixaadada (dhiig furanka), waxa ay tirsaneysaa xilligii caadada ay ku dhici jirtay, marka uu dhamaado waqtigaas(tiro la eg waqtiga uu ku dhici jiray) waa ay qubeysaneysaa, waa ay tukaneysaa waana ay soomeysaa iyadoo dhiigga istixaadada(dhiig furanka) ka socdo.
(2) Haddii ay san caada ku dhici jirin ka hor istixaadada(dhiig furanka) ,balse dhiiggu uu kala duwan yahay noociisa, (a)marna uu ka imaanayo dhiig madow adag oo ur leh, waxa uu noqonayaa dhiiggaas dhiig caado ah oo ma tukaneysa mana ay soomeyso, (b) haddii uu marna uu ka imaanayo dhiig sida (guduud, jilicsan, ur laheyn) waa dhiiga istixaadada (dhiig furan) markaas waa ay tukaneysaa, soomeysaa iyadoo dhiigga ka socdo.
(3) Haddii ay san caada ku dhici jirin ka hor istixaadada(dhiig furanka), dhiigguna uusan kala duwaneyn waxa ay xisaabsaneysaa 6 maalmood ama 7 maalmood hadba inta ay tirsadaan haweenka ku dhaw iyada (sida hooyadeed ama walaalaheed ama eedooyin ama habaryaro).
Haddii ay 6 maalmood caadada ku dhacdo iyadan 6 bey tirsaneysaa inta kalana waa ay tukaneysaa waana ay soomeysaa iyadoo dhiigga ka socdo waayo istixaado,
Haddii haweenka qaraabada la ah ay 7 maalmood caado ku dhici jirtay sidoo kale 7 maalmood bey xisaabsaneysaa.
Suáal 38aad: Maxaa looga baahan yahay haweeneyda istixaada ku dhacdo marka ugu horeysa?
Jawaab: Waa in ay qubeysataa isagoo dhiigga ka socda, maadaama uusan kala joogsaneyn, farjigana dhaqdaa, sidoo kalana ay xirataa cuf (sida xaafayad iyo wixii la mid ah), ayna u weysa qaadataa salaad walba laakiin waa in ay iska dhaqdaa farjiga ka hor weysada.
Suáal 39aad: Ma ku waajib baa haweeneyda istixaada qabta in ay salaad walba u qubeysato?
Jawaab: Maya,
Suáal 40aad: Ma la sameeyn kartaa ninkeeda galmo haweeneyda istixaadada qabta?
Jawaab: Haa.
Suáal 41aad: Ma taaban kartaa haweeneyda istixaadada qabta

kitaabka qur`aanka?
Jawaab: Haa.
CUTUBKA 3AAD
Dhiigga dhalmada (Nifaaska)
Suáal 42aad: Sheeg muddada ugu yar dhiigga dhalmada(Umusha) uu hayn karo haweeneyda?
Jawaab: Mudda go`an ma laha.
Suáal 43aad: Sheeg muddada ugu badan ee haweeneydu dhiigga dhalmada hayn karo?
Jawaab: Waa 40 maalmood, waa inta ugu badan ay umusha ku jiri karto.
Suáal 44aad: Waa sidee haddii dhiigga dhalmada ka joogsado 40 cisho ka hor?
Jawaab: Waa ay daahir noqoneysaa, waa in ay qubeysataa, tukataa.
Suáal 45aad: Waa sidee haddii dhiigga dhalmada dhaafo 40 cisho?
Jawaab: Waxa ay noqaneysaa mustaxaado (dhiig furan qabta), iyadoo uu dhiiggu ka socdo ayay qubeysaneysaa, markaa kadibna salaad walba way u weysa qaadaneysaa, soomeysaa.
Suáal 46aad: Waa sidee haddii dhiiggu dhaafay 40 cisho kadib balse la gaaray xilligii uu ku dhici jiray dhiiggga caadada?
Jawaab: Markaas waa ay sugeysaa illaa uu ka dhammaado xilligii caadadu hayn jirtay kadibana mustaxaado (dhiig furan) ay noqoneysaa, oo sideeda bey ku tukaneysaa kuna soomeysaa.
Suáal 47aad: Maxaa ka mamnuuc ah haweeneyda umusha ah (dhiigga dhalmada ka socdo)?
Jawaab: Waxaa ka mamnuuc ah waxii ka mamnuuc ahaa haweeneyda caadada qabta.
Suáal 48aad: Ma la furi karaa (dalaaqa) haweeneyda mudada uu ka socdo dhiigga dhalmada?
Jawaab: Haa.
Suáal 49aad: Maalin ramadaan wax ma cuni kartaa haweeney caada qabta ama nifaas (dhiigga dhalmada) qabta?
Jawaab: Haa, laakiin waxaa fiican in aysan dadka hortiis ku cunin.
Suáal 50aad: Haweeney caadadu ka joosatay ama nifaaska (dhiigga) dhalmada waqtiga casarka ma duhur iyo casar baa laga doonayaa (laga rabaaa)?
Jawaab: Maya, casar uun bey tukaneysaa, sidoo kale haddii ay waqtiga cishaha daahir noqoto waxa ay tukaneysaa cishaha qura.
انتهى بحمد الله تعالى فالله أسأل أن يجعل هذه الوريقات مباركاً نافعاً لي ولإخواني المسلمين وأن يغفر لي فيه زللي وتقصيري وجهلي والحمد لله أولاً وآخراً وظاهراً

وباطناً والله أعلى وأعلم وصلى الله على نبينا محمد وعلى آله وصحبه وسلم
Dhammaad
Hagaajinta Cibaadada (Salaadda, Soonka, Xajka iwm)
S1: Maxaa shardi u ah cibaadada?
J: In la niyeesto.
S2: Halkee laga niyeystaa?
J: Qalbiga, ma bannaana ku dhawaaqida.
S3: Waa imisa tiirarka Islaamka? Kala sheeg?
J: Waa 5,
(1)Waa in uu qofku rumeeyaa in uu ilaah kali yahay, nabi Muxammad (scw) uu yahay rasuul ilaah soo diray.
(2) Salaadda oo la hagaajiyo.
(3) Sakada oo la bixiyo.
(4) Bisha ramadaan oo la soomo.
(5) Xajka oo la aado (qofkii awooda).
S4: Waa imisa tiirarka iimaanka? Kala sheeg?
J: (1) Ilaah oo la rumeeyo.
(2) Malaa`ikta oo la rumeeyo.
(3) Kutubta oo la rumeeyo.
(4) Rususha oo la rumeeyo.
(5) In qiyaamo ay jirto la rumeeyo.
(6)In aad rumeyso wixi kugu dhaca in ilaah uu kuu qoray (wax fiican iyo wax xunba).
S5: Waa maxay dahaaro marka laga hadlayo fiqiga?
J: Waa nadaafad kuu ogolaaneysa tukashada salaadda.
S6: Sheeg maxaa nijaasada ah?
J: (1) Kaadida.
(2) Saxarada.
(3) Dhiigga.
(4) Matagga.
(5) Dhareerka eyga.
(6) Madi (biyaha yimaado shahwada kahore(uu kacsado).
(7) Wadi (biyaha yimaada marka qofku kaadiyo kaddib ama saxarada iska riixo).
S7: Sheeg wax yaabaha aan nijaasada aheyn?
J: (1)Dhiigga yar sida(hilibka dhiiggiisa, beerka dhiiggiisa marka la gowraco, sangorarka).
(2)Dhoobada wadada (dhiiqada).
(3)Carunka sida (dheecaanka, malaxda aan ka imaan farjiga).
S8: Ma nijaas baa haddii maradu gaarto mani(shahwo)?
J: Maya, waa daahir,laakiin waxaa fiican haddii ay qoyaan tahay in la

dhaqo,haddii ay qaleeyl tahay in faraha lagu jajabiyo.
S9: Waa sidee haddii aan shakkiyo maro daahir aheyd in ay nijaas noqotay?
J: Waa daahir, waayo haddii uu shakki yimaado waxaa la qaadanayaa kan la hubo.
S10: Waa sidee haddii aan shakkiyo maro nijaas aheyd in aan dahiray?
J: Waa nijaas.
S11: Ma nijaas baa xayawaanka la cuno saxaradooda iyo kaadidooda?
J: Maya.
S12: Sidee loo dahirayaa kaarbeetka(roogga) haddii nijaaso ay gaarto?
J: Waxaa lagu dahirayaa in lagu shubo biyo kabadan nijaasada.
S13: Goorma ayuu hilibka xoolaha xalaal yahay?
J: Marka bisinka lagu qalo.
S14: Goormuu diggaagu xalaal yahay?
J: Marka bisinka lagu qalo.
S15: Mala cuni karaa xayawaanka bada ku nool oo dhan?
J: Haa.
S16: Ma xalaal baa hilibka faraska?
J: Haa.
S17: Goormuu qofku qaangaaraa?
J: (1) Haddii uu buuxiyo 15 sano.
(2) Ama mani ay katimaado.
(3) Bisqin (shuun) uu u soo baxo.
(4) Gabadha ay katimaado caado(xayd).
S18: Goormeey biyuhu nijaaso naqdaan?
J: Marka uu is badalo midabkoodu, ama urkoodu, ama dhadhankoodu.
S19: Maxaa ka reeban qofka ku jira musqusha?
J: in uu gacanta midig cowrada(farjiga ama dabada) ku taabto ama uu ku dhex sheekeysto.
S20: Mala geli kartaa kitaab qura`aan musqusha?
J: Maya.
S21: Mala geli kartaa musqul cajalad qur`aan ah ama mp3 qur`aan ay ku duubanyahay?
J: Haa.
S22: Ma lagu istinjoon karaa dhul bannaan?
J: Haa, laakiin qiblada lama ogola in loo jeesto ama loo dhabar jeediyo.

S23: Sidee ugu wanaagsan ee looga qubeeystaa janaabada?
J: (1) Gacmaha ayaa la dhaqayaa.
(2) Farjiga (xubinta taranka ayaa la dhaqayaa.
(3) Waa la weysa qaadanayaa.
(4) Madaxa (timaha)ayaa3 jeer la dhaqayaa.
(5) Kaddibna inta hartay ayaa la dhaqayaa isagoo kabilaabaya dhanka midig.
S24: Sheeg weelasha aan lagu weysa qaadan karin ama wax lagu cuni karin ama lagu cabi karin?
J: Waa kuwa laga sameeyay dahabka iyo qalinka.
S25: Mala isticmaali karaa weelasha gaaladu ay wax lu cabaan?
J: Haa, laakiin waa in la dhaqaa.
S26: Imisa shey baa lagu weeysa qaataa? Kala sheeg?
J: Waa 2, biyaha iyo ciida.
S27: Sheeg side ugu wanaagsan ee loo weysa qaataa?
J: (1) Bisinka ayaa lagu bilaabayaa.
(2) Gacmaha oo 3 jeer la dhaqo.
(3) Afka oo 3 jeer la dhaqo.
(4) Sanka oo 3 jeer biyo lagula duufsado.
(5) Wajiga oo 3 jeer la dhaqo.
(6) Gacmaha ilaa suxulka oo 3 jeer la dhaqo.
(7) Timaha oo dhan biyo la mariyo mar qura (hal mar soojeed iyo siijeed oo ay ku jiraan dhagaha).
(8) Lugaha ilaa cirbaha oo la dhaqo.
S28: Maxaa jabiya waysada?
J: (1) Hurdada.
(2) Hilibka geela.
(3) Waxkasta oo kasoo baxa horey iyo gadaal sida (Saxarada & Kaadida iwm).
(4) Cawrada oo la taabto.
(5) Caqliga oo taga sida(waalida,sakhraamida,iyo suuxdinta).
S29: Ma waajib baa bisinka marka la weeysa qaadanayo?
J: Maya,waa sunno.
S30: Maxaa ka mid ah wax yaabaha qubeeyska waajibiya?
J: (1) Shahwada(biyaha raga iyo dumarka marka ay qaangaaraan) oo ka timaada.
(2) Galmada.
(3) Dhiiga caadada (xaydka).
(4) Qofka oo islaama.
(5) Dhimashada (qofka oo dhinta).
S31: Yaa ku weeysa qaata ciida?

J: (1) Haddii uu biyo waayo.
(2) Haddii uu isticmaalo biyaha xannuunku ku kordhayo.
(3) Ama dhaawaca bogsashadiisu uu dib u dhacayo.
(4) Haddii biyuhu aad iyo aad u qabow yihiin uusan haysan wax uu ku kululeeyo.
S32: Sidee loogu weeysa qaataa ciidda?
J: Labada calaacalood ayaa dhulka lagu dhufananyaa hal mar, kadibna waxaa la marinayaa wajiga, kadibna labada calaacalood dushooda(faraha korkooda).
S33: Maxaa jabiya marka ciida lagu weysa qaato?
J: (1) Biyo aad hesho.
(2) Wixii jabin jiray marka biya lagu weysa qaato.
S34: Maxaa ka xaaraan ah qofka janaabada qaba?
J: (1) Salaadda.
(2) Dawaafka.(kacbada oo 7 jeer lagu wareego).
(3) Taabasha qur`aanka.
(4) Aqrinta qur`aanka.
(5) Masjidka oo lagu nagaado(in badan la joogo).
S35: Maxaa ka xaaraan ah haweeneyda xaydka (caadada)qabta?
J: (1) In ay tukato.
(2) In ay soonto.
(3) In kitaabka qura`aanka aqriso ama taabato.
(4) In kacbada ay dawaafto.
(5) In masjidka ay ku nagaato.
(6) In galmo ay sameyso.
S36: Imisa salaad ayaa laga doonayaa haweeneydu hadii daahir noqoto qoraxda inta aysan dhicin?
J: Salaadda duhur iyo casar waayo waa kuwa la isku jamciyo.
S37: Imisa salaad ayaa laga doonayaa haweeneydu haddii ay daahir noqoto inta aysan soo galin salaada subax?
J: Salaadda maqrib iyo cishaha.
S38: Sheeg salaadaha iyaga qura ay tukaneyso?
J: Haddii daahir ay noqoto salaadda subax kadib, salaadda duhur kaddib iyo salaadda maqrib, waayo iyaga laguma jamciyo wax iyaga ka horreeya.
S39: Ma laga rabaa haweeneydu salaadda haddii xayd ka yimaado iyadoo waqtiga salaadda ay daahir aheyd in la eg rakco?
J: Haa.
S40: Maxaa ka xaaraan ah qofka aan weysa qabin?
J: (1) Salaadda.
(2) Dawaafka kacbada.

(3) Taabashada kitaabka qur`aanka.
S41: Ma laga aqrin karaa dusha qur`aanka weysa la`aan?
J: Haa.
S42: Ma jabeeysaa haddii la taabto farjiga ama dabada weysada?
J: Haa.
S43: Ma jabeysaa weysada haddii lataabto nijaaso?
J: Maya, laakiin waxaa waajib ah in la iska dhaqo.
S44: Sideen yeelayaa haddii gacantu ay duubantahay ama uu dhibayo biyaha?
J: Gacantaada oo qoyan baad kula masaxeysaa.
S45: Muxuu sameynayaa qofku haddii aanu kala garaneyn in uu weysa qaatay iyo in aanu weysa qaadan?
J: Wuu weysa qaadanayaa.
S46: Muxuu sameynayaa haddii uu hubo in uu weysa qaatay balse uu ka shakkiyay in weysadii ka jabtay?
J: Uma baahna weeysa qaad, waayo weysada ayuu hubaa.
S47: Ma aadaamayaan dumarku haddii ay jamac yihiin?
J:Maya, ma adimayaan mana ay aqimayaan.
S48: Sheeg shuruudaha salaadda? Waa imisa?
J: Waa 5,
(1) Waqtiga salaadda oo gala.
(2) In qofku daahir ka yahay (jirkiisa,dharkisa, halka u ku tukanayo,iyo in uu weysa qabo).
(3) In cawrada la qariyo.
(4) In qiblada loo jeesto.
(5) In la niyeesto.
S49: Waa imisa tiirarka salaadda? Kala sheeg?
J: Waa 14,
(1) In la istaago.
(2) In la dhaho allaahu akbar.
(3) In faatixada la aqriyo.
(4) In la rukuuco.
(5) In laga istaago rukuucda.
(6) In la sujuuda.
(7) In laga kaco sujuuda.
(8) In la fariisto labada sujuud dhexdooda.
(9) In la fariisto ataxiyaadka dambe.
(10) In la aqriyo ataxiyaadka dambe.
(11) In nabiga oo lagu salaiyo.
(12) In la salaama naqsado.
(13) In la tartiibiyo(in lagu xasilo).

(14) In aanan lakala hormarin(sida ay iskugu xigxigaan).
S50: Ma jabeysaa salaadda haddii laga tago mid ka mid tiirarka salaadda?
J: Haa.
S51: Maxaa jabiya salaadda?
J: (1) Kas oo loo hadlo.
(2) Qiblada oo laga weecdo.
(3) Labada cawro oo wax kasoo baxaan.
(4) Dhaqaaq fara badan.
(5) Qosolka.
(6) Cunid iyo cabid.
S52: Mala soo celinayaa haddii latukado weyso la`aan salaadda?
J: Haa.
S53: Ma la soo celinayaa salaadda haddii aan xusuusto in marada aan ku tukaday nijaas tahay?
J: Maya.
S54: Ma soo celinayaa salaadda haddii qofku ogaado in qibladii uu u tukaday qalad aheyd?
J: Maya.
S55: Ma lagu tukan karaa kabaha?
J: Haa.
S56: Ma laga rabaa qofka xannuunsan salaadda?
J: Haa, hadduu wax kala garanayo.
S57: Sidee ayuu u tukanayaa qofka xannunsan?
J: Sida uu awooda,marka hore istaag kadib fadhi, kaddibna jiif.
S58: Imise xubnood ayaa laga sujuudaa? Kala sheeg?
J: Waa 7,
(1) Wajiga.
(2) Sanka.
(3-4) Labada calaacalood (midig,bidix).
(5-6) Labada jilbood (midig,bidix).
(7) Labada lugood farahooda.
S59: Maxuu sameeynayaa qofku haddii uu shakiyo salaadda imisa ayuu tukaday ma 3 mise 4?
J: Waxuu qabsanayaa tirada yar, kaddibna labo sujuud ayuu la imaanayaa inta uusan salaadda ka bixin.
S60: Muxuu sameynayaa qofku haddii la aqimo isagoo sunno ku jiro?
J: Haddii qofku rakcada 1aad ku jiro wuu ka baxayaa salaada, haddii rakcada 2aad uu ku jiro wuu dhameystirayaa.
S61: Ma waajib baa in safka la simo salaadda?

J: Haa.
S62: Ma istaagi karaa qof kaligiis saf haddii safka hore uu buuxo?
J: Haa.
S63: Ma raacayaa qofku haddii imaamku u kaco rakco 5aad?
J: Maya, haddii aad ogtahay in uu qaldamay.
S64: Ma ku raacayaa qofku haddii imaamku attaxiyaadka 1aad uu ilaawo?
J: Haa.
S65: Maxaan sameeynayaa haddii aan shakiyo anigoo ma ´muum(qofka imaamka gadaashiisa ku tuknaya) ah?
J: Wax kasoo qaad malaha, waayo imaamka ayaa qaladka kaa qaadaya.
S66: Sidee ayaa imaamka loo sixi karaa?
J: Dumaraku way sacbinayaan, raguna waxay dhahayaan subxaanal-laah.
S67: Halkee ayaa imaamka salaadda lagala xirtaa?
J: Meesha uu markaas marayo.
S68: Sujuudu-tilaawa(waa sujuuda qur`aanka aqriskiisa ku timaada) ma leedahay xirasho iyo salaama naqsi?
J: Maya.
S69: Ma waajib baa salaadda jimco?
J: Haa.
S70: Imisa qof ayay jimcadu ku ansaxdaa?
J: Waxay ku ansaxeysaa 3 qof oo uu imaamku ku jiro.
S71: Yeey ku waajibeeysaa salaadda jimcaha?
J: Raga qaangaarka ah, ee caafimaadka qaba, musaafir aheyn.
S72: Sheeg xili aysan jimcadu waa jib aheyn ?
J: Waa marka ay isku beegmaan malin ciid iyo maalin jimco.
S73: Yaa loo ogol yahay in uu duhur tukado maalinta jimcaha iyo ciida isku beegmaan?
J: Waa qofka maalintaas tukada salaada ciida.
S74: Muxuu sameynayaa qofku haddii uu soo galo masjidka iyadoo uu socdo aadaanka jimcaha?
J: Wuu tukanayaa, ma sugayo inta uu aadaanku ka dhamaanayo.
S75: Ma hadli karaa qofka khudbada jimcaha oo socota?
J: Maya.
S76:Sideen ku aamusiyaa haddii aan arko qof hadlaya?
J: Hadii aad aragto qof hadlaya gacanta kala hadal.
S77: Ma hadli karaa qofku labada khudbo dhexdooda?
J: Haa.
S78: Imisa ayuu tukanayaa qofka salaadda jimcaha ka soo gaara

attaxiyaadka?
J: Wuxuu tukanayaa 4 rakca oo duhur ah.
S79: Ma safri karaa qofku maalinta jumcaha?
J: Haa, laakiin haddii aadaanka 2aad la adimo maya .
S80: Maxaa u banaan musaafirka ?
J: In uu salaadda gaabiyo iyo in uu afuri karo maalin ramadaan.
S81: Sheeg salaadaha lagaabiyo safarka?
J: Duhur,casar,cishe waxaana la tukanayaa mid kastaa 2 rakco.
S82: Sheeg salaadaha la isku jamciyo(la isku qabto)?
J: Waa, (1)duhur iyo casar.
(2)magrib iyo cishe.
S83: Goormaa la gaabiyaa salaadda safarka?
J: Marka qofku magaaldiisa ka baxo.
S84: Goor muusan gaabin karin musaafirka salaadda?
J: Marka uu magaaladiisa yimaado.
S85: Haddii aad saaran tahay diyaarad, waqtigii salaadda ay soo gashay,qibladana aadan garaneynin, sideed yeeleysaa?
J: Haddii aad ka baqeysid inta aysan diyaaradu caga dhigan in salaaddu ay kaa tagto, waxaad qiblada weydiineysaa dadka kula saaran diyaarada, haddii ay garan waayaan waxaad u tuken meesha aad is leedahay qiblada ayaa jirta.
S86: Maku tukan karaa qofka fadhi diyaarada isagoo awooda istaaga balse ka xishoonaya dadka?
J: Maya,lama ogola.
S87: Sheeg sunnooyinka rawaatibka (la daa`imo) Waa imisa?
J: Waa 12 rakco, (2 subaxa kahor, 2 duhurka kahor, 4 duhurka kadib, 2 maqribka kadib, 2 cishaha kadib).
S88: Sheeg sunnada uusan ka tagi jirin Nabiga(scw) haddii uu musaafir yahay iyo haddii uu joogo?
J: Waa sunnada salaadda subax.
S89: Majiraan sunnooyin kale? Maxaa kamid ah?
J: Haa, sida (witriga, salaatul-leylka, salaatul-duxaa, salaatul- istikhaarah, salaatu-taraawiix,salaatul-ciid).
S90: Midee ugu fadli badan salaadaha sunnada?
J: Salaatul-laylka.
S91: Maku xirankaraa qof raba in uu tukado salaad farad qof kale oo tukanaya salaad sunno ah?
J: Haa.
S92: Goormaa la tukadaa salaatul-istikhaara?
J: Marka aadan ogeyn in sheygu uu ku jiro khayr iyo shar.
S93: Sidee baa loo istikhaareeystaa?

J: Marka hore 2 rakco sunna ah ayaad tukan,kadibna ducadaan ayaad aqrineysaa
اللهم إني أستخيرك بعلمك، وأستقدرك بقدرتك، وأسألك من فضلك العظيم، فإنك تقدر ولا أقدر، وتعلم ولا أعلم، وأنت علام الغيوب. اللهم إن كنت تعلم أن هذا الأمر magaca waxa uu ku istikhaareeysanayo ayuu sheegi
خيراً لي في ديني ومعاشي ومعادي وعاقبة أمري؛ فاقدره لي، ويسره لي، وبارك لي فيه. اللهم وإن كنت تعلمه شراً لي -مثل الأول- فاصرفني عنه، واصرفه عني، واقدر لي الخير حيث كان، ثم رضني به، أو قال: في عاجل أمري وآجله
S94: Waa imisa rakco sunnatu-duxaa?
J: Waxaa ugu yar 2 rakco, waxaa ugu badan 8 rakco.
S95: Sheeg waqtiga la tukado sunnatu-duxaa?
J: Waa marka ay qoraxda soo baxdo rubuc saac kadib, illaa 10 daqiqo kahor inta aysan qoraxdu wareegan(waqtiga duhur).
S96: Waa imisa rakco salaadda ciida?
J: Waa 2 rakco.
S97: Waa imisa takbiirta(allahu-akbar) salaadda ciidda?
J: Rakcada koowaad waa 7, rakcada labaad waa 5.
S98: Salaadda janaazada ma leedahay rukuuc iyo sujuud?
J: Maya.
S99: Maxaa la aqriyaa salaadda janaazada?
J: (1) Faatixada.
(2) Salliga nabiga.
(3) Meydka oo loo duceeyo.
(4) Dhinaca midig oo halmar loo salaama naqsado.
S100: Halkee laga istaagayaa meytka marka lagu tukanayo?
J: Raga madaxa agtiisa ayaa laga istaagayaa, haweenkana dhexda.
S101: Sheeg goobaha(meelaha) aan lagu tukan karin?
J: (1) Qabuuraha.
(2) Qashin qubka.
(3) Musqulaha.
(4) Golaha geela(meesha geela fariisto ama ku hoydo).
S102: Maxaa xaaraan ah in qabriga lagu sameeyo?
J: (1) In lagu socda.
(2) In lagu fariisto.
(3) In ladhiso.
(4) In wax lagu qoro.
S103: Imisa saka ayaa jirta? Kala sheeg?
J: Waa 2, (1)Sakaatul-maal.
(2)Sakaatul-fidri.
S104: Imisa sheey ayaa sakada laga bixiyaa?
J: (1) Xoolaha, sida geela ariga iyo lo`da.

(2) Waxa dhulka ka soo baxa sida (abuurka ,miraha).
(3) Dahabka iyo qalinka iyo wixii u dhigma sida (lacagta).
(4) Badeecadaha.
S105: Ma laga sakeynayaa guryaha,baabuurta iyo alaabaha yaala guryaha?
J: Maya, laakiin haddii laga beecmushtarayo haa.
S106: Ma laga sakeeynayaa xoolaha deen lagaaga qaatay?
J: Haa, haddii aad ka helaysid qofka aad deemisay, laakiin haddii aadan ka qaadan karin kama sakeyneeysid.
S107: Goormaa laga sakeeyaa waxa dhulka ka soo baxa?
J: Marka ay gaaraan waqtiga gurashada.
S108: Waa maxay nisaab?
J: Waa marka ay hantidu gaarto xadka laga sakeeyo.
S109: Goormaa laga sakeeynayaa xoolaha (geela, lo`da, ariga)?
J: (1) Marka nisaab (xaddiga sakada) ay gaaraan .
(2) Sanad ay ka soo wareegato.
(3) Sanadka intiisa badan ay daaq u baxdo.
S110: Sakada malaga rabaa haddii xooluhu ay nisaab ka yar yihiin?
J: Maya.
S111: Maxaa u nisaab ah geela (imisa ayaa geela laga sakeynayaa)
J: Marka uu gaaro 5.
S112: Maxaa u nisaab ah lo`da?
J: Marka ay gaarto 30.
S113: Imisa ayaa ariga u nisaab ah?
J: Marka uu gaaro 40.
S114: Imisa ayaa laga sakeeynayaa dahabka?
J: 85 gram, waxaana ka waajibaya 2.5% uuna kasoo wareego sanad.
S115: Imisaa ayaa laga sakeynayaa qalinka?
J: Marka uu gaaro 595 gram.
S116: Imisa ayaa laga sakeynayaa lacagta?
J: Marka ay gaarto lacag u dhiganta 85 garm oo dahab ah, ama 595 gram oo qalin ah,waxaa wanaaagsan in lagu xisaabiyo qalinka maadaama uu ka raqiisan yahay.
S117 : Goormaa ayaa sako lagarabaa lacag xadka sakada gaartay?
J: Marka ay ka soo wareegato sanad.
S118: Mala hormarin karaa sakada bixinteeda?
J: Haa 2 sano uun.
S119: Sakada bixinteeda mala dib dhigi karaa?
J: Maya.
S120: Yaa la siinayaa sakada?
J: 8 qolo,

(1) Fuqarada.
(2) Masaakiinta.
(3) Shaqaalaha ka shaqeeya sakada.
(4) Kuwa lasoo dhawaynayo quluubtooda(soo islaamay).
(5) Kuwa la xureeynayo.
(6) Kuwa awoodi waaya bixinta deenta(ku cuslaatay).
(7) Musaafirka ay sahayda ka go`day.
(8) Jika alle oo loo bixiyo.
S121: Mala siin karaa hal qolo oo kamid sideedaas?
J: Haa.
S122: Yeey ka mamnuuc tahay in sako lasiiyo?
J: (1) Gaalka.
(2) Qaraabada nabiga.
(3) Naagta ninkoodu xoola leeyahay.
(4) Assalkaada sida(aabe ama awoowe).
(5) Faracaada sida (ilmahaada iyo waxa ay dhalaan).
S123: Waa kuwee qaraabada nabiga?
J: Waa reer banuu-haashim iyo reer banul-muddalib.
S124: Yeey ku waajibeeysaa sakaatul-fidri?
J: Musalimiinta dhamaan yar iyo weyn.
S125: Imisaa la bixinayaa?
J: Suus raashin ah(3kilo) ee laga cuno dhulkaas.
S126: Goormaa la bixinayaa sakaatul-fidri?
J: Qorax dhaca maalinta ugu dambeeysa ramadaan illaa salaada ciida la tukado.
S127: Ma laga hor marin karaa maalin ama 2 maalmood?
J: Haa.
S128: Ma la bixin karaa sakaatul-fidriga lacag?
J: Maya.
S129: Sheeg bilaha islaamka?
J: (1)muxarram, (2)safar, (3)rabiicul-awwal, (4)rabiicu-thaanii, (5)jumaadil-uulaa, (6)jumaadil-thaanii, (7)rajab, (8)shacbaan (9)ramadaan, (10)shawwaal, (11)thul-qicdah, (12)thul-xijjah.
S130: Ma jiraa soonkiisa haddii qofku uusan soon ku seexan habeennimadii?
J: Maya.
S131: Sheeg shuruudaha soonka?
J: Waa in uu yahay,
(1) Muslim.
(2) Qaangaar.
(3) Wax kala garanaya (aan waalneeyn).

(4) Awooda (aan xanuunsaneyn).
(5) Musaafi aheeyn.
(6) In aysan jirin wax kahor istaagaya, sida xaydka iyo nifaaska(dhiigga ka yimaada haweenka marka ay dhalaan).
S132: Sheeg waxa jabiya soonka?
J: (1) Kas oo loo cuno ama loo cabo.
(2) Galmo la sameeyo.
(3) Shahwada oo kas la iskaga keeno.
(4) Xaydka.
(5) Nifaaska (dhiigga dhalmada).
(6) Irbada nafaqada keenta oo la qaato.
(7) Kas laysku matajiyo.
() Diinta oo laga baxo(riddoobid).
S133: Ma qubeysan karaa qofku galab hadii uu sooman yahay?
J: Maya.
S134: Ma jabayaa soonka haddii far la geliyo dhegta ama sanka?
J: Maya.
S135: Majiraa soonkiisa qof toosay isagoo janaaba qaba?
J: Haa.
S136: Ma laga rabaa soon haweeneyda dhiigga ka joogsaday habeenki inta aan la adimin salaada subax?
J: Haa.
S137: Waa kee xanuunka la ogol yahay in la afuro?
J: Waa haddii naftiisa uu dhimasho ugala baqo, ama cudurka uu u maleeynayo in uu ku siyaadayo.
S138: Ma afuri kartaa haweeneyda uurka leh ama nuujineysa?
J: Haa, haddii nafteeda ay u baqdo ama ubadkeeda(ilmaheeda).
S139: Maxaa lagu leeyahay marka ay afurto haweeneyda uurka leh ama nuujineysa?
J: Waxaa lagu leeyahay soon qura.
S140: Sidee buu yeelayaa qofka xannunsan ee gabowga ah(waayeel), ama qofka aan la fileyn in uu ka kaco cudurkaas?
J: Maalin kastaa oo ramadaan ayuu miskiin siinayaa suus barkiisa(kilo iyo bar) cuntada halkaas laga cuno.
S141: Maka soomi karaa waalidkey dhintay haddii soon lagu lahaa ?
J: Haa.
S142: Ma qaleyneey saa soonka haweeneeyda xaydka qabta?
J: Haa, laakiin salaadda maya.
S143: Maxay ku kala duwan yihiin salaadda taraawiixda iyo salaatul-laylka?
J: Waa salaatul-leylki oo la nasanayo 4 rakco kastaa kaddib.

S144: Ma leedahay taraawiixdu tiro go`an?
J: Maya, intii la doono ayaa la tukan karaa.
S145: Muxuu sameynayaa qofku haddii uu yimaado masjidka iyadoo taraawiix la tuknayo balse ay u harsan tahay cishe?.
J: Wuxuu la xiranayaa imaamka ,balse waxuu niyeysanayaa cishaha, wixii u dhiman wuxuu dhameystirayaa marka uu imaamku salaama naqsado kaddib.
S146: Muxuu sameynayaa qofku hadii taraawiixdu dhaafto qayb?
J: Waxaad u istaageysaa inta kuu harsan marka imaamku witriga dhameeyo kaddibna waad witrineysaa.
S147: Maxaa u bannaan qofka haddii uu doonayo in uu habeenki tahajud tukado?
J: In witriga uu dib dhigto, iyo in uu imaamka witriga la dhameysto balse marka uu tahajudka usoo kaco uusan witri labaad tukan.
S148: Ma bannaantahay aqrinta kitaab qur`aan adigoo tukanaya?
J: Haa.
S149: Waa goorma waqtiga salaadda witriga?
J: Waa inta u dhaxeysa cishaha iyo subaxa.
S150: Imisa ayaa ugu yar salaadda witriga?
J: Hal rakco,waxaana la tukan karaa 3 rakco oo isku xigta,ama 5 rakco oo isku xigta.
S151: Ma la tukan karaa laba witri hal habeen?
J: Maya.
S152: Sidee baa kuu banaan marka aad sadex witri tukaneysid?
J: In aad tukatid 2 rakco kadibna 1 rakco,ama in aad isku qabato 3da rakco (hal attaxiyaad aad ku dhameyso).
S153: Sheeg maalmaha aan la soomi karin?
J: (1) Ciidul-fidri.
(2) Ciidul- adxaa.
(3) Sadexda maalmood ee ka dambeysa ciidul adxaa.
(4) Maalin shaki uu ku jiro sida(bilashada ramadaan) balse qof ay ku soo beegmatay soon sunna oo uu soomi jiray isagu waa uu soomi karaa.
(5) Jimcaha ama sabtida in si gaar ah loo soomo (waa haddii aan lagu xiriirin maalin ka horeysa ama ka dambeeysa).
S154: Sheeg maalmaha in la soomaa ay sunno tahay?
J: (1) Maalinta sagaalaad ee carafa.
(2) Maalintan caashuuraa(bisha muxarram 10 keeda).
(3) Shawwaal oo la soomo 6 maalmood.
(4) Bil kastaa oo lasoomo 3 maalmood.
(5) Isniinta iyo qamiista.

S155: Sidee ugu fiican in la soomaa caashuuraa?
J: In la soomaa caashuuraa iyo maalinta ka horeysa(9aad).
S156: Keebaa ugu fadli badan soonka sunnada ah?
J: Waa soonka maalinta carafa(bisha dil-xijja).
S157: Ma soomi karaa soonka carafa qof jooga banka carafa?
J: Maya.
S158: Ma shardi baa in la isku xiriiriyo lixda maalmood ee shawwaal?
J: Maya.
S159: Ma soomi karaa lixda maalmood ee sunnooyinka shawwaal qof lagu leeyahay soon ramadaan?
J: Haa, balse waxaa ajar badan in uu waajibka soomo kadiban uu soomo sunnada.
S160: Waa maxay ictikaaf?
J: Waa in lagu nagaadaa masjid jaamic ah(masjid jimcaha lagu tukado).
S161: Waa imisa ictikaafku?
J: Wuxuu noqon karaa maalmo, habeen qura, maalin qura ama saacado.
S162: Goormaa ugu fadli badan ictikaafka?
J: Bisha ramadaan.
S163: Sheeg sida sunnada ah ee loo ictikaafo ramadaan?
J: Waa in la ictikaafaa, laga bilaabo qorax dhaca habeenka 20 aad, illaa maalinta ugu dambeeysa ee ramadaan.
S164: Maxaa ka mamnuuc ah qofka ictikaafaya?
J: In uu galma sameeyo, ama masjidka uu kabaxo iyadoo aysan jirin wax daruuro ah sida(cunta uu soo qaato, ama dharka oo wasakhooba).
S165: Marka uu qofku ku jiro ictikaaf maka qayb gali karaa janaaza ama ma booqan karaa qof xanuunsan?
J : Maya.
S166: Imisa jeer ayaa laga rabaa xaj qofka muslimka ah?
J: Hal mar qura.
S167: Ma waajib baa cumrada?
J: Haa.
S168: Waa imisa tiirarka xajka? Kala sheeg?
J: Waa 4,
(1) Ixraamka(xirashada).
(2) Dawaaful-ifaada(waa dawaafka ku gaar ah xajka).
(3) Sacyiga(waa socodka iyo rucleynta inta u dhaxeysa buuraha Safa iyo Marwa).

(5) Istaaga carafa.
S169: Waa imisa tiirarka cumrada?
J: Waa 3,
(1)Ixraamka(xirashada).
(2) Dawaafka.
(3) Sacyiga.
S170: Maxaa loola jeedaa muxrim?
J: Waa qofka xaj ama cumra xirta.
S171: Waa imisa nooc xajka? Kala sheeg?
J: Waa 3 nooc.
(1) Ifraad(xaj kaliya oo la xirto, kadibna cumra xirasho).
(2) Qiraan(isku dar xaj iyo cumra oo lawada niyeesto).
(3) Tamattuc(cumra xirasho, kadibna xaj xirasho).
S172: Kee baa ugu fadli badan?
J: Tamattuc.
S173: Sheeg shuruudaha xajka (faradku uu ka dhacayo)?
J: Waa in uu yahay,
(1) Muslim.
(2) Xuryahay(adoon uusan aheeyn).
(3) Caqli qabo(waalneeyn).
(4) Qaangaar.
(5) Awooda.
S174: Maxaa ka mamnuuc ah muxrimka?
J: (1) In uu is carfiyo sida (saabuunta ama shaambada carfeysa).
(2) In uu ciddiyaha jaro.
(3) In uu timaha ama garka jaro.
(4) In uu madaxa daboolo sida (cimaamad ama koofi, dumarkana ay niqaab xirtaan ama gacmagashi).
(5) In uu galmo sameeyo.
(6) In uu nikaax sameeyo ama shukaansi.
(7) In uu xirto dhar xubin daboola khaas ahaan raga sida
(shaar, surwaalka,qamiiska,kastuumo, kobo, sigsaan(sharabaad).
(8) In uu dilo ugaarta duur joogta ah.
S175: Muxuu sameynayaa haddii qofku uu sameeyo wax ka mamnuuc ah isagoon garaneyn ama iloobay?
J: Waxba laguma laha.
S176: Ma gashan karaa dacas?
J: Haa, haddii aysan faraha dabooleynin.
S177: Ma gashan karaa dhar carfaya inta uusan xajka xiran?
J: Haa.
S178: Ma shaleysan karaa muxrimka?

J: Haa.
S179: Ma qubeysan karaa muxrimka?
J: Haa.
S180: Ma isku meyri karaa saabuun ama kareem?
J: Haa, haddii aysan caraf ku jirin.
S181: Ma dabooli karaa madaxa haddii uu seexanayo?
J: Maya.
S182: Waa maxay miiqaat?
J: Waa halka laga xirto xajka ama cumrada.
S183: Imisa meelood ayaa laga xirtaa? Kala sheeg?
J: waa 5 meelood.
(1) Dil-xuleyfa(waxaa ka xirta reer Madiina iyo wixii xiga).
(2) Juxfa (waxaa reer Shaam iyo wixii xiga).
(3) Yalamlam(waa reer Yamen iyo wixii xiga).
(4) Qarnul-manaazil(waa reer Najdi iyo wixii xiga).
(5) Daatu-cirq(waa reer Ciraaq iyi wixii xiga).
S184: Halkee bey ka xiranayaan reer Makka?
J : Halka ugu dhaw marka xaramka laga baxo sida(tanciim).
S185: Muxuu sameeynayaa qofku haddii uu ka gudbo miiqaatka isagoon xiran?
J: Wuu u laabanayaa.
S186: Waa maxay Jamaraat?
J: Waa dhagaxyada lagu tuuro sadexda goobood ee Mina.
S187: Imisa dawaaf baa jira? Kala sheeg?
J: Waa 3,
(1) Dawaaful-quduum(waa midka ugu horeeya marka Makka la yimaado).
(2) Dawaaful-ifaada(waa xajka dawaafkiisa).
(3) Dawaaful-widaac(waa marka qofka Makka ka baxayo).
S188: Goorma ayuu xajku bilaabanayaa?
J: Bisha thil-xijjah maalinteeda 8 aad wuxuu ku dhamaanayaa maalinta 13aad ugu badnaan.
S189: Imisa maalmood ayuu xajku soconayaa?
J: Ugu badnaan 6 maalmood sida fiican, ugu yaraan 5 maalmood.
S190: Muxuu sameynayaa maalinta 8aad (yowmu-tarwiyah)?
J: Haddii uusan Makka dagneyn miiqaatka ayuu tagayaa, wuu qubeysanayaa, is carfinayaa, dharka ixraamka ayuu xiranayaa, wuxuu oranayaa (labbeyka-laahuma xajjan),
wuxuu aadayaa Mina,wuxuu ku dukanayaa 5ta salaadood(laakiin wuu gaabinayaa duhur,casarka iyo cishaha, ma jamcinayo).
S191: Muxuu sameeynayaa maalinta 9aad (maalinta carafa)?

J: (1) Marka qoraxdu soo baxdo carafa ayuu tagayaa, duhur iyo casar ayuu ku tukanayaa xilliga duhurka,
(2) Alla-bari iyo dikri ayuu sameynayaa illa qoraxdu ka dhacdo,
(3) Kadibna xilliga maqribka ayuu wuxuu aadayaa Muzdalifa, magrib iyo cisho gaaban oo wada jira ayuu ku tukanayaa, halkaa ayuu seexanayaa , kadibna subax ayuu ku tukanayaa alluu ku baryayaa, halkaa ayuu ka qaadanayaa dhegaxyada uu tuuri doono.
S192: Muxuu sameynayaa maalinta 10aad(maalinta ciida)?
J: Wuxuu ku soo laabanayaa Mina, 5 acmaal ayuu sameynaya
(1) Dhagaxa ayuu ku tuurayaa aroorti Jamratul-caqaba 7 jeer , markasta oo uu dhegax tuurayo Allaahu-akbar ayuu oranayaa.
(2) Wuxuu gowracayaa neef
(3) Tinta ayuu xiirayaa ama jarayaa(haweenku waxay jarayaan in la eg hal far).
(4) Dawaaf ayuu sameynayaa(dawaaful-ifaada) waxaad ku dawaafeysaa dherkaada caadiga ah.
(5) Sacyi ayuu sameynayaa,(socadka Saffa iyo Marwa), waxaa xalaal u naqanaya wax kasto oo ka xaaraan ahaa muxrimka ,wuxuu ku soo laabanayaa Mina.
S193:Ma ku bilaabi karaa qofku acmaasha kuu doono?
J: Haa.
S194:Muxuu sameeynayaa maalinta 11aad?
J: Marka ay qoraxdu wareegato(duhurka), wuxuu tuuranayaa 3da Jamaraat waa sidatan,
(1) 7 jeer ayuu ku tuurayaa Jamratul-uulaa isagoo dhahaya (allahu akbar) qiblada ayuu u jeesanayaa alluu baryayaa in badan.
(2) 7 jeer ayuu ku tuurayaa Jamrul-wusdaa qiblada ayuu u jeesanayaa alluu baryayaa in badan.
(3) 7 jeer ayuu ku tuurayaa Jamrul-caqabah, ma duceysanayo markaan,
wuxuu sameynayaa sidaas oo kale maalinta 12aad iyo 13aad, kaddibna haduu Makka katagayo dawaaful-widaac ayuu sameeynayaa oo aan sacyi wadan.
S195: Malinta 12aad maka tagi karaa marka uu acmaasha dhameeyo Mina?
J: Haa, laakiin waxaa fadli badan in uu sugo maalinta 13aad.
S196: Ma xajin kartaa haweenay maxram la`aan?
J: Maya, waa in uu la socdaa maxram keeda.
S197: Maxay sameeyneysaa haweeyneydu haddii uu xayd ku dhaco iyadoo xajka xiratay?
J: Waxay sameeyneysaa wax kasta oo xajka la iska doonayo, oo aan

ka aheeyn dawaafka iyo sacyiga, iyaga marka ay daahir naqato ayay sameyneysaa.
S198: Haweeneeydu maka xajin kartaa aabaheed haddii uu dhintay ama uusan awoodi karin?
J: Haa, laakiin haddii lagu leeyahay iyada xaj maya.
S199: Ma ku waajib baa xajka qof deyn lagu leeyahay?
J: Maya.
S200: Ma lagu xajin karaa lacagta cayrta?
J: Haa,waayo Nabiga(scw) wuxuu ka cuteeya xoolihii haweeneydii yahuudiga aheyd,waxa uu hadiya siiyay boqorkii iila wuxuuna ahaa gaal.
S201: Ma ku siin karaa qofku lacag qof kale si uu uga xajiyo waalidkiisa dhintay?
J: Haa.
S202:Sidee ayaa loo cumreeystaa?
J:Miiqaatka ayuu tagayaa,wuu qubeysanayaa,is carfinayaa, dharka ixraamka ayuu xiranayaa,laakiin haweeneydu dharka ay doonta ayay xiraneysaa.
Wuxuu oranayaa(labbeykal-laahuma cumrah)ilaa Makka uu kagaaro.
Dhagaxa madow (xajarul-aswad)ayuu shuminayaa, hadduusan awoodin wuu taabanayaa, hadduusan awoodin gacanta ayuu ku ishaarayaa laakiin ma shuminayo gacanta,
marka uu bilaabayo dawaafka wuxuu oranayaa.
باسم الله والله أكبر، اللهم إيماناً بك، وتصديقاً بكتابك، ووفاءً بعهدك، واتباعاً لسنة نبيك صلى الله عليه وسلم،
ruknul-yamaaniga ayuu taabanayaa,haduusan awoodin ma ishaarayo mana takbiiranayo,wuxuu oranayaa.
(رَبَّنَا آتِنَا فِي الدُّنْيَا حَسَنَةً وَفِي الْآخِرَةِ حَسَنَةً وَقِنَا عَذَابَ النَّارِ)
illaa uu ka gaaro xajarul-aswadka,(ragu marka uu bilaabayo dawaafka illaa uu dhameeynayo wuxuu yeelayaa maradiisa bartankeeda ayuu kilkisha midig galinayaa, marada labadeeda daraf wuxuu saarayaa garabka bidix).
Saddexda dawaaf ee ugu horeysa wuu ordayaa,afarta kalana wuu soconayaa,inta uu ku dhex socda dawaafka wuxuu ku mashquulayaa quràan aqris ama dikri.
Marka uu qofku dhameeyo dawaafka,wuxuu imaanayaa Maqaamu-ibraahiim wuxuu aqrinayaa aayadan.
(وَاتَّخِذُوا مِنْ مَقَامِ إِبْرَاهِيمَ مُصَلًّى)
2 rakco ayuu maqaamu- ibraahiim ku tukanayaa,haduusan awoodin meeshuu raba ayuu ku tukanayaa,
rakcada 1aad wuxu aqrinayaa suurada قُلْ يَا أَيُّهَا الْكَافِرُونَ

rakcada 2aad wuxuu aqrinayaa. (قُلْ هُوَ اللَّهُ أَحَدٌ).
kadib Safa ayuu tagayaa markuu ku dhawaado wuxuu aqrinayaa aayada. (إِنَّ الصَّفَا وَالْمَرْوَةَ مِنْ شَعَائِرِ اللَّهِ)
Safa ayuu korayaa qiblada ayuu u jeedsanayaa gacmaha ayuu kor u qaadayaa wuu duceysanayaa wuu ku celcelinayaa 3 jeer wuxuu oranayaa Allaahu-akbar 3 jeer kadibna.
لا إله إلا الله وحده لا شريك له، له الملك وله الحمد، وهو على كل شيء قدير, لا إله إلا الله وحده، أنجز وعده، ونصر عبده، وهزم الأحزاب وحده
3 jeer ayuu dikrigaan ku celcelinayaa.
wuu ka dagayaa Safa wuxuu u soconayaa Marwa illaa uu ka gaaro calanka cagaaran wuu ordayaa illaa calanka kale uu ka gaaro, (intaan hal wareeg ayaa laga xisaabayaa) .
Markuu Marwa gaaro waxuu aqrinayaa wixii uu ku aqriyay Safa,laakiin ma aqrinayo aayadii,markuu tago Safa iyadana wareeg labaad ayaa laga xisaabayaa,laakiin ma aqrinayo aayadii, marka la dhameeyo a dawaafka yaa aayada uun la aqriyaa, illaa 7 jeer uu sidaas sameeynayaa sacyiga.
wuxuuna aqrinayaa inta uu dhexdoooda uu socdo wuxuu doono oo qur`aan ama duco ah, kaddib tinta ayuu jarayaa ama xiirayaa,laakiin haddii uu xaj u haray waxaa fiican in tinta uu gaabiyo.
kolkaas waxaa xalaal u naqanaya wax kasto oo ka xaaraan ahaa muxrimka.
Dhammaad
Waxaa diyaariyey: Sheekh Maxamed Mursal
Dhaxalka:
Suáal 293-aad: Waa imisa sababaha la isku dhaxli karo ee la isku waafaqsan yahay?
Jawaab 293-aad: waa 3 sababood. (Daliil Sharraxaadda shariifka, xaddiiska 807 & 808 cutubka baadida).
Suáal 294-aad: Sidee dhaxal loogu kala qeybin qof dhintay oo ka tegay gabadhiisa, walaashiis & gabar uu awoowe u yahay?
Jawaab 294-aad: Gabadhiisa maalka nis (badhkiis) ayey leedahay ama qaadanaysaa, gabadha uu awoowga u yahayna sudus (6 meelood meel ayey qaadanaysaa, walaashiisna inta soo hartay ayey qaadanaysaa. (Daliil: Xaddiiska 807-aad cutubka dhaxalka).
Suáal 295-aad: Ma is dhaxli karaan labo qof oo walaalo ah ama is dhalay, laakiin kala diin ah sida Muslim iyo Gaal?
Jawaab 295-aad: Maya marnaba midba midka kale ma dhaxli karo. (Daliil: Xaddiiska 808-aad cutubka dhaxalka).

Suáal 296-aad: Abtigu goorma ayuu dhaxal abtinimo xaq u yeelan karaa?
Jawaab 296-aad: Abtigu wuxuu dhaxlaa qofkii dhinta oo wax xagga aabbe kala dhashay uusan joogin. (Daliil: Xaddiiska 812-aad cutubka dhaxalka).
Suáal 297-aad: Wax ma dhaxlayaa ilmaha markaa dhashay haddii uu qayliyo, deedna uu dhinto? Malagase sii dhaxli karaa?
Jawaab 297-aad: Haa, wuu dhaxlayaa isagana waa laga sii dhaxli karaa. (Daliil: Xaddiiska 813-aad cutubka dhaxalka).
Suáal 298-aad: Ma helayaa dhaxalkiisa qofkii dila qofkuu dhaxli lahaa?
Jawaab 298-aad: Maya. (Daliil: Xaddiiska 814-aad cutubka dhaxalka).
Suáal 299-aad: Imisa ayuu qofku dardaarmi karaa maalkiisa ugu badnaan in looga sadaqeeyo?
Jawaab 299-aad: Saddex meelood meel. (Daliil: Xaddiiska 819-aad cutubka dardaaranka).
Suáal 300-aad: Saddaqada ay ilmahu ka bixiyaan waalidkood ma gaaraysaa waalidka?
Jawaab 300-aad: Haa. (Daliil Xaddiiska 820-aad cutubka dardaaranka).
Suáal 301-aad: Wax ma loo dardaarmi karaa qof dhaxalka wax ku leh?
Jawaab 301-aad: Maya. (Daliil: Xaddiiska 821-aad dardaaranka). Dhammaad. La soco qeybo kale ee Kutubka oo ku saabsan Waxyeelada.
Ganacsiga & Islaamka:
Suáal 241-aad: Maxaa lagu kala saarayaa haddii laba qof isku khilaafaan qiimaha wax ay kala iibsadeen markhaatina aysan haysan?
Jawaab 241-aad: Qofka wax iibinaya ayaa dhaaranaya, isaga ayaana hadalkiisa la qaadan ama way kala noqonayaan. (Daliil: Xaddiiska 650-aad qaybta ganacsiga).
Suáal 242-aad: Waa midkee Eyga la iska reebay lacagtiisa?
Jawaab 242-aad: Waa Eyga guriyaha lagu haysto oo aan faaaíido loo haysan. (Daliil: sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 651-aad qaybta ganacsiga).
Suáal 243-aad: Maxaa lagu sameyn wax fadhiya ama adag oo is-haysta sida Subag ama Malab haddii uu Jiir ku dhex dhaco ama ku dhinto?
Jawaab 243-aad: Waxaa la iska tuurayaa Jiirka iyo waxa hareerihiisa

ah, inta kalana waa la cuni karaa. Daliil: Xaddiiska 694-aad qaybta ganacsiga).

Suáal 244-aad: Biyaha noocee la isku waafaqsan yahay inay mamnuuc yihiin in la iibsho?

Jawaab 244-aad: Biyaha caamka ah ee qofna uusan laheyn ama meel uu leeyahay ku dhex oollin. (Daliil: Sharraxaadda shariifka, xaddiiska 660-aad qaybta ganacsiga).

Suáal 245-aad: Qofka ma iibin karaa Kalluunka badda ku jira ama wax uusan hayn?

Jawaab 245-aad: Maya, waa mamnuuc. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 667-aad qaybta ganacsiga).

Suáal 246-aad: Ma bannaan tahay in badeecadda lagu sii iibiyo isla meeshii laga iibsaday?

Jawaab 246-aad: Maya, waa xaaraam. (Daliil: Xaddiiska 669-aad qaybta ganacsiga).

Suáal 247-aad: Hal shey ma lagu iibin karaa 2 qiime oo kala duwan? Sida qofka in la yiraahdo haddaad deyn ku bixinayso waa 500 doolar, haddii aad hadda bixinaysana waa 300 doolar?

Jawaab 247-aad: Maya, waa xaaraam. (Daliil: Xaddiiska 666-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).

Suáal 248-aad: Ma bannaan tahay in shey la kala iibsanayo shardi lagu looga dhigo in deyn lagu kala helo? Sida qofku inuu yiraahdo sheygaan intaas ayaan kaaga iibin, haddii aad intaas i deyminayso?

Jawaab 248-aad: Maya. (Daliil: Xaddiiska 667-aad, cutubka shuruudaha ganacsiga).

Suáal 249-aad Haweenay ma u bannaan tahay inay shardi uga dhigto nin ay wada sheekeystaan oo xaas leh inuu soo furo xaaskiisii hore?

Jawaab 249-aad: Maya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 657-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).

Suáal 250-aad: Ma bannaan yahay in dowladdu goyso sicirka (qiimaha alaabta)?

Jawaab 250-aad: Way goyn kartaa haddii ay ganacsatadu dulminayaan dadweynaha, laakiin caadi ahaan ma bannaana. (Daliil: Xaddiiska 679-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).

Suáal 251-aad: Ma bannaan tahay ixtikaarka (in ganacsatadu iibsadana alaabta marka ay raqiis tahay, marka suuqa ka dhammaato oo ay qaali noqotana ay qaali ku iibiyaan)?

Jawaab 251-aad: Ma bannaana. (Daliil: Xaddiiska 680-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).

Suáal 252-aad: Muxuu sameynayaa qofkii iibsada neef la gaaxiyay (Caanaha aan dhawr maalmood laga lisin)?
Jawaab 252-aad: Wuxuu kala dooran inuu iska haysto neefka & inuu iska celiyo neefkii & suus timir ah ama raashinka ku badan waddankaas. (Daliil: Xaddiiska 681-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).
Suáal 253-aad: Maxay ku samaynaysaa dowladdu qofka ku khiyaameeya dadka beec ama alaab dhacday ka iibiya?
Jawaab 253-aad: Waxaa lagu ciqaabayaa siday dowladdu u aragto munaasab. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 683-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).
Suáal 254-aad: Ma bannaan tahay inaad ka iibiso shay qof aad ogtahay inuu ku fulinayo wax dembi ah (sida canab khamri laga sameynayo ama qori loo iibinayo qabqable qabiileed)?
Jawaab 254-aad: Maya, dembigana waad kula jirtaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 684-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).
Suáal 255-aad: Qofkii alaab iibsada kaddibna ceeb ku arka, ma magdhabayaa muddadii uu alaabtaas ka faaíiday, haddii iibkii uu ka noqdo?
Jawaab 255-aad: Maya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 685-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).
Suáal 256-aad: Ma bannaan tahay qof wax iibiyay inuu meesha ka tago si uu qofka wax iibsaday fursad ugu heli waayo inuu beecii ka noqdo?
Jawaab 256-aad: Maya, waana xeeladaysi. (Daliil: Xaddiiska 693-aad cutubka shuruudaha ganacsiga).
Suáal 257-aad: Ma laga noqon karaa xisaabiye iwm bankiyada ribada ku shaqaysta qeybtooda ribada ka shaqeeya?
Jawaab 257-aad: Maya, ma bannaana wuuna lacnaday Rasuulka S.C.W. (Daliil: Xaddiiska 695-aad cutubka Ribada).
Suáal 258-aad: Ma looga shaqeyn karaa wax aan ribo aheyn qof riba qaate ah ama riba ku noole ah?
Jawaab 258-aad: Haa. (Daliil: SHarraxaadda Shariifka, xaddiiska 695-aad cutubka Ribada).
Suáal 259-aad: Dahab cusub ma lagu iibsan karaa Dahab duug ah? Maxaase shardi u ah in dahab lagu iibsho dahab?
Jawaab 29-aad: Haa, shardi waa inay isku miisaan yihiin & in meesha lagu kala iibsanayo lagu kala qaato. (Daliil: Xaddiiska 697-aad, 698, & 699aad cutubka Ribada).

Suáal 260-aad: 5kg oo Timir fiican ah ma lagu iibin karaa 6kg oo Timir laga fiican yahay ah? Maxaase shardi u ah marka la isku iibinayo cunto isku mid ah?
Jawaab 260-aad: Maya waa Ribo, waxaana shardi u ah inay isku miisaan yihiin meeshana lagu kala qaato. (Daliil: Xaddiiska 702-aad cutubka Ribada).

Suáal 261-aad: 30Kg oo bariis ah ma lagu iibin karaa 10kg oo bur ah? Maxaase shardi u ah marka la isku iibinayo cunto kala duwan?
Jawaab 261-aad: Haa, waxaana shardi u ah in meesha lagu kala qaato kaliya. (Daliil: Xaddiiska 698-aad cutubka Ribada).
Suáal 262-aad: Maxaa sabab u ah dhibaatooyinka iyo duliga heysta muslimiinta maanta?
Jawaab 262-aad: Mucaamalo xumo, adduunyo jaceyl iyo jihaadka oo laga tegay. (Daliil: Xaddiiska 705-aad cutubka Ribada).
Suáal 263-aad: Qof haddaad hawl ixsaan ugu sameyso Ilaahay dartiis, oo uu hawshaas awgeed hadyad ama wax ku siiyo ma ka qaadan kartaa?
Jawaab 263-aad: Maya waa ribo. (Daliil: Xaddiiska 706-aad cutubka Ribada).
Suáal 264-aad: Midhaha (Miraha) ma la iibin karaa iyaga oo aan bislaan?
Jawaab 264-aad: Maya, iibiye iyo laga iibiye waa ka mamnuuc. (Daliil: Xaddiiska 714-aad cutubka Iibinta Midhaha).
Suáal 265-aad: Yaa iska leh Midhaha ka soo bixi doona geed la bacrimiyay kaddibna la iibiyay iyo geed la iibiyay ka hor inta aan la bacrimin?
Jawaab 265-aad: Bacrim ka hor waxaa leh Midhaha qofka iibsaday, bacrimin kaddibna qofka iska iibiyay in shardi la kala galo mooyee. (Daliil: Xaddiiska 718-aad cutubka Iibinta Midhaha).
Suáal 284-aad: Ma hagaajisan karaa amam darbi ma ku wareejisan karaa qofku dhul aan looga horayn/qofna laheyn? Yaase dhulkaas lahaanaya?
Jawaab 284-aad: Haa, qofkaas ayaana leh: (Daliil: Xaddiiska 780-aad cutubka xoog wax ku qaadasho).
Suáal 285-aad: Maxaa lagu sameyn qofka hadduu leeyahay warshad uu lacag badan ka helo, laakiin qiiqa ama qaylada warshaddaas ka soo baxa ay dhibayaan dadka xaafaddaas daggan?
Jawaab 285-aad: Waa laga joojin qofka wixii isaga faaiido u leh, laakiin dadka kale dhib u gaysanaya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 779-aad cutubka ijaarka).

Suáal 286-aad: Wax malaga dhisan karaa meelaha dadka ka dhexeeya sida jidadka, beeraha lagu nasto iwm?
Jawaab 286-aad: Maya marnaba, waana laga dumin qofkii sameeya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 780-aad cutubka nooleynta dhulka).
Suáal 287-aad: Waalidku hadiyad ama wax kale ma siin karaa carruurtiisa qaar ka mid ah, isagoo aan siin qaarka kale?
Jawaab 287-aad: Maya. (Daliil: Xaddiiska 788-aad cutubka hibada).
Suáal 288-aad: Qofku ma ka noqon karaa wax uu Allah dartiis u bixiyey ama uu u hibeeyay?
Jawaab 288-aad: Maya, laakiin waxa laga soo reebaa wuxuu ilmihiisa siiyay ama sadaqo u baxshay kaddibna dhaxal ahaan ugu soo noqday. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 790-aad cutubka hibada).
Suáal 289-aad: Qofku wax uu sadaqeystay ama hibo u baxshay, haddii uu suuqa ku arko sheygii laftiisa dib ma u soo iibsan karaa?
Jawab 289-aad: Maya. (Daliil: Xaddiiska 794-aad cutubka hibada).
Suáal 290-aad: Qofku muxuu ku sameyn baadida uu meel ama jid ka helo?
Jawaab 290-aad: Hadday yihiin wax yar oo aan macno laheyn wuu qaadan karaa, haddii kale waa inuu xafidaa oo baafiyaa sanad, haddii qofkii lahaa yimaadana waa inuu siiyaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 799-aad cutubka baadida).
Suáal 291-aad: Ma la qaadan karaa wixii ku dhex luma Makka ama ka luma qof xajinaya?
Jawaab 291-aad: Maya. (Daliil: Xaddiiska 808-aad cutubka baadida).
Suáal 292-aad: Wakhtigii Cusmaan Bin Caffaan (r.c.) markii ay baadidu badatay, maxay asxaabtu xal u arkeen?
Jawaab 292-aad: Dowladda Islamka inay gacanta ku dhigto oo iibiso lacagtana loo hayo. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 800-aad cutubka baadida).
Dhammaad qeybihii ganacsiga ee kutubka.
Kutubka Buluuqul Maraam
Xajka:
Suáal 214-aad: Ma jiraa jihaad waajib ku ah haweenka? muxuuse yahay?
Jawaab 214-aad: Haa, jihaadkoodu waa xajka & cumrada (Daliil: Xaddiiska 580-aad cutubka Xajka & Cadaynta fadligiisa)
Suáal 215-aad: Cumradu ma waajib baa?
Jawaab 215-aad: Culumadu way isku khilaafeen, laakiin sida sugan

waa waajib. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 581-aad cutubka Xajka & Cadeyntta fadligiisa).
Suáal 216-aad: Xaj ma ka ansaxayaa ilmo yar? Markuu waynaadase ilmahaasi xaj malagu leeyahay?
Jawaab 216-aad: Haa, laakiin markuu weynaado waa lagu leeyahay xajka. (Daliil: Xaddiiska 586-aad cutubka Xajka & Cadaynta fadligiisa).
Suáal 217-aad: Maxaa laga faaíidaysanayaa xaddiiska ku saabsan gabadha waydiisay Rasuulka S.C.W. inay aabbaheed ka xajiyi karto?
Jawaab 217-aad: In niqaabku (Indho-shareer) yahay sunno & rag & dumarba inay iska kala xajiyi karaan. (Daliil: Sharraxaadda shariifka, xaddiiska 584-aad cutubka Xajka & cadaynta fadligiisa).
Suáal 218-aad: Ma laga xajin karaa qof da´wayn oo aan gaadiidka ku sugnaan karin?
Jawaab 218-aad: Haa. (Daliil: Xaddiiska 584-aad cutubka Xajka & cadaynta fadligiisa).
Suáal 219-aad: Haweenku ma soo xajin karaan maxram laáan?
Jawaab 219-aad: Maya, waa inuu maxramkeedu la socdo. (Daliil: Xaddiiska 587-aad cutubka Xajka & cadaynta fadligiisa).
Suáal 220-aad: Yaa loogu talo galay mawaaqiidda (meelaha xajka laga soo xidho)?
Jawaab 220-aad: Qofkii meelahaas ka soo safra iyo qofkii soo mara. (Daill: Xaddiiska 590-aad cutubka Mawaaqiidda (xaj xirasho).
Suáal 221-aad: Imisa qaab ayaa loo ixraaman (xaj xirasho) karaa?
Jawaab 221-aad: Saddex qaab oo kaa ah: isku dar xaj & cumro, xaj keliya xirasho, cumro xirasho kadibna xaj xirasho. Daliil Xaddiiska 592-aad cutubka siyaabaha & noocyada ixraamka).
Suáal 222-aad: Cadar ama baraafuun ma marsan karaa qof muxrim ah (xaj u xiran yahay)?
Jawaab 222-aad: Maya. (Daliil: Xaddiiska 597-aad cutubka ixraamashada I waxyaalaha la xidhiidha).
Suáal 223-aad: Madaxa wax ma saaran karaa ninka xaajiga ah?
Jawaab 223-aad: Maya, waa mamnuuc. (Daliil: Xaddiiska 596aad cutubka Ixraamashada & waxyaalaha la xadhiidha).
Suáal 224-aad: Qofkii cudur uga dhaco timaha isagoo xaj gudanaya, muxuu samaynayaa?
Jawaab 224-aad: Timuhuu iska xiirayaa wuxuuna kala dooran inuu qalo neef ari ah, soon saddex maalmood ama lixdan miskiin quudintood midkiina uu siiyo suus badhkii. (Daliil: Xaddiiska 603-aad cutubka Ixraamashada & waxyaalaha la xidhiidha).

Suáal 225-aad: Ma sameyn karaa nikaax ama shukaansi qof muxrim ah?
Jawaab 225-aad: Maya waa mamnuuc. (Daliil: Xaddiiska 598-aad cutubka Ixraamashada & waxyaalaha la xidhiidha).
Suáal 226-aad: Jiirku ma ka mid yahay xayawaanka meel walba lagu dili karo, xataa wakhtiga xajka?
Jawaab 226-aad: Haa. Daliil: Xaddiiska 601-aad cutubka Ixraamashada & waxyaalaha la xidhiidha).
Suáal 227-aad: Qofkee ku waajibayaa qubeys marka uu xiranayo xaj?
Jawaab 227-aad: Haweeney dhiig (xeyd) qabta ama umushay oo dhiig ka socdo. (Daliil: Xaddiiska 607-aad cutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).
Suáal 228-aad: Maxaa la oran marka la tuuranayo 7-da dhagax ee Jamaraadka?
Jawaab 228-aad: Allahu Akbar. (Daliil: Xaddiiska 629-aad cutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).
Suáal 229-aad: Imisa jeer ayaa kacbada lagu dawaafayaa? sideese loo sameynayaa?
Jawaab 229-aad: 7 Jeer. 3 jeer waa la rucleyn (orod-yar), 4 jeerna waa la socon. (Daliil: Xaddiiska 613-aad cutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).
Suáal 230-aad: Maxay ku kala duwan yihiin dhunkashada ama taabashada Xajarul-aswadka (dhagaxa madow ee Kacbada) & Ruknul-yamaaniga?
Jawaab 230-aad: Xajarul-aswadka waa la dhunkadaa, Ruknul-yamaanigana waa la taabtaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 615-aad cutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).

Suáal 231-aad: Maxaa loo dhunkadaa Xajarul-aswadka?
Jawaab 231-aad: Waa sunno Nabiga (s.c.w.) looga dayanayo keliya, wax uu tari karana ma jiraan. (Daliil: Xaddiiska 616-aad cutubka Tilmaamaha Xajka & gelidda Makka).
Suáal 232-aad: Gacanta ma lagu ishaari (tilmaami) karaa Xajarul-aswadka (dhagaxa madow ee Kacbada) salaan ahaan? mase la dhunkan karaa gacantaas?
Jawaab 232-aad: Haa, laakiin lama dhunkan karo gacanta. (Daliil: Sharaxaadda Shariifka, xaddiiska 616-aad cutubka Tilmaamaha Xajka & gelidda Makka).
Suáal 233-aad: Gacanta ma lagu ishaari karaa Ruknul-yamaaniga salaan ahaan ? mase la dhunkan karaa gacanta?

Jawaab 233-aad: Maya, lamana dhunkan karo gacanta. (Daliil: Sharaxaadda Shariifka, xaddiiska 616-aad cutubka tilmaamaha Xajka & gelidda Makka).
Suáal 234-aad: Xajkiisa waa sidee qofkii aanan soo xaadirin Carafo?
Jawaab 234-aad: Xajkiisa waxba kama jiraan, qofkaas xaj ma leh. (Daliil: Xaddiiska 624-aad cutubka tilmaamaha Xajka & gelidda Makka).
Suáal 235-aad: Midkee fiican timaha in la xiiro ama la gaabiyo maalinta Yawmu-Naxr (maalinta 10-aad ee xajka) ee Xajka?
Jawaab 235-aad: In la xiiro. (Daliil: Xaddiiska 630-aad cutubka tilmaamaha Xajka & gelidda Makka).
Suáal 236-aad: Sidee loo kala hormarinayaa acmaasha la qabto maalinta 10-aad ee xajka?
Jawaab 236-aad: Kii la doono ayaa la hormarin karaa, wax dhib ahna ma leh. (Daliil: Xaddiiska 631aadbcutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).
Suáal 237-aad: Goorma ayey xalaal u noqonaysaa ninka xaajiga ah xaaskiisa?
Jawaab 237-aad: Markuu acmaasha xajka oo dhan uu la yimaado maalinta Yawmu-naxr (maalinta 10-aad ee xajka "ciidul adxaa"). (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 633aad cutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).
Suáal 238-aad: Yaa laga cafiyey dawaaful-widaaca (sagootinta) wakhtiga xajka?
Jawaab 238-aad: Haweenka dhiiggu (xaydku) ku yimaado. (Daliil: Xaddiiska 643aad cutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).
Suál 239-aad: Imisa salaadood ayey ka ajar badan tahay salaadda lagu tukado Masjidul-Xaraamka, salaadaha masaajidda kale lagu tukado?
Jawaab 239-aad: 100,000 (Boqol kun oo salaadood). (Daliil: Xaddiiska 644aad cutubka Tilmaamaha & gelidda Makka).
Suáal 240-aad: Muxuu sameyn qofkii jaba ama murgacasho ku dhacdo isagoo xajinaya?
Jawaab 240-aad: Wuu xalaaloobayaa, sanadka dambana waa inuu soo xajiyaa. (Daliil: Xaddiiska 647aad cutubka Tilmaamaha xajka & gelidda Makka).
La soco qeybaha kale ee Kutubka oo ay isku dubbaridey Heyádda KAFAALO

Kutubka Buluuqul Maraam

Guurka:

Suáal 302-aad: Guurka xukunkiisa waa sidee?
Jawaab 302-aad: Wuxuu waajib ku yahay dhallinyarada muslimiinta ee awoodda guurka. (Daliil: Sharraxaadda shariifka, xaddiiska 824-aad qeybta guurka).

Suáal 303-aad: Waa sidee qofku inuu yiraahdo waligeey guursan maayo?
Jawaab 303-aad: Guurka wuxuu ka mid yahay sunnada Nabiga (S:C.W.), qofkii ka leexda sunnadaasna waa qof lunsan. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 825-aad qaybta Guurka).

Suáal 304-aad: Ducada ay sunnada tahay in loogu duceeyo qofka guursanaya waa maxay?
Jawaab 304-aad: Baaraka-laahu laka wabaaraka calayka wajamaca bayna kumaa fii khayr. (Daliil: Xaddiiska 828-aad qaybta Guurka).

Suáal 305-aad: Ninka marka uu rabo inuu gabadh guursado, ma fiirin karaa?
Jawaab 305-aad: Haa, way bannaan tahay. (Daliil: Daliil: Xaddiiska 831-aad cutubka qaybta Guurka).

Suáal 306-aad: Ma guursan kartaa haweeney wali laáan?
Jawaab 306-aad: Maya, nikaaxaasna ma jiro. (Daliil: Xaddiiska 835-aad qaybta Guurka).

Suáal 307-aad: Waa sidee inuu ninku doono gabadh uu nin kale doonay?
Jawaab 307-aad: Ma bannaana haddii la siiyay gabadha ama la soo dhaweeyey ninkaas.

Suáal 308-aad: Waa sidee in la iswaydaarsado laba gabdhood meher laáan?
Jawaba 308-aad: Waa xaaraan waana baadil. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 840-aad qaybta Guurka)

Suáal 309-aad: Gabadha waalidkeed ma ku khasbi karaan guur nin aysan rabin? Haddii ay sidaa dhacdo maxaa u furan?
Jawaab 309-aad: Laguma khasbi karo, waxaana u furan inay diido ama yeesho, haddii ay diidana nikaaxaas ma soconayo. (Daliil: Xaddiiska 841-aad qaybta Guurka).

Suáal 310-aad: Gabar aan laheyn wali nikaaxiya, yaa nikaaxin kara?
Jawaab 310-aad: Suldaanka ama xaakimka magaaladaas. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 836-aad qaybta Guurka).

Suáal 311-aad: Galmada dhex martay nin iyo haweenay wali laáan isguursaday, ma lagu tilmaami karaa ZINO?

Jawaab 311-aad: Maya, laakiin nikaaxoodu waa baadil. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 836-aad qaybta Guurka).
Suáal 312-aad: Gabar mala iska meherin karaa iyadoo waxba idan la weydiin?
Jawaab 312-aad: Maya, oggolaashaheeda ayuu nikaaxaas sax ku noqon karaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 837-aad qaybta Guurka).
Suáal 313-aad: Maxaa la gudboon gabar iyo wiil israba, laakiin la isu diiday?
Jawaab 313-aad: Inay Maxkamad Islaami ah isla tagaan oo ay isku meheriso xataa hadduusan waalidku oggoleyn. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 836-aad qaybta Guurka).
Suáal 314-aad: Maxay xaq u leedahay Maxkamad Islaami ah oo ay u soo dacwootay gabar loo diiday wiil ay is rabaan inay is guursadaan?
Jawaab 314-aad: In abbaha lagu yiraahdo isku meheri, hadduu diidana Maxkamaddu isku meheriso. (Daliil: Sharraxaadda shariifka, xaddiiska 836-aad qaybta Guurka).
Suáal 315-aad: Maxaa loo baahan yahay in la iska ilaaliyo marka la is guursanayo?
Jawaab 315-aad: Isla cidloobid/Khalwo, muddo dheer wada socosho, gacmo isqabsi, faraanti isku galin waana dhaqamo xun-xun oo sharciga ka soo horjeeda. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 836-aad qaybta Guurka).
Suáal 316-aad: Muxuu ninku ka sameyn shardiga ay gabadhu qabsatay markii la nikaaxinayay?
Jawaab 316-aad: Waa in loo oofiyaa shardigaas haddii uusan Sharciga ka hor imaanayn. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 847-aad qaybta Guurka).
Suáal 317-aad: Waa maxay nikaaxa mutcada? Waase side xukunkiisu?
Jawaab 317-aad: Waa nikaax muddo ku xiran, waana arrin xaaraam cad ah. (Daliil: Xaddiiska 848-aad qaybta Guurka).
Suáal 318-aad: Qof fiican oo xafidan nikaax ma u qabanayaa qof zaani ah?
Jawaab 318-aad: Maya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 855-aad qaybta Guurka).
Suáal 319-aad: Dadku side isku guursan karaan xagga kufka (Isu qalmidda)?
Jawaab 319-aad: Xagga diinta iyo xagga dhawrsanaanta (akhlaaqda). (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 853-aad

cutubka kufka iyo doorashada).
Suáal 320-aad: Haweenay hadday ka soo hor islaamto ninkeeda, ma sii qabi karaa?
Jawaab 320-aad: Maya, haweenay muslimad ah uma bannaana qof aan muslim aheyn. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, xaddiiska 861-aad cutubka kufka iyo doorashada).La soco qeybaha kale ee Kutubka oo ay isku dubbaridey Heyádda KAFAALO.

KUTUBKA BULUUQUL MARAAM

Qeybtii 3-aad

Suáal 11-aad: Ninka iyo haweenayda is-qaba midkood biyaha uu janaabada kaga qubeysto hanbada kasoo harta midka kale ma ku qubeysan karaa?
Jawaab 11-aad: Haa. (Daliil: Xaddiiska 7-aad cutubka biyaha).'

Suáal 12-aad: Muxuu noqonayaa xukunka weelasha ahlu-kitaabka iyo mushrikiinta marka la isku soo uruuriyo axaadiista ku soo aroortay?
Jawaab 12-aad: Waa in la iska dhaqaa haddii lagu yaqaano in ay weelashooda u isticmaalaan waxyaabo xaaraam ah, weelasha makhaayadahana dhib ma lahan. (daliil: Sharraxaadda Shariifka xaddiiska 20-aad cutubka weelasha.

Suáal 13-aad: Waa sidee xukunka xoolaha aan hilibkooda la cunin, sida Dameeraha, Bisadaha iwm?
Jawaab 13-aad: Hilibkoodu waa xaaraam haddii la gawraco iyo haddaan la gawricin, waana nijaas. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka Xaddiiska 23-aad cutubka Daahirinta Nijaasada).

Suáal 14-aad: Maxay ku kala duwan yihiin kaadida wiilka iyo gabadha?
Jawaab 14-aad: Kaadida wiilka aan raashin cunid gaadhin, naaskana nuuga, biyo ayaa lagu rusheynayaa, gabadhase kadideeda waa la dhaqayaa. (Daliil: Xaddiiska 26-aad cutubka Daahirinta Nijaasada).

Suáal 15-aad: Waa sidee qaabka sunnada ah in loo masaxo madaxa?
Jawaab 15-aad: Waa in labada gacmood oo isla socdo loogu masaxo madaxa horay ilaa gadaal, haddana gadaal ilaa horay, dhagahana lala masaxo. (Daliil: Xaddiiska 32-aad cutubka Waysada).

Kutubka Buluuqul Maraam (suáalo & Jawaabo diini ah)

Qeybtii 6,7,8-aad:

Suáal 36-aad: Waa maxay sababta loo reebay in lagu istijooda saalada xoolaha hilibkooda la cuno, caanahoodana la cabbo & lafaha?

Jawaab 36-aad: Waxaa ka faaiidaysta walaalaheen jinka muslimka ah. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 88-aad cutubka Adaabta Kortagga).

Suáal 37-aad: Maxaa lagu mutaysan karaa kaadida oo si fiican layskaga hagaajin waayo?

Jawaab 37-aad: Kaadidu waa nijaas, waana lagu cadaab mudan karaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 90-aad cutubka Adaabta Kortagga).

Suáal 38-aad: Ma Nijaas baa Kaadida Xoolaha hilibkooda la cuno, caanahoodana la cabbo?

Jawaab 38-aad: Maya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 90-aad cutubka Adaabta Kortagga).

Suáal 39-aad: Yeey waajib ku tahay inuu qubeysto?

Jawaab 39-aad: Rag iyo Dumarba qofkii ay biyo "Mini ama Shahwo" ka yimaadaan sideey doonaanba ha oga yimaadaane & qofkii galmo sameeya xattaa hadaysan biyo ka imaanin. (Daliil: Xaddiiska 94-aad & Xaddiiska 95-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).

Suáal 40-aad: Maxaa ka reeban qofka markuu musqusha ku jiro ama istijoonayo?

Jawaab 40-aad: Inuu midigta ku istijoodo ama ku taabto xubinka taranka & inuu ku dhex sheekeeyo musqusha markuu saxaroonayo ama kaadinayo. (Daliil: Sharraxaadda shariifka, Xaddiiska 83-aad cutubka Adaabta Kortagga).

Suáal 41-aad: Waxyaalahee mamnuuc ah in lagu istijoodo?

Jawaab 41-aad: Lafaha & Saalada Xoolaha, Waraaqaha dadku wax ku qortaan iyo wax walba oo ay dadku faaíido ka helaan. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 88-aad cutubka Adaabta Kortagga).

Suáal 42-aad: Maxaa laga doonayaa qofka soo islaamaya?

Jawaab 42-aad: Inuu qubeysto, hadduu nin yahayna inuu isgudo & inuu timaha iska xiiro. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 99-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).

Suáal 43-aad: Waa maxay xukunka qubeyska maalinta jimcaha ah?

Jawaab 43-aad: Waa sunno la adkeeyay, waxaana laga rabaa qof walba oo qaan-gaar ah oo salaadda jimcaha soo aadaya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 100-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).

Suáal 44-aad: Sidee ayaa janaabada looga qubeysan karaa?

Jawaab 44-aad: Marka hore gacmaha ayaa la dhaqayaa, kaddib xubinka taranka ayaa la dhaqayaa, kaddibna waa la weysaysan, kaddibna waa la qubeysan. (Daliil: Xaddiiska 104-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada)

Suáal 45-aad: Maxay sameynaysaa haweeneyda timuhu u tidcan yihiin (u daban yihiin) markay janaabo ka qubeysanayso?

Jawaab 45-aad: Uma baahna inay timaha furfurto, laakiin biyaha ayay madaxa ku shubaysaa gacantana way ku xajinaysaa timaha, kaddibna jirka intiisa kale ayay dhaqaysaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 105-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).
Suáal 46-aad: Ninka iyo haweeneyda isqaba ma isla qubeysan karaan? Mase arki karaanCawrada midba midka kale?
Jawaab 46-aad: Haa, waa arrin bannaan oo xataa way isku qubeyn karaan. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 106-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).
Suáal: 47-aad: Qofka haday Janaabo ku dhacdo uusan biyana heysan, Ciid ma ku dahaaro qaadan karaa? Hadduu biyo helo hadhow salaadda ma soo celinayaa?
Jawaab 47-aad: Haa, waa inuu ku dahaaro qaato Ciidda, laakiin markuu biyo helo waa lagama-maarmaan inuu qubeysto, laakiin salaadda ku soo celin maayo. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 109-aad & Xaddiiska 112-aad cutubka Booraysiga).
Suáal 48-aad: Sidee loo booraysan (Gabagabaysan) markii biyo la waayo?
Jawaab 48-aad: Labada Calaacalood ayaa dhulka lagu dhufan hal mar, kaddibna waxaa la marinayaa wajiga & labada calaacalood dushooda sare. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 111-aad cutubka Booraysiga).
Suáal 49-aad: Muxuu samaynayaa qofkii naftiisa kala baqa biyo in uu ku dahaaro qaato?
Jawaab 49-aad: Wuu Booreysanayaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 116-aad cutubka Booraysiga).
Suáal 50-aad: Imisa salaadood ayuu qofku kutugan karaa hal Booraysi?
Jawaab 50-aad: Intii salaadood ee la doono sida wayso qaadka oo kale. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 117-aad cutubka Booraysiga).

La soco qeybaha kale ee Kutubka oo ay isku dubbaridey Heyádda Kafaalo.

Kutubka Buluuqul Maraam (suáalo & Jawaabo diini ah)
Qeybtii 6,7,8-aad:
Suáal 36-aad: Waa maxay sababta loo reebay in lagu istijooda saalada xoolaha hilibkooda la cuno, caanahoodana la cabbo & lafaha?
Jawaab 36-aad: Waxaa ka faaiidaysta walaalaheen jinka muslimka ah. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 88-aad cutubka Adaabta Kortagga).
Suáal 37-aad: Maxaa lagu mutaysan karaa kaadida oo si fiican layskaga hagaajin waayo?
Jawaab 37-aad: Kaadidu waa nijaas, waana lagu cadaab mudan karaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 90-aad cutubka Adaabta Kortagga).
Suáal 38-aad: Ma Nijaas baa Kaadida Xoolaha hilibkooda la cuno, caanahoodana la cabbo?
Jawaab 38-aad: Maya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 90-aad cutubka Adaabta Kortagga).

Suáal 39-aad: Yeey waajib ku tahay inuu qubeysto?
Jawaab 39-aad: Rag iyo Dumarba qofkii ay biyo "Mini ama Shahwo" ka yimaadaan sideey doonaanba ha oga yimaadaane & qofkii galmo sameeya xattaa hadaysan biyo ka imaanin. (Daliil: Xaddiiska 94-aad & Xaddiiska 95-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).
Suáal 40-aad: Maxaa ka reeban qofka markuu musqusha ku jiro ama istijoonayo?
Jawaab 40-aad: Inuu midigta ku istijoodo ama ku taabto xubinka taranka & inuu ku dhex sheekeeyo musqusha markuu saxaroonayo ama kaadinayo. (Daliil: Sharraxaadda shariifka, Xaddiiska 83-aad cutubka Adaabta Kortagga).
Suáal 41-aad: Waxyaalahee mamnuuc ah in lagu istijoodo?
Jawaab 41-aad: Lafaha & Saalada Xoolaha, Waraaqaha dadku wax ku qortaan iyo wax walba oo ay dadku faaíido ka helaan. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 88-aad cutubka Adaabta Kortagga).
Suáal 42-aad: Maxaa laga doonayaa qofka soo islaamaya?
Jawaab 42-aad: Inuu qubeysto, hadduu nin yahayna inuu isgudo & inuu timaha iska xiiro. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 99-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).
Suáal 43-aad: Waa maxay xukunka qubeyska maalinta jimcaha ah?
Jawaab 43-aad: Waa sunno la adkeeyay, waxaana laga rabaa qof walba oo qaan-gaar ah oo salaadda jimcaha soo aadaya. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 100-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).
Suáal 44-aad: Sidee ayaa janaabada looga qubeysan karaa?
Jawaab 44-aad: Marka hore gacmaha ayaa la dhaqayaa, kaddib xubinka taranka ayaa la dhaqayaa, kaddibna waa la weysaysan, kaddibna waa la qubeysan. (Daliil: Xaddiiska 104-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada)
Suáal 45-aad: Maxay sameynaysaa haweeneyda timuhu u tidcan yihiin (u daban yihiin) markay janaabo ka qubeysanayso?
Jawaab 45-aad: Uma baahna inay timaha furfurto, laakiin biyaha ayay madaxa ku shubaysaa gacantana way ku xajinaysaa timaha, kaddibna jirka intiisa kale ayay dhaqaysaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 105-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).
Suáal 46-aad: Ninka iyo haweeneyda isqaba ma isla qubeysan karaan? Mase arki karaanCawrada midba midka kale?
Jawaab 46-aad: Haa, waa arrin bannaan oo xataa way isku qubeyn karaan. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 106-aad cutubka Qubeyska & Xukunka Janaabada).
Suáal: 47-aad: Qofka haday Janaabo ku dhacdo uusan biyana heysan, Ciid ma ku dahaaro qaadan karaa? Hadduu biyo helo hadhow salaadda ma soo celinayaa?
Jawaab 47-aad: Haa, waa inuu ku dahaaro qaato Ciidda, laakiin markuu biyo helo waa lagama-maarmaan inuu qubeysto, laakiin salaadda ku soo celin maayo. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 109-aad & Xaddiiska 112-aad cutubka Booraysiga).
Suáal 48-aad: Sidee loo booraysan (Gabagabaysan) markii biyo la waayo?
Jawaab 48-aad: Labada Calaacalood ayaa dhulka lagu dhufan hal mar, kaddibna waxaa la marinayaa wajiga & labada calaacalood dushooda sare. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 111-aad cutubka Booraysiga).

Suáal 49-aad: Muxuu samaynayaa qofkii naftiisa kala baqa biyo in uu ku dahaaro qaato?
Jawaab 49-aad: Wuu Booreysanayaa. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 116-aad cutubka Booraysiga).
Suáal 50-aad: Imisa salaadood ayuu qofku kutugan karaa hal Booraysi?
Jawaab 50-aad: Intii salaadood ee la doono sida wayso qaadka oo kale. (Daliil: Sharraxaadda Shariifka, Xaddiiska 117-aad cutubka Booraysiga).

La soco qeybaha kale ee Kutubka oo ay isku dubbaridey Heyádda Kafaalo.

Waxaa hubaal ah in dad aad u fara badan ay isku dayayaan in ay xifdiyaan Quraanka kariimka ah. Waxaan rabaa in aan idin soo gudbiyo jadwal idin fududeenayo sida aad Quraanka u xifdin laheedeen.

Haddii aad xifdisid Quraanka (1 Aayad) Maalin walbo, Waxaad ku xifdin kartaa Quraanka 17 sano, 7 bil iyo Sagaal Maalmood.
Haddii aad xifdisid maalinti (2 Aayad), Waxaad ku xifdin kartaa Quraanka 8 sano , 9 bil iyo 18 maalmood.
Haddii aad xifdisid maalinti 3 aayad, Waxaad ku baran kartaa Quraanka oo dhan muddo 5 sano ah, 10 bil iyo 13 maalmood.
Haddii aad maalin walbo xifdisid 4 aayad, waxaad ku dhameen kartaa Quraanka 4 sano, 4 bil iyo 24 maalmood.
Haddii aad xifdisid maalinti 5 ayaad oo Quraan ah, waxaad ku dhameen kartaa Quraanka muddo dhan 3 sano, 6 bil iyo 7 maalmood.
Haddii aad maalinti xifdisid 6 ayaad, waxaad ku dhameen kartaa Quraanka muddo dhan 2 sano . 11 bil iyo 4 maalmood.
Haddii aad xifdisid maalinti 7 aayad, waxaad ku xifdin kartaa quraanka muddo dhan 2 sano, 6 bil iyo 3 maalmood.
Haddii aad xifidisid maalintii 8 aayad, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan 2 sano, 2 bil iyo 12 maalmood.
Haddii aad xifdisid maalinti 9 aayad. waxaa ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan 1 sano, 11 bil iyo 12 maalmood.
Haddii aad xifdisid maalin walbo 10 aayad, waxaad ku xifdin karrtaa Quraanka muddo dhan 1 sano, 9 bil iyo 3 maalmood.
Haddii aad xifdisid maalin walbo 11 ayaad, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan 1 sano, 7 bil iyo 6 maalmood.
Haddii aad xifdisid quraanka 12 aayad maalin walbo, waxaad ku xifdin kartaa Quraan muddo dhan 1 sano, 5 bil iyo 15 maalmood.
Haddii aad xifdiso maalin walbo 14 aayad, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan, 1 sano iyo 3 bil.
Haddii aad xifdisid maalinti 15 aayad, waxaad ku xifdin kartaa

Quraanka 1 sano, 2 bil iyo 1 maalin.
Haddii aad xifdisid maalinti 16 aayad. waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan, 1 sano, 1 bil iyo 6 maalmood.
Haddii aad maalinti xifdisid 17 aayad, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan, 1 sano iyo 10 bil.
Haddii aad maalinti xifdisid 18 aayad, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan 11 bil iyo 19 maalmood.
Haddii aad xifdisid maalin walbo 19 aayad, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan 11 bil iyo 1 maalin.
Haddi aad xifdisid Quraanka 20 aayad maalin walbo, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan 10 iyo 16 maalmood.
Haddii aad xifdisid hal safxad oo ah 15 sadar, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan muddo dhan 1 sano, 8 bil iyo 12 maalmood.
Haddii aad xifdisid 2 safxad ama 30 sadar, waxaad ku xifdin kartaa Quraanka muddo dhan 10 bil iyo lix maalmood.
Ha iloobin xaraf walbo oo aad aqrisid in aad haleesid hal ajir. Ajirkana wuxuu u dhigmaa 10 ajir. Haddii aad aqrisid (بسم الله الرحمن الرحيم) Waa 19 xaraf . Waxaa heleesaa 190 ajir. Haddii uu qofka xifdinayo, Wax badan ayuu ku celceliyaa . Meeqo ajir ayuu qofka helayaa? Ajir aad u fara badan ayuu qofka helayaaa. Ugu danbeenti waxaan alle weediisaneenaa in uu inoo fududeeyo quraanka barashadiisa iyo diinta fahamkeeda ... Alle Janno hanagu arzaaqo . Aamiin.
Qore : Asad Haaji Ali Abdi
pppppp

- Caqiidada
- Is-daahirinta
- Dhiigga caadada dumarka & daharadiisa
- Hagaajinta Cibaadada
- Dhaxalka
- ganacsiga
- xajka
- Guurka
- Qeybtii 3-aad
- Qeybtii 6-aad
- Qeybihii ugu dambeeyey
- Xifdinta Quráanka

Waxaa qoray:

Maxamed Xirsi Guuleed

(Cabdi-Bashir)

Xigasho: Somaanta.com

SU'AALO IYO JAWAABO KU SAABSAN SOONKA

(1) Waamaxay Xukunka soonta Ramadaan?

Xukunka soonku waa waajib faral ah waxaana u daliil ah aayaadka Quraanka ee uu Ilaahay inoogu tilmaamayo,

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ }

{Kuwa xaqa rumeeyayoow waxa laydinku waajibiyey Soonka sidii loogu waajibiyey umadihii idinka horeeyey inaad ka dhowrsataan Rabbigiin}

Sidoo kale Nabigu (N.N.K.H) wuxuu dhahay: Islaamka waxa lagu kor dhisay shan (Tiir): Qirida in Ilaah xaq lagu caabudo aanu jirin Ilaahay mooyee, Muxamadna yahay Rasuulkiisa, Salaada oo la oogo, Sakada oo la bixiyo, Xajka (oo la tago) iyo in Ramadaan la soomo. Waxa kale oo uu dhahay Nabigu: (Hadaad aragtaan sooma). Muslimiintuna waxay ku kulmeen in Soontu tahay faral, uuna yahay mid kamid ah tiirarka Islaamka, cidii dafirta faralnimadiisana ay gaaloobayso, marka laga reebo cida ku barbaartay wadan shisheeye oo aan garanaynin axkaamta Islaamka, isagana waa loo sheegayaa, marka lagu xujeeyo ee loo sheego haduu diido wuu gaaloobayaa, cida uga tagta caajisnimo ama wahsina wuxuu ku sugan yahay halis, culumada qaarna waxay u arkaan inuu yahay gaal ridoobay hase ahaatee waa danbiile faasiq ah oo halis ku dul sugan.

(2) Ma gaaloobayaa cida soonta uga tagta wahsi iyo caajisnimo sida qofka ka tagay salaada oo kale?

Cida soonka uga tagta wahsi iyo caajisnimo ma gaaloobayo, sababtuna waxa weeye ruuxu muslim ayuu yahay illamaayo laga helayo daliil tilmaamaya inuu ka baxay Islaamnimada, mana jiro daliil tilmaamaya in cida soonta uga tagtay

caajisnimo ama wahsi uu yahay gaal. Dhanka kale cida salaada cayaar uga tagta inuu gaalyahay waxa kusoo arooray daliil Quraanka ah, sunnada Rasuulka iyo hadalkii saxaabada Ilaahay raali haka ahaadee. Wuxuu dhahay Cabdillaahi ibnu Shaqiiq: (Waxay ahaayee saxaabadii Rasuulku kuwo aan u arkayn gaalnimo hadii qofku camal uu ka tago marka laga reebo salaada) hase ahaatee ruuxa soonka ka tagay isagoo ay ka tahay wahsi iyo caajisnimo waa in loogu nasteexeeyo inuu soomo haduuse diido waa in la ganaaxo illamaayo intuu ka soomayo.

(3) Waa maxay tiirarka Soontu?

Tiirarka soontu waa hal mid oo ah; in Ilaahay lagu caabudo katagida laga tagayo waxa soonta jabiya laga bilaabo marka waagu dillaaco illamaayo ay Qoraxdu ka dhacayso. Waabarigana waxa loojeedaa Oogta danbe maaha Oogta hore, Oogta danbena waxay kaga duwantahay Oogta hore sadex arrimood:

1. **Oogta danbe waxay ku fidsantahay cirka halka Oogta hore ay tahay mid laydi ah oo ku fidsan bari Illaa galbeed balse Oogta danbe waxay ku fidsantahay waqooyi illaa koonfur.**
2. **Oogta danbe mugdi kama danbeeyo ee waxa sii koraya iftiinka illaa Cadceedu kasoo baxdo, halka Oogta hore ay madawdahay isagoo leh shucaac ama falaadho.**
3. **Oogta danbe waxay cadaantiisu ku xidhiidhsantahay Cirka, halka Oogta hore mugdi u dhaxeeyo isaga iyo Cirka. Oogta danbe ayaana Salaada subax iyo soonkuba waajibaan.**

(4) Waa maxay xikmada loo waajibiyey Soonka?

Waynu garanaynaa xikmada loo waajibiyey soonta waa in Ilaahay lagu caabudo lagana dhawrsado, dhawrsaniduna waa inaad ka tagto waxa la xarimay, waxayna si guud u koobsanaysaa in lala yimaado waxa lagu faray iyo inaad ka tagto waxa lagaa reebay, wuxuuna dhahay Nabigu (N.N.K.H): (Ruuxaan ka tagin hadalka beenta ah <<xun>> iyo ku dhaqankeeda, Ilaahay dan kama laha inuu ka tago cunadiisa iyo cabidiisaba) Sidaa darteed waxa ku waajiba ruuxa sooman inuu ku kaco waxa la faray kana tago waxa

laga reebay oo ah hadal iyo ficilba, waa inaanu dadka xamanin, beena ka sheegin, uuna cidna isku dirin sidoo kalena aanu wax xaaraan ah uusan iibinin waana inuu ka fogaado dhammaan waxa xaaraanta ah, haduu qofku sidaas uu sameeyo bil dhan, naftiisu way toosnaanaysaa sanadka oo dhan. Hase ahaatee waxa wax laga xumaado ah in Dad badan aanay kala duwanayn markuu soomanyahay iyo markuu afursanyahay, waxay ku dul suganyihiin dhaqankoodii ahaa inaanay camal san qabanin mid xuna ka dhawrsanin, mana la dareemayo inay ilaalinayaan soonta, arrimaahaasina soonta ma jabiyaan laakiin way yareeyaan xaga ajarka, waxaana laga yaabaa in hadii lays barbardhigo in camalka xun uu bato oo uu waayo ajarkiiba (abaal marinta fiican).

(5) Goormaa la soomaa Ramadaan?

Waxa Ramadaan la soomaa marka la arko bisha Ramadaan oo bilatay ama bisha Shacbaan oo 30 maalmood ku dhamaatay. Waxaana u daliila xadiiska Nabiga ee uu leeyahay; {Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana afura, haduu idinka daboolmana (arki waydaan) waxaad dhamaystirtaan bisha Shacbaan 30.}

(6) Ma laysku tiirin karaa Dayax gacmeed si loo arko bisha Ramadaan? Ma banaan tahay in la adeegsado waxa loo yaqaan (Dardiil) oo ah soo dhoweeyaha si loo arko bisha Ramadaan?

Ma banaana in laysku tiiriyo Dayax gacmeedka hadii aan bisha la arkin, balse hadii la arko bisha haba la adeegsado Dayax gacmeed way sugmaysaa aragtidaasi sida ku cad xadiiska Nabiga (Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana afura). Sidoo kale hadii la adeegsado soo dhoweeyaha wax dhib ah malaha, dadkuna waagii hore way adeegsan jireen, aragtidaas soo dhoweeyuhuna wuxuu soo galayaa macnaha xadiiska Nabiga (Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana Afura).

(7) Miyey ka sugnaatay Nabiga (N.N.K.H) duco gaar ah oo uu akhriyo cida aragta bisha dhalatay?

Haa, wuxuu dhahayaa: {اللهم أهله علينا بالأمن والإيمان والسلامة والإسلام ربي وربك الله هلال رشد وخير} {Ilaahayoow! Bishu hanoogu dhalato amaan, iimaan, nabadgalyo iyo Islaamnimo, Rabigay iyo Rabigaa waa Ilaahay, Bil hanuun iyo khayreed} Waxa kusoo arooray ducadan laba xadiis walow saxiixnimadooda ay culamdo ka hadlaan. Sida markaa ka muuqata xadiiska waxa ducadan la akhrinayaa kolka la arko bisha laakiin cida maqashay ee aan arkin looma sharciyayn inuu ku ducaysto.

(8) Soonta bisha Ramadaan ma waxaan la soomnaa Sacuudiga? Mise Wadanka aan daganahay ayaan la soomnaa?

Culumado way isku khilaafeen hadii bisha laga arko wadan Muslim ah miyey wadamada kale ee aan arkin bisha ku waajibaysaa soontu mise kuma waajibayso? Sida loo badanyahay waxa khilaafkaas loo celinayaa Culumada. Hadii labada Wadanba laga wada arkay dhalashada bisha way midoobayaan sida hal dal oo kaliya balse haday labada wadan is khilaafaan midkastaba ayagaa iskood isku xukumaya, waana siduu doortay Shiikha Islaamka Ibnu Taymiyah (I.R.H), waaana sida ka muuqata Kitaabka, Sunnada iyo Qiyaastaba.

{فَمَن شَهِدَ مِنكُمُ الشَّهْرَ فَلْيَصُمْهُ} {Ruuxiise xaadira (jooga) ha soomo} Sida laga fahmayo Aayadan cidii aan joogin kuma waajibayso soontu. Sidoo kale Nabiguna wuxuu dhahay: (إذا رأيتموه فصوموا، وإذا رأيتموه فأفطروا) (Markaad aragtaan sooma, markaad aragtaana afura) Waxaynu xadiiskana ka fahmaynaa in hadii aynaan arkin aanay soonku waajibayn.. Qiyaastuna waxay inoo tilmaamaysaa in la soomo ama la afuro waxa loo tiirinyaa wadan kastaba kaligii ayadoo la cuskanayo Qorax soobaxa iyo Qorax dhaca, Tusaale ahaan dadka dagan wadamada Bari way kahor soomaan kana hor afuraan dadka dagan Galbeedka dunida, sidoo kale Cadceedu waxay kusoo hor baxdaa wadamada Bariga. Hadii markaaba ay kala horeeyaan xaga soonta maalinta iyo afurtaba sidaas oo kale ayey u kala horeynayaan soonka Ramadaan iyo afurtaba. Laakiin hadii labada dagmo ama

labada magaalo ay isku dal yihiin sidoo kalena ay isku khilaafeen xilliga la soomayo ama la afurayo waa in Madaxda iyo Culumada loo celiyo si khilaafka meesha looga saaro. Sidaa darteed waxa lala soomayaa wadankaad joogtid lana afuraysa. Waxaana lamid ah soonta maalinta Carafo.

(9) Waa maxay xukunka cida ku soontay Wadan Muslim ah kadibna u safarta wadan kale oo Muslim ah ayadoon bishii laga arkin oo soomay in kabadan 30 casho? Ama cida ka safartay Wadan aan Ramadaan usoo galin oo tagta Wadan laga sooman yahay?

Hadii Qofku ka safro Balad Muslim oo uu tago Wadan Muslim ah oo kale oo aan wali laga afurin wuxuu ahaanayaa mid sooman oo la afura wadanka uu tagay, sababtoo ah soonku waa maalin ay dadku soomaan, maalinta ciida Al-adxahuna waa maalinta dadku ay ka ciidayaan baladkaas, waa sidaas xitaa hadii ay maalin dheeraad ay noqoto macnaha xitaa hadii uu soomo wax kabadan 30 casho. Waxa lamid hadii Ruuxu u safro wadan aanay wali Qorraxdii dhicin wuxuu ahaanayaa mid sooman xitaa dhawr saacadood dheeraad ha noqdaane sababtuna waxa weeye Wadanka aad u safartay lagama arkin bisha, nabiguna wuxuu ina faray inaynaan soomin oo afurin illamaayo aynu ka aragno bisha. { صوموا لرؤيته، وأفطروا لرؤيته} {Ku sooma aragtidiisa, kuna afura argtidiisa}

Cidiise u safarta wadan laga soomanyahay oo bishii laga arkay wuu la soomayaa, waxaanu soo qallaynayaa wixii ka tagay. Hadii ay ka tagtay hal maalin wuxuu soo qallaynayaa hal maalin sidoo kale haday ka tagtay wax hal maalin ka badan wuxuu soo qallaynayaa maalmihii ka tagay. Wuxuu soomayaa laba casho haduu Wadankaa ku soomay 28 casho waa hadii ay bishu ku dhamaatay 30 casho balse hadii ay bishu ku dhamaato 29 casho ama labada wadan midkood ay bishu ku dhamaatay 29 casho wuxuu soomayaa hal maalin kaliya.

Hadaadse u safartay Wadan gaaleed ood ku aragto bisha waad soomaysaa, hadaadse aanad arkin bishii waxaad u celinaysaa soonkaaga meeshii aad katimid.

(10) Soontu yay ku waajibtaa?

Soontu waxay ku waajibtaa qof kasta oo Muslim ah, Qaangaadh ah, Garaad leh, Awooda, Deegaan ah kana madhan waxa manciya soonta. Ruuxa lixdaa sifo laga helo ayey Soontu waajib ku tahay.

1. **Ruuxu waa inuu Muslim yahay sababtoo ah gaalka lagama aqbalayo haduu soomo balse haduu soo Muslimo looma haysanayo cibaadooyinkii uu katagay, waxa daliil u ah inaan gaal waxba laga aqbalayn aayadan; { وَمَا مَنَعَهُمْ أَن تُقْبَلَ مِنْهُمْ نَفَقَاتُهُمْ إِلَّا أَنَّهُمْ كَفَرُوا بِاللَّـهِ وَبِرَسُولِهِ } {Waxa diiday in laga aqbalo sadaqadooda maxaa yeelay waxay ka gaaloobeen Ilaahay iyo Rasuulkiisa..} Kumana waajibayso inuu soo gudo wixii katagay haduu gaalku Islaamo waxaana u daliila aayadan; { قُل لِّلَّذِينَ كَفَرُوا إِن يَنتَهُوا يُغْفَرْ لَهُم مَّا قَدْ سَلَفَ} {Ku dheh kuw gaaloobay haday ka reebtoomaan gaalnimada waxa loo dhaafi wixii hor maray}. Laakiin haduu ku dhinto gaalnimo waxa lagu ciqaabayaa tagida uu ka tagay cibaadooyinka waxaana u daliila aayadan; { مَا سَلَكَكُمْ فِي سَقَرَ ﴿٤٢﴾ قَالُوا لَمْ نَكُ مِنَ الْمُصَلِّينَ ﴿٤٣﴾ وَلَمْ نَكُ نُطْعِمُ الْمِسْكِينَ ﴿٤٤﴾} {Maxaa idin galiyey naarta Saqara (42) Waxay ku jawaabi kamaanan ahayn kuwa Tukada (43) Kamanaan ahayn kuwa quudiya Masaakiinta(44)} Sidaa daraadeed tagida ay ka tageen Salaada iyo Sakada iyo Cibaadooyinka ayaa keenay oo sababay in la caddibo maalinta qayaame. Haduu ruux gaal ahaa Islaamo kuma waajibayso inuu qalleeyo maalmihii soonka katagay, hadii uu Islaamo Shan iyo tobanka Ramadaan masoo qallaynayo 14 ka maalmood ee tagay.**
2. **Ruuxu waa inuu garaad leeyahay maxaa yeelay qofka aan caqli lahayn sida xanuunka waalida ama qof ku dhashay jirro caqligu aanu koraynin laguma laha soon iyo salaad toona.**
3. **Ruuxu waa inuu qaan gaar yahay, waxaana lagu qaan gaadhaa 3 arrimoo iyo mid u dheer dumarka, waxayna kala yihiin: Waa inuu buuxiyo sanadka Shan iyo Toban sano ama Waa in timo kasoo baxaan inta u dhaxaysa cawrada iyo xundurta ama waa in ay biyo yimaadaan riyo ama soo jeed labadoodaba, waxa kale oo gabadha u dheer in ay hesho dhiiga caadada <Xaydka>. Sidaa**

awgeed qofku wuxuu ku qaangaadhaa arrimahaas kor ku xusan xitaa waa hadii aanu buuxinin da’da shan iyo toban sano, dumarka qaarna waxay dhiiga xaydka helaan 15 sano kahor kolkaa waxa ku waajibaya soonka iyo cibaadooyinka kale oo dhan.

4. **Ruuxu waa inuu awood u leeyahay inuu soomo, cidii aan awood u lahayn inay soonto waa laba Nooc: (a) In awood darradaasi ay tahay mid joogto ah sida; Ruuxu gaboobay oo waayeel ah ama qof xanuusanaya oo aan la rajaynayn inuu xanuunka ka bugsado, kolkaas ruuxaas aan awooda u lahayn inuu soomo waa inuu miskiin quudiyaa maalin kasta, hadii bishu tahay 30 maalmood wuxuu quudinayaa 30 miskiin hadayse tahay 29 maalmood wuxuu quudinayaa 29 miskiin. Quudinta miskiinkuna waa laba qeyboood; Qeybta koowaad waxa weeye inuu bixiyo tusaale ahaan Bariis ama gallay qaydhin oo aan la karinin kolkaa waxa lagu miisaamaya Rubuc saac (Miisaankii Nabiga) oo u dhigma miisaanka maanta Laba kiilo iyo Afartan garaam 2,40Kg. Miisaankii Nabiguna wuxuu quudin jiray Afar qof , waxaana wanaagsan in cuntada aad bixinayso aad ku darto iidaan maadaama ay qaydhintahay oo aanay karsanayn. Qeybta Labaadna waxa weeye; inaad kariso cunto ku filan 30 miskiin bishaas, hadayse bishu ku dhamaato 29 maalmoodna waa inaad u kariso bishaas cunto ku filan 29 miskiin. (b) Nooca labaad ee aan awooda u lahayn inuu soomo waa sida qof laga rajo qabo inuu xanuunka ka kacayo, kaas waxaynu leenahay waa inaad soo qallaysaa maalmihii kaa tagay.**
5. **Ruuxu waa inuu deegaan yahay oo aanu safar ahayn, haduu safar yahay wuu afuri kara sida ku cad aayadan: { فَمَن كَانَ مِنكُم مَّرِيضًا أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ فَعِدَّةٌ مِّنْ أَيَّامٍ أُخَرَ } {Ruuxii kalé ee idin kamidka ah ee buka ama safar ah waxaa korkiisa ah inuu soomo ayaamo kale} Waxaana ruuxaa Musaafirka ah u wanaagsan inuu soomaanaado haduu awoodayo. Laakiin hadii aanu awoodayn waa inuu afuro oo uuna qalleeyo maalmaha ka tagay.**
6. **Qodobka lixaad waxa weeye inuu ruuxu ka madhan yahay waxyaalaha diida soonka, wuxuuna qodobkan gaar u yahay haweenka. Soonku waajib ayuu ku yahay haweenka hadii aanay ahayn mid heshay dhiiga caadada**

<xaydka> ama Nifaaska, haday hesho dhiiga xaydka ama nifaaska kuma waajibayo soonku ee way soo celinaysaa maalmihii lagu lahaa oo way qallaynaysaa siduu dhahay Nabigu: (أليست إذا حاضت لم تصل ولم تصم) (Haday Xaydo miyey tukataa ama soontaa) Macnaha hadii haweenaydu ay hesho xayd ma soomayso ee way soo gudaysaa ayaamaha ka tagay sida qofka bukay ee xanuunka ka bugsaday.

- Waxaana u baahan laba arrimood in la baraarujiyo: Waa mid koowaad oo ah in haweenka qaar ay daahirto (xayd ama nifaas ka daahirto) habeenka oo ayna ogtahay inay daahirtay laakiin aanay soomin ayadoo filaysa in hadii aan la qubaysanin aanay soontu ku waaibayn sidaas maaha ee hadii ay habeenka daahir noqoto oo xitaa aanay qubaysan waa ku waajibayaa soonku, soonteeduna way sugnaanaysaa xitaa hadii aanay qubaysanin marka laga reebo qorraxda oo soo baxdo mooyee.
- Haweenka qaarna ayagoo sooman oo qorraxdii dhacday oo ay afurtay balse aanay salaadii Maqrib tukan ayey heshaa Caadadii markaa qaarbaa dhaha; Soontii umaysan ansixin balse sidaas maahee soonteedu waa caadi oo waa saxiix .

Lixdaa sifo ee aan kor kusoo sheegnay hadii qofka laga helo waxa ku waajiba soonta bisha Ramadaan, umana haboona inuu afuro illamaayo xilligeeda laga gaadho.

(11) Candhuuftu miyey jabisaa Soonta?

Candhuuftu ma jabiso Soonta hadii la liqo.

(12) Xaakada oo la liqo miyey Jabisaa Soonta?

Hadii Ruuxu uu liqo Xaako isagoo Sooman waxa jira laba Qawl (xukun) oo kala ah:-

(a) Culumada qaar ayaa tidhi; Xaakadu way jabinaysaa Soonta sida Cuntada iyo Cabitaanka.

(b) Kuwo kalena waxay dhaheen: Ma jabinayso ee waxay qaadanaysaa xukunka Candhuufta oo kale. Hadayba Culumadau wax isku khilaafaana waxa loo noqonayaa Kitaabka iyo Sunnada Nabiga, Asalna waxa ah in xaakadu Soontiisa waxba yeelayn sida Candhuufta oo kale. Waxaana Muhiim ah in aan Candhuufta iyo Xaakadaba lasoo

jiidin oo aan la keenin Afka, hadayba dhacdana waa in la tufaa.

(13) Waa maxay xukunka Cadayga iyo is qurxinta qofka Sooman?

Run ahaantii Cadyga iyo is Qurxinta qofka sooman waa Sunne maalintii iyo habeenkiiba, waxaanu guud ahaan soo gudo galayaa xadiiska Nabiga ee ah;

{السواك مطهرة للفم، مرضاة للرب}

(Cadaygu waa nadiifiyaha Afka iyo raali galinta Rabbiga). Iyo sidoo kale Xadiiskii kale ee Nabiga (لولا أن أشق على أمتي لأمرتهم بالسواك مع كل وضوء) (Hadii aanan Umadayda ku cuslaynayn waxaan fari lahaa Cadayga wayso kasta). Sidoo kale is qurxintu way u banaantahay qofka sooman maalintii iyo habeenkiiba, isqurxintaasi haba noqoto bukhuur, cadar ama saliid. Balse waxa kaliya ee aan la ogolayn ayaa ah in Sanka laga qaato Bukhuurka, maxaa yeelay wuxuu bukhuurku u gudbayaa Afka kadibna Caloosha. Sidaa awgeed ayuu Nabigu (N.N.K.H) u dhahay:

{بالغ في الاستنشاق إلا أن تكون صائماً}

(Biyaha sanka gali -xilliga waysada- mar aad Soomantahay mooyaane.)

(14) Waa maxay xukunka Macjuunka lagau cadaydo Ilkaha xilliga Soonka?

Macjuunka ama Dawada Cadaygu waxay noqonaysaa laba xaaladood, ta koowaad waxa weeye in Macjuunku ama Dawada Cadaygu tahay mid xoogan oo u gudbaysa Caloosha, taasi ma banaana waxaana daliil u ah Xadiiskii uu Nabigu lahaa (Biyaha sanka gali -xilliga waysada- mar aad soomantahay mooyaane.) Maxaa diiday in xilliga Soonka biyo sanka xoog loo galiyo sababtu waxa weeye in aanay biyuhu u gudbin Caloosha oo markaas Soontiisii ka jabin, sidaa darteed hadii Macjuuku yahay mid xoogan oo Caloosha u gudbi kara ma banaana, ama ugu yaraan waa Karaahiyo. Xaalada labaad waxa weeye in Macjuunku yahay mid aan xooganayn oo aan Caloosha u gudbayn, taasi wax dhib ah malaha maxaa yeelay Afka biyo ayaa lagu luqluqdaa xilliga Waysada taasina waxba ma yeesho Soonta, sidaa darteed

wuxuu qaadanayaa xukunka luqluqashada biyaha ee xilliga Waysada.

(15) Cuntada oo la dhadhamiyo miyey burisaa Soonta?

May, dhadhamiska Cuntadu ma burinayso Soonta hadii aanu liqin, hase ahaatee waa in ay xaajo laga furan waayo tahay, hadayba xaajo keento oo ay waxun Calooshaada galaan markaas Soontu kaama jabayso.

(16) Ma banaan tahay in Ninku la cayaaro ama dhunkado Xaaskiisa isagoo Sooman?

Way u banaanatahay in Ninku la cayaaro ama uu dhunkado Xaaskiisa isagoo Sooman, marka laga reebo inuu ka cabsado in ay Biyo ka yimaadaan, hadayba Biyo yimaadaan way burtay Soonkaasi, haduu Soonkaasi yahay Ramadaana waa inuu sii soomanaad inta ka hadhsan Maalintaas, waana inuu soo qalleeyaa maalintaas. Balse hadii Soontaasi aanay ahayn Ramadaan wuu iska Afuri karaa maalintaas, hadii ay tahay Soon waajib ahna waa inuu soo qalleeyaa hadayse ahayd Soon Sunne ahna waxba masii wadayo soonkiisa ee wuu Afuri karaa, dhibna malaha haduu soo qalleeyo.

(17) Xanta iyo isku dirka Dadku miyey Jabisaa Soonta?

Xanta iyo isku dirka Dadku ma jabiyaan Soonta balse waxay yaraysaa Ajarka ruuxa Sooman, Nabiguna (N.N.K.H) wuxuu dhahay: (من لم يدع قول الزور، والعمل به، والجهل فليس لله حاجة في أن يدع طعامه وشرابه) {Cidii aan ka tagin hadalka kiisa xun iyo ku dhaqankiisa iyo Jaahilnimada, Ilaahay dan kama laha inuu ka tago Cuntadiisa iyo Cabitaankiisa9.}

(18) Waa maxay Xukunka ruuxa Markhaati Beenaalaha ah ee Sooman?

Markhaati Beenaaluhu waa Danbiyada ugu waaweyn waana Qofka oo u marag kaca waxaanu ka war qabin, mana buriso Soonka laakiin Ajarkiisa ayey yaraynaysaa.

(19) Cuntada xad dhaafka ah ee la diyaariyo xilliga Afurada miyey yaraynaysaa Ajarka Soonta?

Ma yaraynayso Ajarka Soonka balse cuntada iyo cabitaanka xad dhaafka ah asal ahaa ma banaana siduu Allah (S.W) uu dhahay: {وكُلُوا وَاشْرَبُوا وَلاَ تُسْرِفُوا إِنَّهُ لاَ يُحِبُّ الْمُسْرِفِينَ}{Cuna oo Caba hana xad gudbina maxaa yeelay Ilaahay ma jecla

kuwa xad gudba} hadiiba Cuntadu badantahay waxa wanaagsan in la sadaqeeyo.

(20) Waa maxay xukunka Qofka Soontu kaga jabto xidhiidh gogoleed oo uu la wadaago xaaskiisa Maalinta Ramadaan?

Hadii Soontu tahay Ramadaan oo ay ku jabto galmo waxa ku waajiba Ruxaas kafaaro gud ah: Inuu xoreeyo Qoor, haduusan awoodin waa inuu soomo laba bilood oo isku xigta, haduusan awoodayn waa inuu quudiyo 60 Miskiin.

Kororso Aqoontaada Su'aalo iyo Jawaabo oo Diini ah iyo Aqoon guud

1-Su'aal, Sheg meeshay eheed meeshii ay aayada quraanka ugu horeesay ku soo degtay?
1-Jawab, meeshii ugu horeesay ay aayada quraanka ku soo degto waxay eheed Xiraa.
2-Su'aal, sheg imisa sano ayuu Quraanka soo dagaayey?
2-Jawab, Wuxu soo dagaayey 23 sano.
3-Su'aal, Sheg Quraanka yaa u keeni jiray Rasuulka (NNKH) Ama sidee buu ku soo gaari jiray?
3-Jawab, Rasuulka (NNKH) waxaa u keeni jiray Jabriil (CS) isagoo allahiisa ka soo qaadi qaadaaya.
4-Su'aal, Sheg kumuu ahaa Safiirkii ugu horeeyey ee uu Rasuulka (nnkh) uu madiina i diro si uu u baro Quraanka?
4-Jawab, wuxu ahaa wuxu ahaa Muscab Bin Cumeyr (RC).
5-Su'aal, Sheeg asxaabtii uu Rasuulka (NNKH) u doortay inay quraanka soo dagaya uruuriyaan?
5-Jawab, Wuxu u doortay Sayid Bin Thaabid, Ubaya Bin Kacab, Mucaad Bin Jabal, Mucaawiye Bin Abuu Sufyaan, iyo Afartii Khaliif.
6-Su'aal, Sheeg ninkii ugu horeeyey ee Quraanka aruuriya?
6-Jawab, Ninkii ugu horeeyey ee Quraanka aruuriya wuxu ahaa Abuu-kabar Sadiiq (RC).
7-Su'aal, Sheeg sababta kaliftay in quraanka la isu soo aruuriyo hadaba sababta maxay ahayd?
7-Jawab, Sababta waxay ahayd (Asxaabtii Quraanka xifdisaney oo dagaalada aad ugu dhimanaayey) Sida dagaalkii ka noqoshada meesha la yiraahdo
Yamaama markaa waxaa laga baqay in quraanka lumo, Sidaas darteed baa dib loogu aruurshay Quraanka.
8-Su'aal, Sheeg kumuu ahaa asxaabigii uu abuu-bakar u xil saaray ama madax uga dhigay asxaabtii soo ururineesay quraanka?
8-Jawab, Abuu bakar (RC) Wuxu madax uga dhigay asxaabtii quraanka soo uruurineesay asxaabiga la yiraahdo Sayid binu Thaabid.
9-Su'aal, Sheeg qofkii ugu horeeyey ee Islaamka u hijrooda ?
9-Jawab, Qofkii ugu horeeyey ee Islaamka u hijrooda waa Cusmaan Bin Cafaan iyo RUkhiya muxammed rc.
10-Su'aal, Sheeg maxay kala yihiin muhaajiriin iyo ansaar?
10-Jawab, Waxay kala yihiin labo (2) 1- Muhajiriin waxaa ladhahaa asxaabtii maka ka timid oo timid madiina. 2-ansaar-na waa asxaabtii Madiina loogu yimid

11-Su'aal, sheeg buurta Africa ugu dheer magaceeda?
11-Jawab, Buurta africa ugu dheer waxa ladhahaa Kalaminjaara.
12-Su'aal, Sheeg Buurta kalaminjaara oo ah Buurta africa ugu dheer wadanka ey ku taalo?
12-Jawab, Buurta Kalaminjaaro waxay ku taalaa xadka tanzania iyo kenya.

13-Su'aal, Sheeg, Wax marka ay siyaadaan sii naaqusa?
13-Jawab, waa dayaxa.
14-Su'aal, Sheeg goorma ayuu geeriyooday Sayid Maxamed Cabdule Xasan?
14-Jawab, Sayid Maxamed Cabdule Xasan wuxu geeriyooday sanadkii 1921.
15-Su'aal, Sheeg wadankii ugu horeeyey oo Afrikaan ah diyaarad lagu weeraro?
15-Jawab, Wadankii ugu horeeyey oo Afrikaan ah diyaarad lagu weeraro (Duqeeyo) waa Soomaaliya.
16-Su'aal, Sheeg meeshii ugu horeesay oo soomaaliya ah Misana diyaarad lagu weeraro?
16-Jawab, Meeshii ugu horesay oo Soomaaliya ah diyaarad lagu weeraro waa degmada teleex, Waxana lagu weeraray xiligii sayid Maxamed Cabdule Xasan.
17-Su'aal, Sheeg dagaalkii u dhaxeeyey Sayid Maxamed Cabdule Xasan iyo England (British) sanadkii uu bilowday?
17-Jawab, Dagaalkii u dhaxeeyey Sayid Maxamed Cabdule Xasan iyo england (British) Wuxu bilowday sanadkii 1900-kii
18-Su'aal, Sheeg gobalka ugu weyn Soomaaliya?
18-Jawab, Gobalka ugu weyn Soomaliya waa Gobalka Bari, magaaladiisana waa Boosaaso.
19-Su'aal, sheeg wadanka Afrika ugu dhulka balaaran?
19-Jawab, Wadanka afrika ugu dhulka balaaran Waa wadanka Suudaan (Sudan)
20-Su'aal, Sheeg Sadaam Xuseen oo ahaa madaxweynihii hore ee ciraaq hadaba sheeg sanadkii uu dhashay?
20-Jawab, Sadaam xuseen wuxu dhashay sanadka marka uu ahaa april 28, 1937. alla yaa raxma sadaam xuseen majiid aamiin aamiin aamiin.....